

QIIMAHA: ETB 13.20
ISBN: 978-99944-2-106-0

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada

WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA BUUGA ARDAYGA FASALKA 5aad

JDFI
WW






# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## BUUGA ARDAYGA

## FASALKA 5aad




Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada



## Daryeelka haboon ee Buuga Ardayga

Buugani waa hantida dugsigaaga si haboon u daryeel, ha u geysan waxyeelo hana xoorin buugan.

Waa kuwan 10 siyaabood oo kaa caawin karra daryeelista buugan:-

1. Buuga ku jaldiyee walxo adag sida bacda balaastigada jaraa'idka duugaaha ama wargeysyada oo kale.
2. Buuga dhig had iyo jeer meel qalalan oo nadif ah.
3. Xaqiiji iney gacmahaaga yihiin nadiif marka aad isticmaalayso buugan.
4. Waxba ha ku qorin jaldiga kore iyo gudaha hoose ee boggaga buuga.
5. Astaynta buuga bogagiisa u isticmaal jeex waraaq ah ama callamad-xadhig yar.
6. (Bataatan), mar naba ha ka jeexin buuga wax sawir ah ama waraaq ah.
7. Hadii ay jeexanto waraaq ka mida ah boggaga buuga fadlan isku dhaji adiga oo isticmaalaya xabag/koolo.
8. Si taxadar ku jiro buuga u geli boorsada
9. Si taxadar ku jiro u maaree marka aad cid kale u dhiibuyso/u gudbinayso buuga
10. Isticmaalka ugu horeeya ee buuga cusub fadlan u/jiifi dhinaca bogiisa dambe, islamarkaana markiiba fur dhawer bog adigoo si tartiib-tartiib ah u kala qabanaya boggaga. Taasina waxay jaldiga buuga u horseedi doontaa xaalad wanaagson.

Calamada Dawlad - Deegaanada ay ka kooban tahay Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalke Itoobiya


Calanka Dawlad- deegaanka Tigraay


Calanka Dawlad- deegaanka Canfarta


Calanka Dawlad- deegaanka Amxaarada


Calanka Dawlad- deegaanka Oromiya


Calanka Dawlad- deegaanka Somaalida


Calanka Dawlad- deegaanka Benishangul- Gumus


Calanka Dawlad- deegaanka Qaramada, Qowmiyadaha iyo shucaubta Konfureed


Calanka Dawlad- deegaanka Gambeela


Calanka Dawlad- deegaanka Hararida

XubnahaDawlad-Deegaanadu waxay u dhigan yihin sida ku xusan qodoba 47aad ee dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga federaalka Itoobiya.

# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## BUUGA ARDAYGA
## FASALKA 5aad

**Qoraha :**
Maxamed Cabdi Rooble
Cabdiraxmaan Axmed

**Tafatirayaasha:**

Maxamed Bade
Maxamed Faarax
Deeq Axmed

**Jamhuuriyda Dimuqraadiga Federaalaka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada**

**Laxmi Publications**

## Mahadnaq

Dib u habaynta, daabacaada iyo qaybinta buugta waxaa maalgaliyay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud ee loo yaqaano (GEQIP), kasoo ujeedadiisu tahay in la kobciyo tayada waxbarashada ee ardayda fasalka 5-8 ee dhamaan dugsiyada dalka Itoobiya.

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya deeqda ay ka heshay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud (GEQIP) waxay usoo martay ururka horumarinta caalamiga ah (IDA) Credit No. 4535ET, the Fast Track Initiative Catalytic Fund (FTICF) iyo qaybaha kale ee bahwadaagta horumarinta Talyaniga, gargaarka Holand iyo Boqortooyada Ingiriiska ee ka timaada waaxda horumarinta caalamiga ee loo yaqaano (DFID).

Waxaa kale oo gacan ka gaystay soo saarista buuga ardayga iyo Kan baraha ee ku lamaan, shaqsiyaad iyo ururo (hay'ado) kala duwan oo fara badan, islamarkana aanan halkan lagu soo koobi Karin. Hase yeeshe, waxaa xusid gaar ah mudan, Mayra Maarbi, oo wakhti badan gelisay kobcinta awoodeed ee qorayaasha buuga ee wasaarada, si loo soo saaro qalab xidhiidh isdhexgal iyo jawi saaxiibtinimo la leh hawlaha baris-barashada. Taageerada maaliyadeed ee u midawga Yurub u fidiyay hawlaha shaqo ee Mayra ka waday Itoobiya, waa mid loo jeedinayo amaan/bogaadin. Waxaa kale oo mahadnaq halkan looga soo jeedinayaa: Golha Faderashinka ,-J.D.F.I, Wakaalada Warbaahinta Itoobiya, Wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska , Wasaaradii hore ee Warfaafinta, Macadka daraasaadka Itoobiya,Ururka Macalimiinta ee Itoobiya, iyo Wakaalada wax soosaarka iyo baahinta (fidinta) qalabka tacliinta ee Itoobiya,oo dhamaantood u fidiyay taageero dhanka sawirada ah. Waxaa mahadnaq mudan shaqadii Helen PaPworth ee tabaruca ahayd, iyada oo ahaan jirtay Waaxda Cilmiga Milgaha qaranka iyo Anshaxa islamarkana tafatirtay,hubisay buuga ardayga iyo buuga baraha ee ku meelgaadhka ahaa.Waxaa kale oo mahadnaq mudan tabarucayasha Ingiriiska ee lagu meleeyay wasaarada dhexdeeda ee awood noo siiyay inaan isticmaalo khibradooda mashruucan iyo kuwo kaleba.

Waxaa kale oo la ilaawin Karin oo mahadnaq balaadhan mudan Xafiiska Waxbarashada Dawlad Deegaanka Somalida oo door wayn ka qaatay dadaalka loogu jiro in la soo saaro buug taya leh.

© Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada.

Daabacaada koobaad, 2002 T.I

Dib u qabaynta, daabacaad iyo soo saarida buugta waxaa wasaarada waxbarashada u sameyay shirkada gaarka ah ee daabacaada Laxmi iyo Gopsons Paper Ltd, Indiya heshiiska tirsigiisu yahay GEQIP No.ET-MOE/GEQIP/IDA/ICB/G-10/09-B.

Xuquuqda buugani way dhawran tahay.Qayb ka mid ah daabacaada dib looma saari karo lamina kaydsan karo si markale dib loogu soo saarro ayadoo la adeegsanayo qalabyada kala duwan ee daabacaada. Waa in ogolaansho laga helo mulkiilaha ama fasax qoraal oo ku ogolaanayo inaad isticmashid daabacaadaha lagu mamnuucay xeerarka Jamhuuriyafa Dimuqraadiga Fedaraalka Itoobiya eek u cad Federal Negarit Gazeta,bayaanka tirsigiisu yahay 410/2004 ee xuquuqda daabacaada(Copy Right and Neighbouring rights protection proclamations, 10th year, No, 55, Addis Ababa, 19 July 2004.

# Hordhac

Waxbarashada iyo horumarku waa laba shay oo aad iskugu dhaw islamarkana aan kala maarmayn. Taasi waa sababta ugu muhiimsan ee aan u leenahay waxbarashadu waa furaha horumarka ee Itoobiya.

Dunida casriga ah ee aan ku noolahay qof kasta wuxuu u baahan yahay inuu yeesho a qoon cusub, xirfad iyo aragti wanaagsan. Waana u jeedada manhajkan, kaas oo ka turjumaya nidaamka waxbarasho ee dalka, oo ay tahay inuu jawaab ka bixiyo isbadalka xaaladahan.

Mudo shan iyo toban sano ah ayaa laga joogaa markii ay Itoobiya hirgalisay siyaasada waxbarashada iyo tababarada. Tan iyo xiligaas, dalkeenu wuxuu kasoo hoyay guulo wax ku ool leh dhinacyada fidinta waxbarashada, isku dhelitirnaanta iyo jaan go'naanta mabaadiida waxbarasho. Waxaa kale oo dadaal dheeri ah loo galay loona gali doona kor u qaadida tayada waxbarashada.

Si loo joogteeyo horumarkan, waxay wasaarda waxbarashadu dajisay jihooyin lagu horumarinayo manaahijta. Qorshahu wuxuu taabanayaa dhamaanba maadooyinka iyo fasalada ka hor waxbarashada dugsiyada hoose, dugsiyada hoose, dugsiyada dhexe, waxbarashada guud ee dugsiyada sare iyo tan heerka u diyaargarowga tacliinta sare. Ujeedadeeduna waa in la hirgaliyo qodobadii iyo mabaadiida ku cad siyaasada waxbarashada iyo tobarada, waxayne gogol xaadh u tahay diyaarnta dhamaanba qabbyana manaahijta la xidhiidha uuna ka mid yahay buuganta tilmaanu Bare Iiyo kan ardayda ee ku lammaaan.

Daabacaada iyo dib usoo saarida jihooyin u dajisan manhajka iyo buugaag cusub ama tilmaame bare ma ehe xal ka kali ah ee lagu xaqiijin karo tayada waxbarashada ee dal walba. Kor u qaadis joogta ah waxay u baahantahay ka qaybgalka dhamaanba qaybaha doorka ku leh. Kaalinta barayaasha waa in ay nqote mid aad u firficoon u isugu jirta heer bare ilaa mid hawlwadeen ah ama hormuud. Si gacan loogasiiyo arintan, barayaashu waxay heleen, ayna sii wadandoonaan tobobar iyo kor uqaadida xirfadoodo.

Wasaarada waxbarashada

# Tusmada Buuga


| | | |
|---|---|---|
| Cutubka 1: | Nidaamka Dimuqraadiyada | 1 |
| Cutubka 2: | Saraynta Sharciga | 11 |
| Cutubka 3: | Sinaanta | 23 |
| Cutubka 4: | Cadaalada | 32 |
| Cutubka 5: | Wadaniyada | 43 |
| Cutubka 6: | Masuuliyada | 53 |
| Cutubka 7: | Dhaqan Hawl-karnimo | 62 |
| Cutubka 8: | Isku-filaanshaha | 74 |
| Cutubka 9: | Kaydsashada | 84 |
| Cutubka 10: | Ka qaybgalka firfircoon ee Bulshada | 94 |
| Cutubka 11: | Hamiga Aqoon Raadiska (raadinta Cilmiga Waxbarasho) | 103 |

CUTUBKA 1

# Nidaamka Dimuqraadiyada

Ujeeddooyinka Cutubka

Marka ardeydu dhammaystirto barashada cutubkan kadib waxay awoodi-doonaan in ay:

- Kordhiyaan fahamka macnaha Diimuqraadiyada iyo nidaamka diimuqraadiga ah.
- Gartaan nidaamka diimuqraadiga ah xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeed ee ay tahay in la daryeelo.
- Fahmaan macnaha faraqyada ama aragtiyada lagu kala duwan yahay siyaabaha faraqyada la isu-waafajin karo islamarkaana loo wada noolaan karo.
- Fahmaan macnaha dawladaha heer fadaraal iyo heer deegaan.
- Fahmaan macnaha xidhiidhka dibbada.

## 1.1 Waa maxay Dimuqraadiyadu?



Jaantuska 1.1 Doorashada horjoogaha fasalka



Jaantuska 1.2 Nidaamka sharciga iskuulka

Waxaa badanaa maqashaan erayga dimaqraadiyada balse inta aynaan gudo galin macnaha dimuqraadiyada waxaad akhridaan sheekadan soosocota oo xambaarsan ama ku tusaysa macnaha dimuqraadiyada, intaydaanse sheekada akhrinin barahiina u sheega waxaad ka taqaanaan macnaha dimuqraadiyadda iyo waxaad ka maqasheen.

Mundane Rooble waa baraha masuulka ka ah Fasalka 5$^{aad}$ ee dugsiga Hadhwanaag.Todobaad ayaa kasoo wareegtay inta sanad dugsiyeedka cusub labilaabay waxbarashada.Bare Rooble wuxuu ogsoonaa inu muuse ahaa horjoogihii hore ee fasalka sanadkii lasoo dhaafay kasoo uu doortay barihii masuulka ka ahaa fasalka sanadkii lasoo dhaafay. Sidaas awgeed bare Rooble wuxuu waydiiyay ardayda in uu muuse horjooge kasii ahaado fasalka iyo in ay doortaan horjooge cusub sanadkan. Ardayda badankoodu waxay rabitaankooga ku muujiyeen in horjooge cusub la doorto. Halka qar tiro yar ka doonayeen inuu muuse horjooganimada sii wato.

# Nidaamka Dimuqraadiyada

Marka waxaan heshiis lagu gaadhay in jagada horjooganimada loo tartamo. Sidaas awgaad ardayda fasalka 5$^{aad}$ waxay horjooganimada usoo sharaxeen inay u tartamaan ardayda kala ah, muuse, mustafe iyo foosiya.Ardayga mustafe wuxuu helay 15 cod, ardayga muusena wuxuu helay 12 cod, 40 –ka cod ee soo hadhayna waxay codkooga siiyeen ardayad foosiya.Hadaba ardayad foosiya waxay noqotay horjoogaha rasmiga ee fasalka shanaad madaama oo cod aqlabiyad leh lagu doortay.Ardayda fasalka shanaad waxay ku faraxsan yihiin inay sanadkan yeeshaan horjooge cusub oo ay si dimuqraadi ah u soo doorteen. Foosiyana waxay mahad naq halkaas uga soo jeedisay saaxiibadeed codka aqlabiyada leh ku soo doorteen, iyagoo isleh way matali kartaa ardayda fasalka shanaad ee dugsiga Hadh wanaag, islamarkana ugu shaqayni doontaa si xilkasnimo ku dheehan tahay. Haddaba ardayeey, marka la leeyahay dimuqraadi waa kaasi. Waxayna la dhacsan yihiin inay noqdaan mulkiilayaasha awoodeed. Waxay fahmeen wanaaga nidaamka dimuqraadiga ah ee u horseeday inay iyagu codkooda ku soo doortaan horjoogihii hogaamin lahaa fasalka. Waxayna isla qaateen hadii ay xilka loo doortay ka soo bixiwaydo horjoogada cusub inay cid kale oo ku haboon usoo dooran donaan xilka horjooganimada fasalka. Horjoogihii horena wuxuu si nabad gelyo leh xilka ugu wareejiyay, horjoogaha cusub ee loo doortay fasalka.

## Layliska 1$^{aad}$

Ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Marka aad isku eegtaan qoraalka iyo sawirada kor ku yaala waxaad qeexdaan waxa ay tahay waxa aad ka fahanteen dimuqraadiyada.
2. Macnaha dimuqraadiyada ee aad su'aasha kobaad kaga jawaabteen in intee le'eg ayuu u egyahay casharka ka hor macnihii aad siiseen.
3. Maxaa dhibaato ku jirta hadii bare rooble horjoogaha fasalka muuse ka dhigo inuu sii wado? Ka wada hadla.

Erayga "Dimuqraadi" waxaa uu asal ahaan ka soo jeedaa dhulka Giriiga hal kaas oo la, aaminsanyahay in markii ugu horaysay kasoo askuuntay. Haddaba erayga oo kasoo askumay labo eray ee " Shacab" iyo " maamul" marka layskugeeyo waxaa uu kadhiganyahay "Maamulshacab". Sidaas sawirka 1.1 ee kor ku xusan ku arkayseen habka ardaydu u dooranayeen horjoogaha fasalka ayay shacabkuna cida hogaaminaysa iyo cida maamulaysa ku dooranayaan rabitaankooda islamarkaana hogaamiyaha ay doorteen u maamulayo ayaan odhan karnaa nidaam dimuqraadi ah.

Sidaad sawirka 1.2 ee kor ku soo aragteen habka nidaanka dimuqraadiga ah ardaydu iskuulkooda dhexdooda ugu sameeyeen dood xeer hoosaadka iskuulka iyaga oo raacaya habka dimuqraadiyadeed islamarkana siinaya fikrad sixitaan ah, si fir fircoona uga qaybgaleen ayay dhamaan shacabku arimahooda marka ay go'aan ka gaadhayaan ayay habka go'aan bixinta uga qaybgalayaan.

Guud ahaan marka nidaamka dimuqraadiga lagu dooranayo hogaamiye cida ay khusaysaa si isku mida ayay doorashada uga qaybgalayaan.Codka badan qofka lagu doorto ayaa horjooge ama hogaamiye noqonaya.Nidaamka dimuqraadiga shacabku waa inuu ka dhigo mid khuseeyo oo ay go'aan kasta si fir fircoon uga qaybgalaan.

## Layliska 2$^{aad}$

Ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Iskuulkiina dhexdiisa doorashada horjoogaha fasalka iyo ka doodida nidaamka sharciga iskuulka mooye, May jiraan waxyaabo kale oo qeexaya dimuqraadiyada? Hadii ay jiraan sheeg tusaalooyin? Hadayna jirina faahfaahi siday hawlaha dimuqraadiyadeed u jiri lahaayeen?
2. Qeex faa'iidada ay leedahay habka dimuqraadiyadeed ee la idiinku sameeyay fasaladiina iyo iskuulkiina dhexdiisa?

## 1.2 Macnaha Xuquuqaha Aadimiga iyo ta Dimuqraadiyadeed

### 1.2.1 Macnaha Xuquuqaha Aadaminimo?

- Macneeya waxa ay tahay xuquuqda bani'adamku waraaqadna ku qora idinka oo isticmaalayaa odhaahdiina.
- Macnaha aad qorteen saaxiibadaada kuu dhaw ka wada hadla.

Adamuhu Waa dad, xuquuqda Aadamiguna waxaa weeyi qof kastaaba inuu helo xuquuqda qofnimo ee uu leeyahay laguna tixgaliyo. Waxayaabaha ugu waawayn xuquuqaha Aadamiga waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

1. Xuquuqda nololeed ee qofka.
2. Ilaalinta xuquuqda Jidhkiisa.
3. Inaan sharcidarro lagugu qaban, lagugu eedayn, laguna xidhin.
4. Xuquuqda sinaanshaha.
5. Xuquuda xoriyadeed ee u leeyahay Aaminaadiisa iyo Diintiisa.

### 1.2.2 Macnaha Xuquuqaha Dimuqraadiyadda



Jaantuska 1.3 samaynta kooxaha iskuulka

- Waxaad sheegtaan waxay tahay xuquuqda dimuqraadiyadeed ee idiinka muuqata sawirkan.
- Waxaad qeexdaan waxa ay tahay xuquuqda dimuqraadiyadeed idinka oo ka duulaya sawirka.

Dhinaca kale, xuquuqaha dimuqradiyadeed waa xuquuqu ay dalalka dimuqraadigi ah siiyaan muwaadiniintooda. Xuquuqahan dimuqraadiyadeed waxaa loo xadidi Kara siyaaba kala duwan sida, sharciyi & qaynuuno. Sidaas daraadeed, weey ka duwan yihiin xuquuqaha Aadamiga. Sidoo kale, dastuurka JDFI maadama ay xuquuqahani yahiin kuwa lagudhaqangalin karo oo kali yah marka nidaam dimuqraadiyadeed oo hufan la helo wuxuu mudnaanta siinayaa arimahan. Haddaan tusaale usoo qaadano qaar kamid ah xuquuqaha dimuqraadiyadeed ee kuqoran dastuurka JDFI *cutubkiisa Afraad qodobada hoosyimaado, waxa kamid ah: qoddobka 29 aad xoriyada fikirka, Aragtida iyo hadalka.* Xuquuqda ay u leeyihiin inay ururo samaystan waa mid cadaynaysa xuquuqda dimuqraadiyadeed. Dhinaca kale ardaydu iskuulkooda dhexdeeda waxay xuquuq u leeyihiin inay samaystaan kooxo kala duwan iyo inay ka qaybgalaan kooxahaa kala duwan dhexdooda. Ardaydu si ay xuquuqdooda uga faa'iidaystaan waxaa looga baahan yahay inay illaaliyaan sharciga iskuulkooda. Marka ay ka qaybgalayaan kooxahan waxaa waajib ku ah inay ilaaliyaan sharafta iyo amniga bulshada iskuulka iyo ardayda kaleba. Erayga odhanaya xuquuq wuxuu xambaarsan yahay waajibaad. Xuquuq kalideed wax dhamaystiran ma'ha. Mar kasta oo xuquuqi jirto waajibaadna wuu jiraa. Hadaba waxaa haboon inaan garano marka aan leenahay xuquuq inay dadka waajibaadka saran iyo masuuliyada oo wada socota ay tahay. Sidaa darteed qofkasta marka uu doonayo ka faa'iidaysto xuquuqdiisa waa inuu u isticmaalo xaalad aan jabinayn xuquuqda dadka kale islamarkaana waajib ka saran yahay inuu tixgaliyo xuquuqahooda maskaxdana ku hayo.

### Layliska 3aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Ku qeex tusaale macnaha xuquuqda bani'adamnimo.
2. Ku qeex tusaale macnaha xuquuqda dimuqraadiyadeed.

## 1.3 Kala Duwanaanshaha

### 1.3.1 Kala Duwanaanshaha ka dhex muuqda Ardayda Fasalka iyo Dugsiga



Jaantuska 1.4 wakhtiga biririfta ardayda

- Aad u fiiri jaantuska 1.4. Adiga oo agtaagan ardayda iskuulkiina dhexdiisa sheeg kala duwanaanshaha ka muuqda ardayda dhexdeeda.
- Sheeg Shan ardaygu kuwa kale kaga duwan yahay iyo shan uu ka sawaabiyo ardayda kale ee iskuulkiina.

Kala duwanaanshuhu waa midabka jidhka, diinta, da'da, jinsiga, midabka, dherer, kartida iyo wim uu midba midka kale u ekeen weeyaan. Marka ay jira waxyaabo badan oo midi kuwa kale ka sawaabiyo waxaa jira wax badan oo ay ku kala duwan yihiin. Ahaan.Sidaa darteed kala duwanaanshuhu ma aha mid keenaya iska horimaansho. Kala duwanaansha in layiraahdo ma aha mid sax ah markaa waxaa haboon in la sameeyo in la ogolaado kala duwanaanshaha la isna tix galiyo si nabad loogu wada noolaado.

Dadku markay si nabadgalyo ah u wada nool-yihiin kala duwanaashahooda waxay ku xalin karaan dodo iyagoo is tixgalinaya sin dhagaysanaya.

**Layliska 4aad**

1. Waa maxay kala duwanaanshuhu?
2. Maxaan u jeednaa marka aan leenahay kala duwanaanshuhu waa quruxdeena?

### 1.3.2 Isu Dulqaadashada kala duwanaanshaha Nabad ku nolaanta

- Xasuusta wakhti saxiibada, walaalaha Isfahan la'aan isku dagasheen idinka oo ciyaaraya ama wada sheekaysanaya.
- Saxiibkaga kula fadhiya u sheeg dhacdadan. si gaaban ugu sheeg waxaad isku dagaasheen wuxuu ahaa iyo wixii dhacay wakhtigaa.

***Safiya iyo fadumo***

Safiya iyo fadumo waxay ahaayeen saxiibo aad isku jecel. Safiya qoyskoodu wuxuu ahaa reemiyi qoyska fadumona wuxuu ahaa ganacsade. Safiya iyo faadumo saacadaha ay fasaxa yihiin arima badan ayay ka waadahadli jireen marmarna way doodi jireen. Hase ahaate maalina iskuma layn kala duwanaasho fikradeed. Wayna is aaminsanayeen laakiin midkood ayaa kala duwanaanshaha isaga oo tixgalinaya islamarkana qaadanaya wada noolaanshaha ayay si nabad ah ku dhamaynayeen.

Laakiin maalin ayaa Safiya iyo faadumo uu soo wajahay wax yar oo ka duwan arimihii hore kaas oo ahayd ree miyiga iyo ganacsadaha midkee ayaa aad faa'iido ugu leh wadanka.

Safiya markay tidhi ree-miyiga fadumana waxay tidhi ganacsadaha. Labaduba wakhtiga ka duwan doodahoodii hore. Codkoodana kor ayay u qaadeen wayna qaylyayeen ismana dhagaysanayn ee mid kasta wuu hadlayay.

Wakhti yar kadib labaduba way islayaabeen oo waxay yidhaadeen maxaana helay? Maxaan noqonay? Kadib waxay fahmeen waxa sabab u ah doodoodii iyo ismaqal la'aantooda. Sababta ay isku fahmi waxay ahayd safiya oo qoyskoodu ahaa ree-miyi taaso rabtay inay ree-miyiga waynayso. Fadumana waxay rabtay qayskeeda oo ahaa ganacsade inay waynayso waxa ay sameeyeen inayna haboonayn oo ay khaldanayd ayay amineen. Ugu danbayn waxay isla fahmeen inay dabargooyaan kala duwanaanshahooda hanoqoto

reemiyi ama hanoqoto ganacsade inay wadanka faa'iido waxtar leh u leeyihiin. Waxay fahmeen haddii ree-miyigu waayo ganacsade ama ganacsaduhu waayo reemiyi uu shaqadiisu aysan noqonayn mid waxtar leh. Waxaana la garaacay birtii saacada lagu noqonayay fasalada. Safiya iyo fadumo intay meeshii ka kacee oo ay garabka isqabsadeen ayay tageen xaga fasalka.

## Layliska 5aad

Idinka oo ku salaynaya sheekada kor ku xusan waxaad ka jawaabtaan su'aalaha soo socda

1. Maxay ahayd safiya iyo fadumo halkay iska dhagaysan jiren waxa ka qaylisiiyay?
2. Waa maxay waxyaabaha aad u baahan tahay adiga oo dulqaadanaya kala duwanaanshaha aad nabad kula nolaato kuwa kale?
3. Maxaad aqoon ka hesheen taariikhdii safiya iyo fadumo?

*Iyada oo la du qaadanayo kala duwanaanshaha nabadna lagula nolaanayo kuwa kale ayaa waxaa muhiima oo loo baahan yahay dulqaad iyo is fahan.*

*Waxaan fahanay in dabiici ahaan ay jiraan waxyaabo badan oo ay ku kala duwayihiin. Dhamaan dadku waxay leeyihiin fikrad, aragti iyo aaminaad u gaar ah.Iyada oo ay jirto fikrad iyo aragti kala duwan hadana qofkasta wuxuu qabaa inay fikradiisu sax tahay ma odhan kartid waa khalad.Waxayna dhalinaysaa isku dhac iyo buuq badan.Sidaa darteed isku dhac iyo buuq si ayna u dhici waxaa muhiim ah in loo dulqaado kala duwanaanshaha si nabad loogu wada nolaado la isna dhagaysto.*

Kala duwaanshahu waa dadka oo ku kala duwanaado kuna kalagadisnaado midabka, luuqadaha, dhaqanka, caadooyinka, aragtida ama xitaa fikirka.Inaan tixgalino kala duwanaanshaha ama aqbasho islamarkana dulqaadato kala duwanaanshaha nabadna ku noolaato macnaheedu waa aaminaada, aragtida,midabka,jinsiyada iwm…inaga oo kuwaa ka duwanayn oo tixgalina xuquuqda qof kasta islamarkana illaalina sharaftiisa.Kala duwanaanshaha bani'adamka waa inaan ku tirinaa khayraad muhiim ah una bognaa dhamaan nooc walba oo bani'adama dhaqankiisa, diintiisa, jinsigiis a iwm…faa'iidooyina inoo leeyahay aan aaminaa.Inaga oo sidan samaynayna ogsoon inuu jiro kala duwanaanshaha ayuu siinaya inay nabad iyo jacayl kuwa nolaadaan.

## Layliska 6aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda


1. Idinka oo waalidiintiina waydiinaya waxaad keentaan qoraal hal bog ah oo ku saabsan sida xubnaha qoyska dhexdiisu ay kala duwanaanshaha u aqbalaan iyo sida kala duwanaanshaha isku dulqaadashada nabad ku nolaanshaha la waayo isku dhacyada lama filaanka ee ay keenaan iyo xalka ay siiyeen isku dhacyadaas.
2. Ugu danbayna waxaad sheegtaan aqoonta aad ka hesheen dhacdadan lama filaanka ah.

## 1.4 Nidaamka Dawladnimo ee Itoobiya

### 1.4.1 Macnaha iyo Faa'iidada ay leedahay Dawlada Dimuqraadiga ah



Jaantuska 1.5 Dad doorasho saf ugu jira




Jaantuska 1.6 Qaab-dhismeedka dawlada federaaliga itoobiya

- Maxay samaynayaan dadka ka muuqda jaantuska 1.6?
- Muxuu ina tusayaa jaantuska 1.6?
- Marka aad maqashaan erayga dawlad fikrada maskaxdiina kusoo dhacaysa waxay tahay qeex?

Sidaynu cashiradeenii hore ku soo qaadanay nidaamka dimuqraadiyada waa mid ku salaysan sinaan iyo cadaalad. Haddaba, dalkeena Itoobiya waa wadan dimuqraadi ah oo ay si xor ah oo isku mid ah ay ugu wada noolyihiin qoomiyadaha kala duwan ee dalka.

Faa'iidada ay leedahay dawlada dimuqraadiga ah waxaa inoo muujinaya wada noolaanshaha qoomiyadaha Itoobiya ee leh diimo kala duwan, dhaqamo kala duwan, iyo xuquuqo kala duwan. Waxa kala oo ay suurto galisay dimuqraadiyada Itoobiya in ay samaystaan dastuur ay isku maamulaan oo ay isla ogol yihiin. oo odhanaya in ay qoomiyad kastaa wax kubarato afkeeda ama luuqadeeda. Sidoo kale waxay dimuqraadiyada dadka u jidaysay in ay iskood u samaystaan ismaamul gaar ah. Qof kasta oo Itoobiyaan ahina uu dalka gudihiisa meesha uu rabo ku noolaan karo kana shaqaysan karo, xaqna uu u leeyahay in fikiradiisa six or ah u soo jeediyo.

## Layliska 7aad

Ka dooda su'aalaha soo socda

1. Waa dawlad nooce ah dawlada dimuqraadiga ahi?
2. Sheeg faa'iidada dawlad dimuqraadi ah?

## 1.4.2 Macnaha Dawlada Faderaaliga

Dowlada Federaalka ahi waa mid ka timid ismaamulada kililada ee dalka, howlaha ay qabato dowlada federaalka waa kuwo guud sida ilaalinta dastuurka dalka, xuduudaha dalka, Habaynta ciidanka xooga dalka, soo saarida amarada howl fulineed, xusida maalmaha qadarinta leh, iyo waxyaabo kala oo farabadan ay qabtaan.


Si haddaba arintaa aad u fahantaan waxaad fiirsataan qaabka uu dugsigeena uga dhexdoortay ardayda Gudi ay u wakilshaan maamulka dugsiga.

## Layliska 8aad

Ka jawaab su'aalha soo socda

1. Waxaad is barbar dhigtaan macnaha erayga federal iyo jawaabta idinku aad siiseen inta ay isku dhawdahay?
2. Federalku waa nidaam dawladeed oo nooce ah?

## 1.4.3 Macnaha dawlad deegaanada




Jaantuska 1.7 khariirada itoobiya

- Imisa dawlad deegaaneed ayay leedahay itooboya? Sheeg magacda dawlad deegaanada.
- Waa maxay dawlad deeganku?

Ka sokow dawlada federaliga abaabulka ugu wayni waa dawlad deegaanka. Dawlad deegaanada dhisidooda waxa lagu saleeyay sida shacabku u degan yihiin, luuqada, cida ay yihiin iyo rabitaankooda. Haddaba dawlada Faderalka ahi waxay ka koobantahay Sagaal (9) dawlad-deegaano kuwaas oo leh dastuur u gaarah iyo astaan, sida calanka.

Waxayna kala yihiin:

1. Dawlad Degaaneedka Tigray
2. Dawlad Degaaneedka Canfarta

3. Dawlad Degaaneedka Amxaarada
4. Dawlad Degaaneedka Oromada
5. Dawlad Degaaneedka Somalida Itoobiya
6. Dawlad Degaaneedka Beneshangul Gumus
7. Dawlad Degaaneedka Shuccubta koonfureed
8. Dawlad degaaneedka Gambeela
9. Dawlad Degaaneedka Harrarida

## Layliska 9aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Qeex macnaha dawlad deegaanka?
2. Sheeg magaca dawlad deegaanka aad ku nos-hahay iyo dawlad deegaanada la jaarka ah?

### 1.4.4 Macnaha Ismaamulka Magaalada





Jaantuska 1.8 Ismaamulka magaalada Jigjiga iyo Ismaamulka magaalada adhis ababa

- Waa maxay macnaha ismaamulka magaaladu?

Dawlad deegaan kasta wuxuu leeyahay magaalooyin loo ansixiyay inay iyagu ismaamulaan. Magaalooyinkani waxay leeyihiin golayaal xildhibaano oo ah ismaamul magaalo. Golayaasha xildhibaanadu waa cida sharciga siisa wixii ku saabsan magaalada.Waxay leeyihiin xildhibaano lasoo doorto iyo kantibaa kala wada waxqabad maal meedka.Tusaale ahaan magaalada adhis ababa waxay iska leedahay ismaamul iyo kaantiba.

## Layliska 10aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Majiraa maamul magaalo agagaarkiina? Hadii uu jiro kaga dooda fasalka dhexdiisa cida hogaamisa maamulka magaalada

## 1.5 Xidhiidhka Arimaha Dibada

### 1.5.1 Macnaha iyo siyaasada xidhiidhka arimaha dibada




Jaantuska 1.9 Itoobiya iyo dalalka jaarkeeda

- Waa kuwee wadamada jaarka la ah itoobiya ee aad jaantuska ku aragtaan? Sheeg magacdooda.
- Maa garanaysaan waxa ay yihiin arimaha itoobiya xidhiidh kala samayso wadamada jaarka ah?

Xadhiidhka arimaha dibada wuxuu ka dhiganyahay isdhaxgalka iyo xidhiidhka dhexmara dalaka kala duwan si ay uyeeshaan arimaha dhaqaale, siyaasada, ganacsiga iyo iwm. Xidhiidhka siyaasadeed ee dibadu waxa weeyi

sharci guud oo tilmaamaya dawladi xidhiidhka ay la samaynaso dawladaha kale sida uu noqonayo ama u ekaanayo.

Dhinaca kale, xidhiidhka arimaha dibida aay itoobiya laleedayahay dalalka dariska ah waxaa uu ku salaysanyahay saaxiibtinimo iyo is qadarin aas-aasne u ah sidii dadyoowga dalalkaas ku nool u yeelan lahayeen xidhiidh wanaagsan.

## Layliska 11aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Waa maxay xidhiidhka dibadu?
2. Waa maxay ujeedooyinka siyaasadeed ee xidhiidhka dibada ee itoobiya?

## Gaba-Gabada cutubka 1aad

Habka uu hal wadan ama Bulsho ku nool deegaan isku midahi ay ugu soo doortaan rabitaankooda maamulayaas hooda ama masuuliyiintooda ayaa la yidhaahdaa Dimuqraadiyada. Dariiqada noocaas ah ee la isku maamulana waxaa lagu magacaaabaa Nidaamka dimuqraadiyada.

Dimaqraadiyada waxay wadanka lagaga dhaqmo dedkiisa u keent ama ay dhaxalisiisaa faa'iidooyin badan. Sababtoo ah maarka ay jirto dimuqraadyadi, qoomiyad kasta waxaa la tixigaliyaa xuquuqaha ay leedahay kama jiri karto kala duwanaansho ku salaysan kala sarayn iyo kala hoosayn, dhamaan waxay ku wada noolanaayaan si midnimo ah, isla markaana Nabad ku wada noolaansho ah. Haddaba wadankeenan Itoobiya Nidaamka dimuqraadiyadeed ee ka jiraa waa mid noocaasi ah. Sidaa darteed waxaa qoomiyad kasta dhinaceeda looga baahan yahay in ay xoojiyaan Nidaamka dimuqaadiyadeed ee uu dalkeenu ku dhaqmo ama isku maamulo.

## Erayada furaha ee cutubka 1aad

| | |
|---|---|
| Dimuqraadiyad: | maamul shacab |
| Awood: | inaad hawl fuliso xuquuqda iyo fasax sharci ah oo aad hesho. |
| Xuquuq: | waa eray aan u isticmaalo faa'iida kasta iyo rabitaankiisa inuu sheegto bani'adamku una baahan in sharciga loogu ilaaliyo. |
| Xuquuqda bani'adamnimo: | waa xuquuqda dabiiciga ah ee ay leeyihiin ahaanshaha |
| Xuquuqda dimuqraadiyadeed: | ka noqdo shaqsiyaad ama shacab nidaamka dimuqraadiyadeed ee ay isku maamulayaan awgeed xuquuqda ay leeyihiin. |
| Federal: | ismaamulka iyagu ay ismaamulaan dawladdeegaanada kala duwan iskug'tageen ee ay samaysteen nidaamka dawladeed ee ay leeyihiin. |
| Dawlad: | Wakiilka siyaasadeed ee ugu saraysa ee wadanka hogaamisa taas oo Awooda shacabku wakiisho islamarkana ka qaado. |
| Xidhiidhka Dibada: | Hal wadan xidhiidhka uu la leeyahay wadanada kale ee arimaha kala duwan (sida dhaqaalaha, siyaasada iyo..iwm) ee walaaltinimo. |
| Siyaasada arimaha dibada: | Waa xeerka guud ee dawladi raaraacdo xidhiidhka ay la leedahay wadanada kale |

## Layliga Guud ee Cutubka 1aad

### I. Weedhahan soo socda tii run ah ® ku qor tii been ahna been (B) ku qor

1. Dimoqraadiyadu waa maamul ay dad-waynuhu awooda leeyihiin in iskuna maamulaan.
2. Nidaamka dimoqraadiyada marka ay dadwaynuhu bixinayaan codkooda waxa ay raacaan habka loo dejiyay.
3. Xuquuqda dimoqraadiyada waa tan ay dadku qof ahaan tood u leeyihiin oo kaliya.
4. Xuquuqda aadamigu waa tan uu qof ahaan ama bulsho ahaan ugu noolaan karo sababtayna in uu si xor ah u jiri karo.
5. Kala duwanaanshaha marka aan leenahay waxaa weeyi dhinaca jidhka, midabka, diinta, qaabka iyo kartida.

### II. Qaybta (B) weedhaha ku hoos qoran kuwii la macna ah ka dooro qaybta (T) weedhaha ku hoos qoran

| B | T |
|---|---|
| 1. iyada oo ay jirto kaladuwanaani hadana waa in la dhawro lana tixgaliyo dareenka kuwa kale. | B. Dimoqraadiyada |
| 2. Dhamaan maamul ay dadku ka wada Qayb-qaataan. | T. Xidhiidhka dibada |
| 3. Hal wadan, wadamada kale ee uu la jaarka yahay danaha kala duduwan ee ka dhexeeya ku abuura qaraabo iyo istixgalin. | J. Federaalka |
| 4. Wakiilada maamul ee dadwaynuhu Xubinta Wadanka maamusha | X. Awoodid ama istixgalin |
| | Kh. Dawlada. |

### III. Weedhahan soo socda marka aad akhrido kadib ka dooro jawaabta saxda ah

1. Waa tee magaalada iyada oo ka tirsan dawlada federaal ka ah, hadana iskeed isku maamusha kuwan soo socda.

   B. Bahirdhar T. Diridhaba J. Maqale X. Midna maaha.

2. Waa tee magaalada iyadoo leh ismaamul gaar ah hadana ah magaalo madaxda dawlada federalka ah kuwan soo socda:-

   B. Adhis-ababa T. Diri-dhaba J. Maqale X. Bahirdhar

3. Waa tee arinta uu si gaar ah u leeyahay nidaamka dimoqraadiyada.

   B. Tixgalinta xuquuqaha aadamiga.

   T. Tixgalinta xuquuqaha dimoqraadiyadeed.

J. Jiritaanka, isku-dulqaadashada, isdhagaysiga iyo istixgalinta.

X. Dhamaan.

4. Waa tee mida aan ahayn cadaymaha dawlada domqraadiyada.

B. Masuuliyiinta oo ay dadku doortaan.

T. Masuuliyiinta oo xoog ku haya maamulka.

J. Dad-waynaha oo si firfircoon uga qayb qaata hawlaha wadanka.

X. Midna–maaha.

5. Waa tee faa'iidada ay leedahay ee larabo in la ogaado kuwa ad noolanshaha nabad iyo isjacayl kuwan soo socda:

B. Kala-duwanaashah waa in loo fahmo in uu yahay hanti faa'iido inoo leh oo lagu xisaabtamo.

T. Waa in la ogaado in ay faa'iido fiican tahay dhamaan noocyada dhaqaanada, diimaha, qabiilada ee dalku leeyahay ama dadkiisu.

J. Waa in la aamino dhaqanka, diinta, qabiilka ee mid leeyahay kagana fiican yahay kuwa kale.

X. B iyo T ayaa sax ah.

## IV. Meelaha banana ee soo socda ku buuxi eray ama weedh sax ah

1. Inaan isku dulqaadasho kala duwanaansha kuwa kale nabad kula nolaano waxyaabaha la inooga baahan yahay waa ....................................... .
2. Ismaamulada iyagu ay ismaamulayaan dawlad deegaanada kala duwan iskugu tageen ee ay samaysteen nidaamka dawladeed waxaa loogu yeedhaa ....................................... .
3. Wax kasta oo bani'adamka ay tahay inuu sharcigu u illaaliyo ee ah faa'iidada iyo rabitaanka inay sheegtaan ayaa loogu yeedhaa ....................................... .

## V. Su'aalahan soo socda jawaab Gabaan ka bixi

1. Qeex macnaha dimoqraadiyada?
2. Waxaad sheegtaan xuquuqaha ay tahay in tixgalin la siisay nidaamka dimuqraadiyadeed gudihiisa.
3. Wax kasta oo bani'adamka ay tahay inuu sharcigu u ilaaliyo ee ah faa'iidada iyo rabitaanka inay sheegtaan ayaa erayga aan u isticmaalo ....................................... loogu yeedha.

CUTUBKA 2

# Saraynta Sharciga

Ujeeddooyinka Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Fahmaan macnaha Dastuurka dawlada iyo sharciyada kale faa'iidooyinka ay leeyihiin.
- Gartaan sababaha loogu baahday saraynta sharciga.
- Ogaadaan sababaha loogu baahday sharciyada iyo nidaamyada dugsiyada.
- Sharaxaan macnaha awooda iyo waxtarka xaddaynta awooda.
- Gartaan waxaa ay tahay sirtu.
- Fahmaan macnaha anshaxa.
- Gartaan macnaha musuq-maasuqu waxaa uu yahay, iyo waxyeelooyinka uu gaysan karo.

## 2.1 Waa maxay dastuurku?

- Maad maqasheen iyada oo la leeyahay dastuur?
- Muxuu faa'iido inoo leeyahay dastuurku?




Jaantuska 2.1 Dastuurka Jamhuuriyada dimoqraadiga Fedraalka ee Itoobiya

Dastuurku waa sharciga ugu sareeya shuruucda dalka. Sharci kasta oo ay soo saaraan golaha wakiilada shacabka iyo kuwa dawlad deegaanaduba ha noqdo mid bulsho, dhaqaale iyo mid siyaasadeedba waxaa ssaldhig u ah dastuurka Federaalka. Mar kasta oo qoraal dastuur la samaynayana waxaa haboon in xooga la saaro arimaha laf-dhabarka ama udub-dhexaadka u ah. Dastuurkuna waa mid ku dhisan mabaadii' aasaasi ah. Dasturka waxaa kale oo loo sidhigi karaa; sharciga ugu sareeyo ee dal ama gobol lagudhaqmo. Maadaama uu dastuurku yahay sharci aas-aasi ah waxuu:

- Dajiyaa xidhiidhka ka dhaxeeyo dawlad iyo shacabkeeda.
- Kala xadeeyaa awooda masuuliyiinta iyo hay'adaha dawlada,
- Qeexaa qaab-dhismeedka dawladda iyo aas aaska siyaasada dalka;
- Faah faahiyaa xidhiidhka ka dhaxeyn doono mawaadininta iyo dawlada;
- Nidaamka syaasada dalka sida ay uj ahysantahay ayuu tabaxaa sida; xuquuqaha muwaadiniinta, siyaasada dalka, dhaqaalaha, horumaka iwm.

Maadaama uu yahay dastuurka dawladi leedahay ka ugu horreeya uguna sareeya waa isha sharciyada kale ay ka soo asaasmaan kuna salaysan yihiin. Dastuurku waa aalad xeerarka kala duwani ay ka shidaal qaataan islamarkaana sharciyo aan waafaqsanayn hadi ay soo baxaan ama tallaabooyin maamul qaataan waa sharci fudaydinaya in xeerka ama tallaabooyinka la qaatay la khaldo islamarkana la saxo.

Dastuurka waxaa weeye sharci mudnaanta siiya arrimaha siyaasada sharciyada kale oo dhana ka wada

sareeya islamarkaana sharicyada kale oo dhan laga soo dheego ama asaas u ah. Waa sharci waxyaabaha asaasiga ah, xuquuqaha Adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeedba ku qeexan yihiin. Waxaa kale oo Dastuurka ku qeexan muwaadiniinta iyo dawlada iyo waliba xubnaha ama waaxyaha dawlada xidhiidhka lagama-maarmaanka ah in uu u dhexeeyo ama in ay yeeshaan loo baahan yahay.

## Layliska 1aad

Ka wada hadla su'aasha soo socota:

1. Waa maxay dastuurku?

### 2.1.1 Baahida loo qabo dastuurka

- Maxaa loogu baahday dastuurka?

Sida casharka koobaad lagu qeexay waxtarka Dastuurku leeyahay ma'aha mid la is-weydiinayo. Waxtarka Dastuurku leeyahay waa buuxinta uu buuxinayo ujeedooyinkan soo socda:-

- Dastuurka laga dooday Lana ansixiyey wuxuu markhaati ama ballaan qaad u yahay bulshada isu-maamulaysa, wuxuuna qeexa rabbitaanka bulshada ee ku aadan wada noolaanshaha.
- Sido kale xubnaha ay bulshadu u wakiilatay maamulka xidhiidhka ay la yeelanayaan ayuu dastuurku qeexaya.
- Maadaama uu yahay dastuurka dawladi leedahay ka ugu horreeya uguna sareeya waa isha sharciyada kale ay ka soo asaasmaan kuna salaysan yihiin. Dastuurku waa aalad xeerarka kala duwani ay ka shidaal qaataan islamarkaana sharciyo aan waafaqsanayn hadi ay soo baxaan ama tallaabooyin maamul qaataan waa sharci fudaydinaya in xeerka ama tallaabooyinka la qaatay la khaldo islamarkana la saxo.
- Dastuurku waa sharci bulshada baraya xaqeeda iyo waajibaadka saran, waa sharci qoran oo bulshadu si sahlan u heli karto una akhrisan karto, fahmi karto, isu-maamuli karto islamarkaana xuquuqdeeda ku illaalshan karto.
- Dastuurka sharci dajiyayaasha, iyo maamulayaasha ay bulshadu soo doortay, magaca bulshada garsoorayaasha xukunka ku rida mas'uuliyadooda, la xiisaabtankooda iyo shaqooyinka ay u xil-saaran yihiin ayaa lagu qeexa. Tanina iyaga iyo bulshadaba waxaa la siiya fursado ay ku ogaadaan. Sida-daraadeed waa in tixgalin siiyaa xuquuqda bulshadu weydiisanayso dawlada. Waakiiladuna in bulshadu ma'suulka tahay in ay fahmaan ayuu u sahlaa sidaa-daraadeed, waxaa lagu dadaala in loo qeexo islamarkaana la fahmsiiyo mas'uuliyada iyo dammaanad qaadka ma'suuliyadooda.
- Dastuurku wuxuu kooba dhammaan istraatiijiyadaha uu dal leeyahay ee ay ka midka yihiin kuwa dhaqaale, siyaasadeed, kuwo bulsho oo dhan islamarkaana wuxuu gacan ka gaysta in dawlada iyo bulshaduba dhaqan galiyaan islamarkaana horrumar dalka loo gaadhsiin karo.
- Dastuurku wuxuu kooba muwaadiniinta hal dal ku nool xornimadooda iyo xuquuqahooda muxuuna muwaadiniinta u sahla in ay sida ugu habboon xuquuqahooda iyo waajibaadkooda u gartaan islamarkaana xuquuqdooda uga faa'iidaystaan uganasoo baxaan waajibaadkooda.
- Dastuurka wuxuu gacan ka gaysta in sawirka diimuqraadiyada iyo dhaqanka jiilba jiilka xiga ugu gubiyo. Wuxuu kaalin muhiim ah ka qaata in nidaamka waxbarasho uu ka qayb qaato carruurtu dugsiyadooda ay si sahlan ugu bartaan nidaamka diimuqraadiga, xuquuqahooda iyo waajibaadkoodana ay u gartaan. In la adeegsado xuquuqda qofku u leeyahay in la doorto islamarkaana uu wax doorto marka uu gaadho da'da lagu coddayn karo nidaamka diimuqraadiyadeedna uu


ixtiraamo kuna waaniyo dadka kalena in ay tix-galiyaan, nidaamka diimuqraadiga in la ballaadhiyo lana xoojiyo shay ku habboon weeyaan.

## 2.1.2 Dastuurada Dawlad- Deegaanada

- Maxaad ka fahmaysaan shaxanka kor ku qoran?

Dalkeena Itoobiyaa nidaamka ama qaabdhismeedka dawladeed ee uu ku socdo maadaama uu yahay Fadaraali, waxaa lagama marmaan ah in dawladu ay dhaxalgal u tahay in qaramada, qowmiyadaha iyo bulshooyinka xuquuqahooda la dhowro. Waxaa lagama maar maan ah in dawlad gobaleedyadu yeeshaan dastuur si ay iskood-iskugu maamulaan qowmiyada iyo dadka ku dhaqana dalka Itoobiyana si ay u horumariyaan dhaqamadooda iyo luuqadahooda, oo ay af kooda hooyo adeegsadaan , maamulka, cadaalada iwm ay meel dhow uga helaan waxay saldhig u yihiin baahida looqabo dastuur dawlad deegaanadu yeeshaan.

Waxaa cad in ay dalalka qaar leeyihiin dastuuro hal kabadan. Kuwaasi waa kuwa ku dhaqma nidaamka Fadaraaliga ah.




Jaantuska 2.2 Xidhidhka ka dhaxeeya Dastuurka Jamhuuriyada dimoqraadiga Fedraalka ee Itoobiya iyo Dastuurka Dawlada Deegaanka

Sidaas daraadeed, dalka Itoobiya waxa uu ka midyahay dalalka leh in kabadan haldeatuur. Sagaalka dawlad goboleed ee ka dhisan dalku waxay leeyahiin dastuuro u gaarah. Hase yeeshe, dastuurada dawlad-gabaleedyada oo dhan waxay hoos yimaadaan dastuurka Dawlada dhexe waana dastuur ka ugu sareeya.

Qaab dhismeedka dawlada fadaraalka sharciga dawlada ee heer fadaraal lagu diyaariyo isaga oo ah Kan dalka ugu sareeya ayaa la adeegsadaa. Sharciga dawlada oo faah-faahsan, islamarkaana koobaya arrimabadan oo dalka ku saabsan ayaa la daabacay. Xubnaha dawlada gobaleedaduna si ay iskood iskugu maamulaan sharci ka caawiya oo u gaar

ah ayey samaystaan. Sharciyada dawlada gobaleedyada sharciga asaaska u noqonaya, islamarkaana ugu sareeya waa ka fadaraal ka. Sidaas daraadeed, sharciga dawlad gobaleedyadu looma baahna in ay lidi ku noqdaan sharciga dawlada fadaraalka ee itoobiya.

Laakiin marka la dejinayo sharciga dawlad gobaleedka waa in uu noqda sharci ku salaysan xaalada dhabta ah ee ka jirta gobalada. Tusaale ahaan, sharciga dawlad gobaleedka soommaalida waxaa ku salaysan yahay sharciga dawlada heer fadaraal, islamarkaana wuxuu ka turjumaya ama ku salaysan yahay xaalad nololeedka dhabta ah ee ka jirta gobalka. Gobalada kalana sidaas oo kale ayaa loo dejinaya. Hase yeeshee, sharciyada dawlad gobaleedyadu waxay yeelanayaan waxyaabo ay isaga midyihiin iyo waxyaabo ay ku kala duwan yihiin

## Layliska 2^aad

Ka wada dooda su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay sharcigu? Ujeedada loo diyaariyaase muxuu yahay?
2. Waa maxay waxa uu yahay dastuurku?
3. Muxuu wadan uga baahan yahay dastuurka?
4. Maxaa loogu baahday in dawlad deegaanadu yeeshaan dastuur?

## 2.1.3 Sharciyada iyo xeerasha kale


- Waa maxay ujeedada loo soo saaro sharciga?
- Waa maxay xaalada ay ku jiri karaan sharciyo kale ka sokow dastuurka?

Ka sokow dastuurka waxaa jira sharciyo, xeerar iyo awaamiiro fara badan.Kuwaas oo dhamaantood laga diyaariyo sharciga ugu sareeya ee dastuurka.


Ujeedooyinka sharciga ugu muhiimsan ee aan leenahay way ku jiraan waa kuwan soo socda:-

- Illaalinta xuquuqaha bani'adamnimo iyo kuwa dimuqraadiyadeed ee aas-aasiga ah.
- Jid nabad galyo ah lagu tirtiro isku dhacyada ama is-fahan la'aanta.
- Balaadhinta nabada iyo deganaanta.

## 2.1.4 Xeerasha iskuulka



Jaantuska 2.3 fasal lagu dhaqmayo nidaamka iyo sharciga



Jaantuska 2.4 fasal aan lagu dhaqmayn nidaamka iyo sharciga

- Maxaad ka fahanteen jaantuska 2.3 iyo jaantuska 2.4?
- Waa kee fasalka uu gudihiisa ka socdo hab baris-barasho oo midho dhal noqon Kara?
- Baris-barashada fasalkee ka socota ayaad dooranaysaan?

Qaar ka mida sababaha faraha badan ee cadaynaya muhiimada ay leedahay in iskuulka dhexdiisa uu ka jiro xeer waxaan ka sheegi karnaa kuwan soo socda:

- In habka baris-barasho laga dhigo mid nidaam leh.
- Xeerka ku amraya ardaydu in ay qaataan labis isku mid ah
- Ardayda in ay ilaaliyaan wakhtiga waxbarashada.
- Waxay xeeraka xaqiijiyaan siinaanta ardayda dugsiga.
- Awaamiir ka hor tagaysa islamarkana illaalinaysa dhibaatooyinka nidaamka anshaha.

- Xeer saxaya hogaaminta dugsiga iyo habka shaqo ee dugsiga iwm.

Dhinaca kale hadii iskuulka dhexdiisa ayna jirin xeer illaalinaya nidaamka lama illaalinayo xuquuqda ardayda.waxaa dhacaya dhibaatooyin badan oo ah nidaamka anshaha, wakhti ayaa inaga khasaaraya habka baris-barashana ma noqonayso midho dhal.

## Layliska 3$^{aad}$

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Maxaa loogu baahday in iskuulka dhexdiisa xeer jiro?
2. Hadii iskuulka dhexdiisa sharci iyo Xeer ayna jirin Maxaa dhibaato ka imanaysa?

## 2.2 Isku maamulida saraynta sharciga

### 2.2.1 Macnaha isku maamulida saraynta sharciga

- Waa maxay waxa ay tahay saraynta sharcigu?

Saraynta sharciga oo laisku maamulo waa qofkasta oo ay ku jiraan masuuliyiinta inuu sharcigu yahay ka ugu sareeya si ay u aqbal aan waa mid tilmaamaya.

Sidaa ay tahay, qof kasta sharciga ayaa maamula islamarkana cadaynayaa in dhamaan dadku way u siman yihiin sharciga hortiisa saraynta sharcigu waa mid u adeegaya nidaamka dimuqraadiyadeed.

## Layliska 4$^{aad}$

Su'aalahan soosocda koox ahaan kagu wada dada islamarkana warbixin gaaban qoraal ku soo bandhiga.

1. Waa maxay saraynta sharcigu?
2. Maxaa loogu baahan yahay saraynta sharciga

### 2.2.2 Maxaa loogu baahan yahay isku-maamulida saraynta sharciga

- Waa maxay sababaha loogu baahan yahay isku-maamulida saraynta sharciga?

Si ay muwaadiniintu ugu nolaato nabad iyo farxad ayaa loo baahan yahay saraynta sharciga.

#### Mashquulkii mudane cumar

Mashquulkii mudane cumar xaga korodhka, shaqada dugsiga hoose laga soo billaabo sanad dugsiyeedkii hore alaabta ardaydu inta badan way halaabaan. Way yar yihiin fasal walba ardayda ayna alaabtu ka halaabin.

Hadaba mudane cumar sadex caruur ah ayaa dugsigan u dhigata. Si lama filaan ah ayaa maalin saddexdiiba alaabtii boorsada ugu jirtay laga xadday.

Mudane cumar oo aad arintan uga xanaaqay ayaa u soo kacay xaga xafiiska maamulaha iskuulka, iskuulku malaha wax sharci ah? Mise lama tixgaliyo sharciga? Miyaana ardayda la illaalinin? Sidee iskuulku u noqon karaa xarun tuugo ayuu isaga oo xanaaqsan ku yidhi. Gaar ahaan markii arday axmed oo fasalka shanaada o boorsadiisii la baadhay waxaan laga helay arday aan badnayn alaabtoodi.

Inta kadib ardaygii waxaa lagu amray inuu waalidkii u yeedho. Markuu keenay aabihii ayaa la waydiiyay oo lagu yidhi sheeg runta sidii aad u xadi jirtay.

Arday axmed wuxuu sheegay inuu moodayay in xadida iyo qarsashadu ay tahay mid la fasaxay wuxuuna waydiistay raaligalin. Sababtan awgeed waxaa lagula taliyay in marlabaad samaynin khaladkan oo kale waana la cafiyay. Hadaba laga bilaabo wakhtiga ardayda intooda badan ay ka baxday cabsidii ay ka qabeen xadida alaabta islamarkana waxay bilaabeen inay nabad ku bartaan.

## Layliska 5aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda idinka oo ku salaynaya casharka kor ku qoran.

1. Marka aad iskuulkiina barbar dhigtaan iskuulkaasi xaga illaalinta nidaamka heerka ayuu tagan yahay.
2. Markii mudane cumar waydiiyay sharci ma jiro? Mise lama tixgaliyo sharciga? Waa maxay wuxuu ujeeday?
3. Ka dooda sidaad u aragteen dabeecada axmed?

### 2.2.3 Muwaadiniintu sharciga hortiisa way 'siman' yihiin

- Maxaan ujeednaa marka aan leenahay muwaadinintu way siman yihiin sharciga hortiisa?

Muwaadiniintu sharciga hortiisa Way u siman yihiin waxa weeyi nidaam muwaadiniinta dhexdooda oo ayna jirin kala duwanaan sho sharciguna dhamaan dadka si isku mida ugu adeegayo weeyaan markaan sidan leenahay dhamaan muwaadiniitu danbiga ay sameyaan si isku mida ayaa sharciga hortiisa lagu waydiin ayaan ujeednaa. Si aan nabad iyo istixgalinugu nolaano waxaan ubaahanahay sharci. Sharciguna dhamaan ill isku mida ayuu ku eegayaan.

Sidaas ay tahay ardayda iyo bulshada iskuulka waxaa looga baahan yahay inay aad wax uga bartaan saraynta sharciga. Si saraynta loogu shaqeeyo sharciga ayaa dhamaan bulshada looga baahan yahay taageero. Sido kale dadka masuuliyiinta ah waxaa laga sugayaan taageero iyo dabagal.

## Layliska 6aad

Ka dooda su'aalaha soo socda:

1. Maxaa loogu baahan yahay u hogaansanaanta saraynta sharciga?
2. Waa maxay waxa ay tahay muwaadiniintu way u siman yihiin sharciga hortiisa?
3. Haddii saraynta sharcigu uu shaqayn waayo maxaa dhacaya?

## 2.3 Anshaxa

### 2.3.1 Waa maxay anshaxu?

- Qoyskiina oo kuu mahadnaqay ama kaa cabtay maad garanaysaan?
- Markaad sidee samaysid ayay kuu mahadnaqaan?

#### Anshaxa

- Waa cabiraada dabeecadaha saxda ah iyo kuwa aan saxda ahayn.
- Waa waxa lagu qarto in fikrad ama wax qabad la qaadan karo ama aan la qaadan Karin, wanaagsan yahay ama xun yahay, sax ama khalad yahay weeyaan.
- Marka aan u mahad naqayno ururada anshaxa wanaagsan ama ka cabanaynana anshaxa xun ayaan tusnay weeyaan.



Jaantuska 2.5

- Jaantuskan: kor ku yaala maxaad ka fahmaysaan?

1. Aabaha iyo hooyadaa oo aad ixtiramtid.
   - Aabaha iyo hooyadu marka ay wada hadlayaan ama isla talinayaan inaad dhagaysato islamarkana ku dhaqanto shaqada dhexdeeda.
   - Inaad si haboon u qeexdo rabitaankaaga marka aad caawinaysid qoyska
   - Aabaha iyo hooyadaa markay dibada ka soo galaan inaad fadhiga uga kacdid oo aad ixtiraam ku qaabisho.

Shaqada aad karaysid inta aad gashid caawin qoyskaga IWM

2. Ixtiraam qofka ka wayn
   - Qof kasta oo qoyska ka midi waa inay is ixtiramaan isna jeclaadaan.
   - Waa inaad si haboon u ixtiraamtaa qofka da'da way nee qoyska ka midka ah.
   - Waa inaad ixtiraamtaa walaalahaa, wiilasha, gabdhahaba iyo kuwa kale ee ka mida qoyska islamarkaana jeclaataa …iwm.
3. Masuuliyada oo aad is haboon uga soo baxdo
   - Illaalinta nadaafada shaqsiyeed (inuu maydho gacantiisa, wajigiisa, lugihiisa, cidiyahana iska guro, dharka maydho iyo inuu ku fadhiisan boodh ama qashin …iwm.
   - Si haboona ula socdo iskuulka (ka shaqeeyo shaqada guri, akhristo,uu waydiiyo waxa una fahmin, tixgaliyo macalinkiisa, iyo inay dhexdooda wax kala bartaan …iwm.

## Layliska 7aad


Ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Waa maxay anshaxu?
2. Anshaxa wanaagsan ee laga raro heer qoys ee ka baxsan kuwa casharka lagu qeexay mid kasta sii sadex saddex tusaalooyin.

B. ku saabsan ixtiraamka aabaha iyo hooyada.

T. Ku saabsan ixtiraamka qofka ka wayn.

J. ku saabsan illaalinta nadafada shaqsiyeed.




## 2.4 Awooda

### 2.4.1 Macnaha awooda?

- Waa kee qofka awooda ugu saraysa leh iskuul kiina?

Awaad waxaa layidhaa qofka xafiis ama iskul dhexdiisa amar siiya dadka kale iskuna dubarida islamarkana xil ka saran yahay dadka la siiyay masuuliyad wax soo saarku waxqabadyada ay wadaan inay karayaan.

Awaad waxaa layidhaa qofka xafiis ama iskul dhexdiisa amar siiya dadka kale iskuna dubarida islamarkana xil ka saran yahay dadka la siiyay masuuliyad wax soo saarku waxqabadyada ay wadaan inay karayaan.

### 2.4.2 Macnaha iyo faa'iidada xadaynta awooda

- Maxay faa'iido leedahay awooda oo xadayn ladgu sameeyo?

Aabaha iyo hooyadu ciyaalkooda ha la garaacohaday yidhaahdaan waxay leeyihiin awaad ay ku maamulaan qoyskooda. Maamulaha dugsiguna wuxuu leeyahay awood uu ku maamulo macalimiintiisa iyo ardaydiisa.

Horjoogaha fasalkuna wuxuu leeyahay awood uu ku ilaaliyo deganaanta iyo alabada tasalka hase ahaate qof kasta awoodan uma isticmali karo sida ay rabaan ama doonaan.

Qofku waa inuu isku miisaamaan awaada uu leeyahay iyo masuuliyada saran. Qofka leh masuuliyad aad usaraysa wuxuu leeyahay awood masuuliyadeed balaadhan.

Macalinka iyo maamulaha iskuulka malaha awood isku mida. Maadama ay jiraan masuuliyado farabadan oo maamulaha ka saran iskuulka wuxuu leeyahay awood kufilan oo uu ku fulin karo. Masuul kastana waxaa laga sugayaa inuu si haboon u isticmaalo awooda.

Haddii awooda si haboon u isticmaali waayo waxaan odhanaynaa awoodu xadkii ayay dhaaftay. Sidaa awgeed waxay jabinaysaa saraynta sharciga.

Tana iyada oo ay tahay mid muwaadiniinta khatar galinaysa ayay keenaysaa in qofka fuliyay sharciga lagu waydiin doono.

## Layliska 8aad

Ka wada dada su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay awoodu?
2. Maxay faa'iido tahay awooda oo la xadeeyo?
3. Haddii horjoogaha fasalka loo xadayn waayo awooda ama la siiyo awood buuxda maxaa dhici Kara?
4. Maxaa khatar dhicikarta haddii macalinka aan loo xadaynin awooda uu siduu rabo ardayda u ganaaxo?

## 2.5 Sirta

### Sirta gaarka ah

- Waa sir nooce ah waxaan ugu yeedhno sirta gaarka ah?

### Sirta oo la bixiyo

Mudane caddir oo ahaa ninka Shamis ayaa wuxuu sameeyay hab uu ku baadhayo inay xaaskiisu ilaaliso sir gaarka ah iyo inkale. Waxay balan qaaday inayna cidna u sheegay sirta. Habeenkii ayuu ku yidhi waxaan dhalay ukun ayuu tusay laba ukuna oo diiran. Marmo shamis intay xajin Kari wayday ayay subixii saaxiiba deed ku tidhi saw xalay ninkaygu laba ukuna ayuu dhalay.

Saxiibadeedna intay ka balan qaaday inayna sheegin ayay saxiibadeeda kale ku tidhi shamis ninkeedi wuxuu dhalay saddex ukun ah. Warkii wuxuu noqday mid lagu shekaysto xaafadii uu deganaa mudane caddir. ugu danbayntii warkii wuxuu gaadhay mudane caddir mudane caddir markuu maqlay warkii ayuu yidhi wixii aan sameeyay ayaa sharafta iga riday. Intuu xaaskiisa shamis u yeedhay ayuu ku yidhi waa side digaagaa ukun dhale dadku ukun madhalo ayuu ku yidhi. Wuxuu ka dhaadhiciyay inay dhibaato leedahay sirta lagu sheego oo aad cid kale u sheegtid.

Sharaftii aan ku lahaa xaafadana waad iga dishay. Inta kadib maadama kalsoonidii ka dhexaysay mudane caddir iyo warmo shamis ay luntay gurigooda majirto nabadi.

## Layliska 9aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda adiga oo ku salaynaya casharka kor ku qoran.

1. Waa maxay dhibaatada mudane caddir kazoo gaadhay bixinta sirta gaarka ah?
2. Ma waxay ahayd mudane caddir inuu ilaaliyo sirta gaarka ah mise inuna ilaalin?

Sir Macnaheedu waxaa weeyaan waa xog, fikrad ama arrin dadka ay khusayso maahina cidaha kale laga illaaliyo in ay ogaadaan islamarkaana la qariyo.

Xog ama arrin hadi la yidhaahdo waa sir qof, dhawr ama arrinta cid ayna khusaynin ama leh hadi ayna ahayn dad kale in ay ogaadaan ma habboona. Tani macnaheedu waxaa weeye in dadka kale laga qariyo oo la kaydiyo ayaa loo baahan yahay.

Warbixin, fikrad ama wax kale waxay sir noqota ama loogu baahda in sir ahaan loo illaalshado marka la aminsan yahay hadi cid kali sirta ogaato in shakhsi, mushtamac, bulsho ama dal ay waxyeelo u horseedayso.

Tusaale ixtiraan loogu talagalay in ardey lagu imtixraamo illaa iyo xiliga imtixaanka ay ardeydu qaadanayso laga gaadhayo wuxuu noqonaya sir. Xida imtixaanka garanaysa ama og waxaa weeyaan baraha iyo gabadha xog-haynta ah ee daabacday oo laga yaabo in ay wax ka ogaato oo kali ah.Labada qof wixii ka baxsan hadi ay yihiin ardey barayaasha kale iyo shaqaalaha xafiiska waa sir.Illaa laga gaadho xiligi loogu talagalay in imtixaanka la maro hadi uu sir noqon kari wayo imtixaan ma noqon karo.

Sirta oo la illaaliyaa waa hal beega anshaxa wanaagsan

## Layliska 10 aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda:

1. Maxay khatar keenaysaa sirta gaarka oo aan la illaalinin?
2. Waa maxay waxa loo yidhi sirta oo la illaaliyo waa tilmaanta anshaxa wanaagsan?

## 2.6 Musuq-maasuq

### 2.6.1 Waa maxay musuq-maasuqu?

- Miyaad umalaysaan inay jiraan qayb- bul- shada ka mida oo uu waxyeelayn musuq-maasuqu?
- Muxuu noqonayaa doorka ay ku leeyihiin macalimiinta iyo ardaydu dabar gaynta musuqmaasuqa?

Erayga musuqmaasuq waa uu macno badan yahay, waxaanan odhan karnaa wax uusan qofku laheyn ama aanu u dhibaatoon oo uu u isticmaalo sidii wax uu shaqaystay ama sida hantidiisa.

Haddii aynu dhinac kale ka fiirino tusaale ahaan dhinaca dawlada hantida iyo lacagta dawlada leedahay oo loo isticmaalo si gaar ahaaneed looqana faa'iidaysto shakhsi ah aan waxa la odhanayaa waa musuqmaasuq.

Sababtoo ah hantida iyo lacagta dowlada cidkali ahi ma laha ee waa hantigaad oo dadka oo dhan dhex u ah, Lana rabo in looga fa'iidaysha danta guud ee bulshada.

Haddaba sidii aan ka sooqaadanay in ay qof kasta ama bulsho kasta qasab ku tahay u hogaansanaanta saraynta sharciga, taageerana la siiyo cidkasta oo ku dhaqmaysa sharcigu sida uu dhigayo, waayo haddii aan loo hogaansanaan saraynta sharciga waxaa abuurmaysa, kala dambaya la'aan iyo xoog wax laga kala qaato kadibna la xoogo bulshada inteeda itaalka (tamarta) yar sidoo kale waxa dhacaysa in wax kasta ay xumaadaan oo ay nabadgalyadu faraha ka baxdo istixgalintii lagu wada noolaa ay jiri waydo, haddaba sharciga waa kan keenaya in nabad lagu wada noolaado dadknaa ay hortiisa u simanyihiin oo una jirin qof sharciga ka sareeya.

#### 2.6.1.1 Noocyada Musuq-maasuqa ee ay fuliyaan ardaydu?

Cpaar ka mida musuq maasuqa ay ardaydu fuliyaa waxaan sheegi karnaa kuwan soo socda:

- Shaqo guri ama imtixaanka halkaad adigu ka shaqayn lahayd oo aad arday kale ka qishto ama ka rogto.
- Alaab arday kale leyahay oo aad xadid
- Hantida iskuulka oo aad si taxadar leh u xajin waydo : xumayso ama qaadato.
- Iskuulka oo aad ka habsaanto ama kazoo horayso saacadii iskuulka ... Iwm

#### 2.6.1.2 Noocyada musuq-masuqa ee ay fuliyaan macalimiintu.

Qaar ka mida musuq-masuqa ay fuliyaan macalimiintu.

- Ardayda oo ill isku mida ku eegi waayo ama khalad ku sameeyo.
- Si aan cadaalad ahayn oo aad dhibcaha jardayda ugu darto ama ka jarto.
- Saacada fasal kiisa uu si haboon u isticmaali waayo.
- Hantida iskuulka uu si taxader leh u xajin waayo islamarkana khasaariyo.
- Sharciga iyo nidaamka iskuulka oo uu uhogaansami waayo.. iwm ayaa ka mida.

## Layliska 11 aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Sheega tilmaamaha musuq-maasuqa?
2. Tilmaan noocyada musuq-maasuqa ee laga fuliyo heer iskuur?

### Tirtirada Musuq-Maasuqa

Macalin daahir wuxuu ahaa macalin ilaaliya saacadiisa casharka uu dhigayana si haboon u soo diyaarsada. Wakhti yar kadib dadaalkiisi hoos ayuu u soo dhacayay. Wuxuu bilaabay inuu dib uga dhaco saacadii fasalka uu galayay horayna uga jsoo baxo wuu dayay inuu casharkii iskuulka si

haboon u dhigo. Imtixaankiisuna wax cad ma'aha sida macalimiinta kale imtixaankooda. Marka macalimiinta kale waraaqaha imtixaanka usoo celiyaan isagu uma soo celiyo. Waxuuna can ku yahay in dhamaan ardayda uu siiyo.

Sideetan iyo shan dhibco ka sareeya. Guud ahaan macalinkan waxaa ka muuqata dabeecado sheegaya musuqmaasuqa.

## Layliska 12aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda adiga oo ku salaynaya casharka kor ku qoran:

1. Si faahfahsan u dhig waxay yihiin dhibaatooyinka macalin dahir?
2. Talooyin nhooce ah ayaad sii naysaan si macalinkan iskaga hagaaj iyo sixiin dabeecadahan xun xubn?
3. Muxuu dhibaato ku keeni karaa hadii macalinkan uuna iska sixin dabeecadahan?

### 2.6.1.3 Wax qabadyada musuq- maasuqa ee laga fuliyo iskuulka iyo guryaha lagu noolyahay agagaar kooda

- Miyay jiraan waxqabadyo musuq maasuq oo laga fuliyo agagaarkiina? Haday jiraase maxay yihiin?

Waxaa jiri kara jidad kala duwan oo musuq-maasuqa lagu fuliyo agagaarka guryahay lagu nool yahay. Tusaale, haddii olole nadaafadeed laga wada agagaarka guryahaa dhamaan dadka agagaarka waxaa laga doonayaa inay ka qaybgaal dhaqdhaqaaqyada waxqabadka ololaha nadoofadeed. Laakiin haddii qofka abaabulaya ololaha nadaafadeed iyada oo ay ka qaybgalayaan dadka kalae uu sameeyo inayna qoyskiisu ka qaybgalin waxay noqonaysaa musuq-maasuq. Sababto ah waxay fulin yeen wax kuwa kale ka duwan oo faa'iido u ah xubnaha qoyska.

Sido kale xaafada aad ku nooshahay maamulka xaafadu uu qaybo kala duwan inii qaybiyo oo uu hal wax qabad idinka ama waalidka inigu fuliyo iyaduna waa waxqabada musuq-maasuq. Dhinaca kale haddii ayna idin qaybin maamulka xaafada oo waalidkiina ama idinka ay iniga celiyaan xuquuqda aad leedihii iyana waa musuq-maasuq.

Inta kadib marka aad inigu ciyaar kasta ciyaaraysaan sidhi wadaha ciyaarta intaad lacag siisaan aad ciyaarta badisaa iyaduna waa natiijada musuq-maasuqa.

### 2.6.2 Dhibaatooyinka uu keeno musuqmaasuqu

- Wuxuu faafiyaa nidaam cadaalad dara ah.
- Ardayda dhexdeeda wuxuu ka abuuraa Isfahan daro.
- Aradayda iyo waalidka ayuu ka fogeeyaa maamulka iskuulka.
- Wuxuu xumeeyaa habka baris – barashada.
- Wuxuu dhiirigaliyaa faafida ama balaadhinta anshaxa xun.

## Layliska 13 aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Faahfaahi gaar kamida musuq-maasuqa lagu arko iskuulka ee ardaydu fulin karayaan?
2. Muxuu dhibaato keeni karaa musuq-maasuqa laga fuliyo iskuulka?

## Gaba-Gabada Cutubka 2aad

Maadama dastuurku yahay sharciga ugu sareya dalka. Sharci kasta iyo nidaam walba waa inuu waafaqsanado dastuurka. Dastuurku muwaadiniinta wuxuu siiyay inay ka faa'iidaystaan xuquuqdooda iyo inay kasoo baxaan masuuliyada saran.

Dastuurada deegaanadu waxay diyaaritooda ku salaysan yihiin dastuurka faderaliga iyo xaalada dhabta ah ee ka jirta deegaanada. Kasokow dastuurka waxaa jira sharciyo iyo xeerar farabadan. Waxaana diyaarintooda lagu saleeyaa dastuurka faderaliga. Waxaa ka mida xeerka iskuulka. Xeerka iskuulku wuxuu faa'iido u leeyahay balaadhinta hab baris-barasho oo nidaam leh. Saraynta sharcigu waa qof kasta oo bulshada ka mida uu aamino inuu sharcigu yahay dhamaan ka ugu sareeya. Haddu wadanka sharcigu uu noqon waayo ka ugu sareeya ee loo hogaansan yahay waxay dhibaato soo gaadhi kartaa dadka aan kartida lahayn, caruarta, odhayaasha, dadka xanuunsan iyo dadka tirada yar ee kamida qaybaha bulshada. Muwaadiniinta dhexdooda iyaga oo kala duwan ayay dhamaan nidaamka ay ka helayaan sharciga wayna u siman yihiin sharciga hortiisa.

Awood waxaa la yidhaa qofka xafiis ama iskul dhexdiisa amar siiya dadka kale iskuna abuubula islamarkana xil ka saran yahay inay kasoo bixikarayaan masuuliyada lasiiyay ee waxqabadyada wax soo saarka. Sido kalena waxay ina tusaysaa waxay awood uleeyihiin inay go'aamiyaan.

Sirtu waa xog, fikrad ama arin dadka ay khusayso maahine cid kale laga ilaaliyo in ay ogaadaan islamarkana la qariyo. Sirta gaarku waa arin dadka aad aaminsan tahay cidna iyada oo loo sheegin la haysto. Musuq-maasuqu waa wax qofku uusan lahayn, shaqaysanin ama u dhibaatoon oo uu u isticmaalo sidii wax uu shaqaystay ama hantidiisa ah. Waxaa jira tilmaamo sheegaya in musuq-maasuqa ay fuliyaan iskuulka, ardayda iyo macalimiintuba.

## Erayada Furah u ah cutubka 2aad

| | |
|---|---|
| Dastuur: | Waa go'aanka aas–aasiga ah ee sharciga loo baahan yahay inay dawlada iyo shacabkuba ay raacaan ama ku dhaqmaan. |
| Sharci: | Waa Xeerar iyo awaamiir laga soo dheegay dastuurka kaaso qasab ay tahay in lagu dhaqmo. |
| Anshax: | Waxaa lagu ilaalintaadabeecada dadka ama saamaynta ku keenayo dabeecada ee bulshadu aqbashay inuu sax yahay ama khalad yahay ayaa Isagu cabiraa. |
| Sirta: | Waa arin shaqsi kaliya ama dad yar dhexdooda lagu ilaaliyo oo aan dad kale loo gudbinin islamarkana la haysto |
| Qormo: | Diwaanka go'aanka lagu qoro |
| Laisku raacay: | La go'aamiyay. |

## Layliska guud ee cutubka 2aad

**Layliska kor laidinku siiyay buugtiina ku roga oo kashaqeeya.**

I. Su'aalaha soo socda Tii sax ah kuqor "Run" tii been ahana ku qor "Been"

1. Itoobiya ma laha dastuur shaqeeya oo iyadu leedahay.
2. Saraynta sharcigu makhusayso masuuliyiinta.
3. Haddii sharcigu noqon waayo ka ugu sareeya ee lagu shaqeeyo waxaa jira qayba bulshada ah oo dhibaato la kulmayso.

4. Awooda looma xadayo maamulaha ikuulka.
5. Shaqo guri ama imtixaan aad ka rogto kuwa kale maha musuq-maasuq.
6. Ilaalinta sirtu waa cabiraada anshaxa wanaagsan iyo aaminada.

## II. Weedhaha lagu hoos qoray "T" udooro weedhaha ku hoos qoran "B"

| B | T |
|---|---|
| 1. Arinta hal qof ama dad yar oo kaliya dhexdooda lagu ilaaliyo oo aan cid kale loo gudbin. | B. Dastuur |
| 2. Sharciga ugusareeya dalka. | T. Musuq-maasuq |
| 3. Xeerar ama awaamiir laga soo ururiyay dastuurka qasabaa ah in lagu dhaqmo. | J. Anshax |
| 4. Qof waxa uuna ku daalin si uu uga helo faa'iido aan ku haboonayn u fuliyo. | X. Sir |
| 5. Lagu cabiro debeelada saxda ah iyo ta aan saxda ahayn. | Kh. Sharci |
| | D. Xeer iyo awaamir |

## III. Su'aalahan soo socda kadooro jawaabta saxda ah

1. Kuwan soo socda waa kee ka ina tusaya muhiimada dastuurka.
   B. Wuxuu siiyaa muwaadiniita ay ka faa'iidaystaan xuquuqdooda.
   T. Inay muwaadiniintu kasoo baxaan masuuliyadooda.
   J. Inay ka soo baxaan waajibaadka dawladu saartay.
   X. Dhamaan
2. Ku wan soo socda keebaan ahayn ujeedooyinka sharciga.
   B. Inuu illaaliyo xuquuqaha bani'adamnimo.
   T. Inuu fidiyo cadaalada
   J. inuu xoojiyo isku dhacyada
   X. inuu fidiyo nabada
3. Tee baa sax ku ahayn musuq-maasuqa.
   B. Waa waxqabada xun
   T. Waa faa'iido kugu haboonayn oo aad qaadatid.
   J. Waa jid sharci daro ah oo aad faa'iido shaqsiyeed ku heshid
   X. Dhamaan
4. Arinta dadku haystaan noloshooda oo dhan iyaga oo cidna u sheegin waxaan u naqanaa.
   B. sirta qoyska  T. Sirta Saaxiibka
   J. Sirta wadanka  X. Sirta gaarka

## IV. Si gaaban uga jawaab suaalaha soo socda

1. Sheeg saddex ka mida waxqabadyada jmusuqmasuqa ee macalimiinta ka fulin karaan iskuul ka.
2. Muxuu iskiuulku ugu baahan yahay xeerka? Sheeg saddex sababood.

CUTUBKA 3

# Sinaanta

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Ardeydu marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib waxay awoodi doonaan in ay:

- Gartaan macnaha sinaanta.
- Fahmaan dhammaan qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya sido kale sinaanta ugu muhiimsan iyo siday si isku mida uga wada faa'iidaysan lahaayeen xuquuqaha ay leeyihiin.
- Gartaan macnaha laxaad la'aantu waxaa ay tahay.

## 3.1 Macnaha sinaanta

- Marka ugu horaysa ee aad maqashaan sinaan waa maxay fikrad maskaxdiina kusoo dhacaysa?

Sinaantu waa dadka isku heerka ah hanoqdo shaqsi ama koox oo si isku mida u hela xuquuqda iyo faa'iidada ay tahay inay helaan.Dhinaca kale sinaantu waa dadka oo si isku mida uga soo baxa masuuliyada saran.Nidaamka dimuqraadiga ah dhexdiisa muwaadin kasta iyaga oo kala duwan ayay  tahay inay si siman u helaan xuquuqda iyo faa'iidada ay leeyihiin.Tusaale qofku maadama uu yahay kaliya bani'adam waa in si kuwa kale lamida loo tixgaliyaa xuquuqdiisa.Intaa waxaa dheer dadka isku heerka iyo dadka shaqo isku mida ka shaqeeya inay helaan faa'iido isku mida ayay xaq u leeyihiin.

Sinaantu waa nidaamka dimuqraadiga ah dhexdiisa muwaadiniinta dhamaan hanoqdo shaqsi ama koox ay tahay inay si siman u helaan xuquuqda iyo faa'iidada ay leeyihiin.Sinaantu waa xuquuqda ay tahay in la tixgaliyo sinaanta jinsiyada, diinta, luuqada iyo kuwa kale iyada oo ayna jirin kala duwanaansho.

### Layliska 1aad

Ka jawaab su'aalaha soo socoda:

1. Waa maxay sinaantu?
2. Qoyskiina dhexdiisa arimo sidee ah ayuu dhigayaa? Fahansii adiga tusaale soo qaadanaya.

## 3.2 Xuquuqaha sinaanta ee qurumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta



Jantuuska 3.1 quruumo, qowmiyado iyo shucuubta wadan

- Maxaad ka fahanteen sawirka kar ku qoran?

- Ku faahfaahi buugaga magacda quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta Itoobiya eek u nool agagaarkiina?

Dalka itoobiya gudihiisa in kabadan 80 quurumo, qowmiyado iyo shucuubo ayaa ku wada nool. Dhamaantoodna way simanyihiin. Sinaantooda waxaa cadayn u alo ismaamulka ay iyagu ismaamuklayaan, luu qadooda oo ay ku shaqeeyaan, dhaqankooga oo ay kor u qaadayaan iyo diintooda oo ay isku hogaaminayaan iyaga oo9 xuquuqahooda ka dhigaya kuwa dhaxal- gal ah.

## Layliska 2aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda:

1. Maxay faa'iido u leedahay saaxiibadaada fasalka ee ka kala yimiday quruumaha, qoowmiyadaha iyo shucuubta oo aad xuquuqahooda tixgalisid?
2. Ka wada dooda arimo lagu qeexayo xuquuqaha sinaanta ee loo tixgaliyay shucuubta ku nool agagaarkiina?

### 3.2.1 Xuquuqda ismaamulka qowmiyadaha

- Waa maxay waxa ay tahay ismaamulku?

Dastuurka JDFI ayaa si balaadhan u tibaaxayo in dhamaanba qowmiyadaha dalku yeelanayanan ismaamul iyo aayo katalin. Marka ismaamulka lagahadlayo waxaa loogajeedaa in qowmiyadaha kunool dalka Itoobiya ka faa'iidaaystaan adeegsiga kudhaqanka diimahooda, luqaahooda iyo dhaqamaadooda.

### 3.2.2 Xuquuqda aad u leedahay inaad adeegsato luuqadaada

1. Luuqadaha kala duwan ee lagaga hadlo agagaarkiina qor kuwa aad magacdooda garanayso?
2. Waa maxay luuqada shaqada dawlada ee agagaarkiina?

Dhamaan luuqadaha laga helo itoobiya iyada oo midna mid ka sarayn in la isku fahmo way u siman yihiin. Dhamaan dadka isticmaala luuqadahan waxay uga turjumayaan cida ay yihiin iyo dhaqankooga. Caruurtu luuqaala hooyo waaxay ka barain karaan qoyskooda, deegaanka ay la qabsadeen iyo bulshada. Xuquuqda ay u leeyihiin inay adeegsadaan luuqadoodu waa mid dastuurku illaaliyay.

Marka aan leenahay xuquuqda ay u leeyihiin inay luuqadooda isticmalaan waa xuquuqda ay u leeyihiin inay luuqadoodo, ku hadlaan, qoraan, kobciyaan iyo inay wax ku bartaan, ku shaqeeyaan ayaa ka mida.

## Layliska 3aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Maxaan ujeednaa marka aan leenahay xuquuqda ay u leeyihiin inay luuqadooda adeegsadaan?
2. Maxay faa'iido ka helayaan luuqadooda oo ay adeegsadaan?

### 3.2.3 Xuquuqda u sinaanshaha helida waxbarasho

- Maxay faa'iido leedahay xuquuqda u sinaanta helida waxbarasho?

Quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta itoobiya xuquuqda ay u leeyihiin inay si siman u helaan waxbarashada waa mid u illaaliyay dastuurka dalku xuquuqdana waa mid si siman uga dhaqan galay ha noqoto gabdhaha, wiilasha, magaalada, dadka ku nool miyiga iyada oo ayna jirin wax kala duwanaansha ah. Markan tirtiro nidaamkii shaqo ee xaqdarada ahaa islamarkana si siman u gaadhisiino dhamaan waxbarashada dalkeenu wuxuu sii wadayaa diwaan galinta kaboca deg-dega ee uu ku socdo. Marka muwaadiniinta loo tixgaliyo xuquuqda sinaanta waxbarasho islamarkana dareenka wadaniyadeed inuu kor u kaco. Tana waa mid muhiinm u ah koboca dalka.

## Layliska 4aad

Ka wada laadla su'aalaha soo socoda:

1. Maxaa lagu qeexayaa xuquuqda inay si siman u helaan waxbarashada?
2. Maxaa faa'iido lagu helayaa muwaadiniinta oo loo tixgaliyo xuquuqda ay u leeyihiin inay si siman u helaan wax barashada?

### 3.2.4 Xuquuqda u sinaanta helid shaqo

- Waa maxay nmarka aan leenahay xuquuqda ay u leeyihiin inay si siman u helaan shaqada?

Qof kasta wuxuu xaquuq u leeyahay in aqoonta iyo xirfada si isku mida u helo fursada shaqo. In ay helaan fursada shaqo ma'aha mid ay ku heleen kala diwanaanshaha jinsiga, quruumo iyo qow miyado iyo diin.

Haddii shaqsigu leeyahay khibrad iyo karti lamida kuwa kale si siman intuu u tartamo waa la shaqaalaysiin karaa. Xuquuqda shaqada iyo shaqaalaysiintu ma'aha mid sabab looga dhigi karo xaqdaro, xigto, aqoon iyo faa'iidooyin yar yar…. Iwm.

## Layliska 5aad

Ka jawaab su'aalaha soosocda:

1. Maxaa lagu qeexaa xuquuqda ay u leeyihiin inay si siman u helaan fursada waxbarasho?
2. Maxaa faa'iido lagu helayaa muwaadiniinta oo loo tixgaliyo xuquuqda ay u leeyihniin inay si siman u helaan waxbarashada?

## 3.3 Xuquuqda sinaanta iskuulka

- Fahfaahi xuquuqda ardaydu ay leeyihiin iskuulka dhexdiisa.



Jantuuska 3.2 ardayda oo doorasho ku jirta

Iskuulka dhexdiisa oo ay jirto nidaam shaqo oo aan jinsiga, midabka, diinta iyo xaalada hal kale la gaadhsiinayn xaqdaro ayaa tilmaamaysa tixgalinta xuquuqda sinaanta. Xuquuqaha loo baahan yahay in la tixgaliyo iskuulka dhexdiisa waxaa ka mida. Arday kasta su'aasha uu fahmi inuu waydiiyo, ka jawaab su'aasha la waydiiyay, ka qaybgalo kooxaha kala duwan ee iskiuulka, fikrad ka bixiyo arimaha iskuulka ee khuseeya, ilaalinta hantida iskuulka iyo wixii la mida weeyaan.

Sidaas ay tahay arday kasta xuquuqda uu leeyahay waxaa barbar socda waajibaadyada looga baahan yahay inay si haboon uga soo baxo. Tusaale: in xeerka iyo nidaamka uu garto islamarkana tixgaliyo, .ha noqoto fasalka dhexdiisa ama dibadiisa oo uu shaqada fasalka iyo shaqada gurigaba uu dhameeyo wakhti haboon si uu tusaale ugu noqdo kuwa kale.

## Layliska 6aad


Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Qeex xuquuqaha loo baahan yahay in la tixgaliyo iskuulka dhexdiisa?
2. Waa maxay waajibaadyada inaad ka soo baxdaan ay tahay?

## 3.4 Sinaanta jinsiga

### 3.4.1 Sinaanta gabdhaha iyo wiilasha ee dhamaan hawlaha





Jaantuska 3.3 Sinaanta Jinsiga

- Waa maxay sinaanta gabdhaha iyo wiilashu?
- Idinka oo raacaya sawirka waxaad maqlaysaan fikrad odhanaysa gabdhuhu wakhti kasta iyo meel kasta waxay u shaqayn karaan si lamida wii lasha?

Maadama gabdhuhu yihiin qayb kamida bulshada waxaa muhiim ah in xuquuqdooda dhamaan la tixgaliyo (ilaaliyo) islamarkana la aqbalo sinaanshahooda. Dhamaan muwadiniinta cida aaminsan aragtida xun ee sinaanta gabdhaha islamarkana la taageero xuquuqda sinaanta gabdhaha.

Ha noqoto jid ahaan ama kartida maskaxeed gabdhuhu way siman yihiin wiilasha

Sinaanta jinsigu waa wiilka iyo gabadha oo xaalad walba iyo shaqo walba u siman weeyaan. Tusaale guriga dhexdiiso, iskuulka, masuuliyadaha kale gabdhuhu way la siman yihiin wiilasha.

## Layliska 7aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda:

1. Waa kuwee shaqooyinka laga caadaystay agagaarkiina ee la yidhaa waa kuwii wiilasha iyo gabdhaha?
2. Shaqooyinka ay qabtaan gabdhuhu may qaban karayaan wiilashu?
3. Sida caadada ah shaqooyinka lagu qiiyaaso wiilashu inay leeyihiin may qaban karaan gabdhuhu?

### 3.4.2 Xuquuqda sinaanta gabadha iyo wiilka ardayda ah ee iskuulka dhexdiisa



Jantuuska 3.4 ardayda oo fasalaka ku jirta

- Maxaad ka fahmaysaan sawirka?
- Maxaa lagu garanayaa in xuquuqda sinaanta ee gabadha iyo wiilka ardayda ah la ilaaliyay iskuulka dhexdiisa?

Gabadha iyo wiilka ardaydii way u siman yihiin dhamaan xuquuqaha iskuu ka dhexdiisa.

Tusaale: inaad ka qaybgasho. Kooxaha naafada ah, in si isku mida la iniigu wakiisho hogaanka golaha ardayda iyo xuquuqaha la midka ayaa haboon in loo tixgaliyo.

In la dhaqan galiyo xuquuqda sinaanta ee gabadha iyo wiilka ardayda ee iskuulka dhexdiisi waxay macalimiinta, maamulka iskuulka waalidada iyo sawlada.

## Layliska 8aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Imisa gabdho oo arday ah ayaa jira fasalkiina? Wiilasha ardayduna waa imisa? Tiradee baa badan?
2. Maxaad u malaysaa sababaha ugu muhiim san ee ay gabdhaha ardayda ee fasal kiinu uu ku noqonayo mid badan ama yar? iska dhaa dhiciya iniga oo koox kaga wada hadlaya.
3. Maxaad ka leedihiin in la sameeyo si wiilasha iyo jgabdhaha la is le'ekaysiiyo? Haddii ay is le'ekadaana maxaa looga bahan yahay iskuuka iyo qoyskiina si ay u sii socoto?

## 3.5 Sinaanta dhaqanka

### 3.5.1 Macnaha sinaanta dhaqanka



Jaantuska 3.5 Dhaqano kala duwan

- Sawirka 3.5 Dhaqanka qowmiyadaha kala duwan
- Ardayeye maxaad ka fahanteen sawirka kar ku xusan?

Dhaqanku wuxuu ka kooban yahay ururo cadaynaya guud ahaan hab nololeedka bani adamka.

Qaar ka mida waxyaalaha ka turjumaya dhaqanka waxaa ka mida luuqada, diinta, hadalka, labisaada, habka loo cuno cuntada, muujinka farxada iyo geerida iyo wixii la mida ayay ka kooban tahay.

Itoobiya dhexdeeda waxaa ka jira dhaqano farabadan. Dhaqanadaasi oo kala duwan jmeelbameesha kale. Tani oo kaliya ma'ahe dhaqan ku wakhtiba wakhtiga ka danbeeya way isbadalayaan iyaga oo la jaanqaadaya herka koboca iyo xaalada nololeed ee bani adamka sido kale waliba waajibaadyada ay abuurayaan. Wakhtigan han joogno dhaqanada ka jira dalkeena dhamaan sinaantooda waxaa ilaaliyay dastuurka.

## Layliska 9aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay dhaqanku?
2. Maxay tahqay sinaanta dhaqanku?

Mid ka mida waxyaabaha muujinaya nidaamka dimuqraadiyadeed waa ilaalinta sinaanta dhaqanka.

Dhamaan qurumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta itoobiya leeyihiin xuquuq isku mida si ay dhaqankooda, luuqadooda iyo taariikhdooda u isticmaalaan is lamarkana u hour mariyaan. Haba ahaate waxaa shuubta looga baahan yahay inuu midba midka kale dhaqankiisa, luuqadiisa iyo taariikhsiisa uu barto, aqoonsado islamarkana tixgaliyo. waa inay xoojiyaan xidhiidh wanaagsan oo ku kalaysan sinaansho iyo isjacayl. Sidaa darted waxyaabaha loo baahan yahay in lagu kabciyo dhaqanka islamarkana lagu ilaaliyo luuqadaha, taariikhda iyo hab nololeedka fiican waa in jiilba jiilka kale u gudbiyaa.

## Layliska 10aad

Ka jawaab su'aalaha soo socoda:

1. Fahfaahi waxyaabaha muujinaya dhaqanka jee agagaarkiina ku aragtaan ?
2. Kala saara dhaqamada xun iyo kuwa fiican ee laga helo agegaarkiina. Kadibna shaxda hoos ku qoran buugtiina ku roga ku qora?

| | Faa'iidada dhaqanka fiican | Falalka Xunee la caadaystay |
|---|---|---|
| | | |
| | | |
| | | |

### 3.5.2 Baahida in la xoojiyo dhaqanka

- Maxay faa'iido leedahay dhaqankaaga oo aad xoojisid?

B. Qaar kamida falalka la caadaystay ee aan ku aragno deegaanada kala duwan ee dalkeena.

- Gudniinka gabdhaha
- Muujinta farxadda i.w.m
- Muujinta tiiraanyada "murugada"
- Guurka dag-dega ah ee gabdhaha

T. Qaar kamida falalka faa'iidada u leh horumarka iyo koboca.

- Dul qaadka shaqo ee wada shaqaynta.
- Soo dhawaynta martida iyo tixgalinta qofka ka wayn.
- Hab lagu caawiyo wakhtiga geerida iyo hagbad hab kaysi ah.
- Intii kartidada ah oo aad ku taageertid waala haaga dhibaataysan ...iwm.

### Shaqo kooxeed

Falalka xun ee loo gaysto gabdhaha iyo caruurta ardayda ah dhibaatada caafimaad ee ay keenaan agagaarkiina ka soo qora wax aan ka badnayn hal bog idinka oo koox koox ah soona ururinaya xog.

## 3.6 Naafada

### 3.6.1 Macnaha naafada

- Waa maxay naafadu?
- Faah faahi xaalada ha sababa naafada?

Naafadu waa marka qofka caafimaadkiisu dhamaystiran yahay waxqabadka uu qabanayo aad qaban kari waydo. Markaan dhinaca kale ka eegno naafadu waa marka waxqabad ama dhaqdhaqaaq sababo kala duwan aad u fulin kari waydo.

Itoobiya gudeheeda waxaa laga helaan naafo aad u badan. Waxaan aragnaa naafada oo lagu takoorayo iskuulka, meelaha shaqada nolosha bulshada iyo iwm. Maafadan noocani ah in la takooro islamarkana laga fogaado waa laga mamnuucay sharciga hadii ay jiraan waa kuwo aan faa'iido u lahayn horumarka dalka.

Dhamaan dadka naafadu waxay leeyihiin mudnaan. Sida qofkasta oo muwaadin ah ayay qaban karaan hawlaha faa'iidada u ah dalka. Sidaas ay tahay dawlada iyo bulshadaba waxaa laga doonayaa inay tixgaliyaa xuquuqdooda islamarkana taageero siiyaan.

#### Layliska 11aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda:


1. Taageero nooce ah ayaa loo baahan yahay in loo sameeyo naafada?
2. Marka xaalad side ah loo labuuro marka naafad sida muwaadin kasta u qaban karayaan hawlaha faa'iidada u ah dalka?

### 3.6.2 Taageerada ay u baahan yihiin naafadu

- Taageerooyin nooce ah ayay u baahan yihiin naafada laga helo agagaarkiina?

Waxaa loo baahan yahay in naafada taageerooyin badan u sameeyaan dawlada, bulshada iyo ururada deeqda bixiyaa. Waxaa ka mida jacayl iyo daryeelka uu uga baahan yahay bulshad. Agagaarka uu ku nool yahay iyo iskuulada.

Sido kale waxaa haboon in alaabta uu u baahan yahay loo dhamaystiro. Tusaale ahaan, waxaa loo baahan yahay in dadka indhoolaha ah loo keeno buugta iftiinta. Haddii dadka naafada ah la tixgaliyo xuquuqdood a islamarkana ay helaan taageerada ay u baahan yihiin, Waxay saamayn wayn ku yeelan kartaas dadaalka loogu jiro in dalka laga saaro fiiqiirtinimada iyo dib–u dhaca.



Jantuuska 3.6 naafadu sida muwaadiniinta kale ayay wax soo Saar leyihiin

#### Layliska 12aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Si loo taageero naafada iskuulkiina dhaqdhaqaaq nooce ah ayaa la sameeyay?
2. Muxuu noqonayaa doorka iyo masuulliyada aad ku leedihiin taageerada loo samaynayo dadka naafada ah?

## 3.7 Macnaha Xuquuqda sinaanta diinta

- Waa maxay waxa ay tahay sinaanta diinta?

Diintu waa ilaahay oo aad aamintid inuu jiro. Waxaan eray lagu sharixi Karin islamarkana laga cabsado oo la caabudo ayaa la yidhaa diin . Diimaha ka jiraa duunka badankoodu waxay baraan dadka anshaxa wanaagsan islamarkana bani. Adamku ay sameeyaan wax wanaagsan ama wax khayr leh.

## Sinaanta

Mid ka mida xuquuqaha bani'adamnimo ee muujinaya waxay yihiin shuc uubtu waa xuquuqda ay u leeyihiin inay haystaan diinta ay rabaan islamarkana ku talaabsadaan. Xuquuqda uu u leeyahay inuu raaco diinta u rabo waxaa lagu tiriyaa inay ka mid tahay xu quuqaha aadka u muhiimka ah dastuurka jamhuriyada dimuqraadiga federaliga ee itoobiya wuxuu si cad u qeexay xuquuqda qof u leeyahay inuu raaco diin kasta. jlta waxa dheer diin ama aaminaad waa ka mumnuuc inay isku daydo inay kuwa kale cabudhiso islamarkana ku yeelato saamayn awooded.

Marka aan leenahay xuquuqda sinaanta diinta wadankeena muwaadin kasta inuu haysto wax uu aaminsan yahay muwaadinka kale aaminadiisa tixgaliso islmaarkana ka horjoogsan inuu hirgali yo aaminadiisa. si isku mida loo tixgaliyay aaminada iyo in ayna jiri mid saraysa, mid hoosaysa ayaa la yidhaa xuquuqda sinaanta diinta.

### Layliska 13aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay diintu?
2. Maxaan ujeednaa marka aan leenahay xuquuqda sinaanta diimaha?

### Gaba-Gabada Cutubka 3aad

Xuquuqda sinaantu waa xuquuqda aas-aasiga ah ee bani'adamka. Quruumaha, qowmiyadaha iyo shu cuubtu inay arintooda sida ay rabaaw u qabsadaan ayaa dastuurku go'aamiyay waxqabadana lagu xaqiijiyo xuquuqda ayu leeyihiin inay ismaamulaan. Inta waxa dheer shuycuubta oo loo tixgaliyay xuquuqahooda sinaanta ee ah inay luuqdooda adeegsadaan, qani noqdo dhaqankooda iyo taariikhdooda oo ay ilaaliyaan.

Hirgalida xuquuqda u sinaanta helida fursada waxbarasha waxay dedejin kartaa koboca iyo horumarka wadankeena. Sinaanta jinsigu waa xuquuq faa'iido u ah in laga fogaado habka cadaalad darada iyo caadooyi8nka xun ee u dhexeeya gabdhaha iyo wiilasha. Sidoo kale in xuquuqda naafada si hasboon loo tixgaliyo islamarkana la sugo ayaa habaan faa'iidada ay dhamaanteen inoo leedahay inaan tusno daryeel iyo jacay.

Sinaanta diintu waa xuquuq dimuqradiyada itoobiya u xaqiijisay muwadininteda. Sidaas ay tahay midba midka kale inuu tixgtaliyo nabadna kula noolaado ayaa faa'iido wayn u ah koboca wadanka.

### Erayada furaha u ah cutubka 3aad

| | |
|---|---|
| Xuquuq: | waa faa'iida kasta oo qofi inuu helo ay tahay, Adeeg iyo Mudnaan buuxda… iwm |
| Dhaqan: | Waa bulsho luuqadooda, diintooda, hab nololeedkooda, khibradooda … iwm |
| Qowmiyada: | waa shucuub/bulsho ay ka dhexayso dhaqan, luuqda, taariikh islamarkana hal dee gaan ku nool. |
| Biiraal: | indholayaashu wax ay sida waraaqda u adeegsadaan qoraal iyo akhris. |
| Dulmi: | waxaad ugu talagashay inaad qof dhibgaadhsiisid midka kalena uga faa'iidayso. |
| Sinaan: | iyaga oo kala sarayn inay si sax ah ama heerka /qaybta ku haboon ay helaan. |
| Hagbad: | shaqo iscaawin ah oo deegaanada miyiga kolba meel lagu qabto. |
| Furun: | waa shaqo iscaawin ah oo dad badan la quudiyo, lacabsiiyo iyaga oo midaysan |

## Layliska Cutubka 3aad

### I. Weedhahan soo socda ku qor "Run" tii run ah tii been ahna ku qor "Been"

1. Dhaqan waa shay muujinaya xaalada nololleed ee bani'adamka
2. Shaqadaada oo aad u dhulqaadatid waa dhaqan muhiim ah oo laga caadaystay wadankeena
3. Guurka dag-dega ah waxaan ku dari karnaa falalka muhiimka ah dhexdooda.
4. Xuquuqda ay uleeyihiin inay iyagu is maamulaan waxay muujinaysaa sinaan.
5. Sinaanta jinsigu waa mid gabdhaha iyo wiilasha dhex dooda ka abuuraya kala duwanaansho iyo cadaaladaro.

### II. Weedhaha "T" hoosteeda lagu taxay ku aadi kuwa "B" ku hoos taxan

| B | T |
|---|---|
| 1. Gabdhaha iyo wiilka oo sinaada | B. Tixgalinta dadka waawayn |
| 2. Cadaynta quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubtu cidaay yihiin. | T. luuqda |
| 3. Qaybaha bulshada ee u baahan tageero gaar ah | J. sinaanta diinta |
| 4. Anshax wanaagsan | X. Sinaanta Jinsiga |
| 5. Xuquuqda qofwalba ku raacayo diintiisa | Kh. Naafada |

### III. Su'aalhan soo socda a kadooro jawaabta saxda ah

1. Ku wan soo socda waa kee faa'iidada ay quruumaha, Qowmiyadaha iyo shucuubtu ka helayaan inay iyagu ismaamulaan?
   B. Deegaankooda oo ay horumariyaan.
   T. Inay sugaan /tixgaliyaan xuquuqda bulshada.
   J. inay bulshooyinka kale dulqaad ku wada nolaadaan.
   X. Dhamaan waa sax.
2. Kuwan soo socda teebaan qeexayn xuquuqda sinaanta ardayda ee dugsiga dhexdiisa?
   B. Su'aal waxbarasho uu waydiiyo fasalka dhexdiisa.
   T. inuu ka qaybgalo kooxaha kala duwan dhexdooda
   J. Saacada iskuulka oo uu ciyaar ciyaaro.
   X. Ardayda oo fikir ka dhiibta arimaha khuseeya

3. .......................... waa fal xun oo taabanaya xuquuqda bani'adamnimo ee gabdhaha iyo sharaftooda.
   B. Guur deg-deg ah
   T. Gudniinka gabdhaha
   J. Shaqada wiil ku qabto oo aad qabatid.
   X. "B" iyo "T"
4. Kee baa ahayn taageeroyinka ku haboon in loo sameeyo naafada
   B. Jacayl iyo kolkolin
   T. Takoorid iyo cadaaladdaro
   J. in loo keeno qalabka xogta waxbarasho.
   X. Xuquuqdooda oo si siman loo tixgaliyo.
5. Tee baa bulsho u noqon karaysa tilmaan dhaqan
   B. labiska
   T. Cuntaynta
   J. qeexda farxada iyo geerida
   X. dhamaan waa sax

## IV. Meelaha Banaan ee soo socda ku buuxi erayga saxda ku ah

1. Shaqo iscaawin ah oo deegaanka miyiga kolba meel lagu qabto waxaa loogu yeedhaa. ....................................... .
2. Caruurtu luuqadooda hooyo ......................................, ...................................... iyo ...................................... ayay ka baran karaan

## V. Jawaab gaaban siiya su'aalaha soo socda

1. Sheeg faa'iidooyinka ardaydu ay helilahaayeen marka ay luuqadooda wax ku bartaan.
2. Si gaaban u fahansii hababka suuro galinaya kor u qaadida kaqaybgalka gabdhaha ardayda ee iskuulkiina islamarkana looga dhigo mid sii jira.

CUTUBKA 4

# Cadaalada

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka


Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Fahmaan macnaha cadaalada.
- Gartaan xaaladaha ama dhacdooyinka jabin kara ama caddaalad daro keeni kara.
- Fahmaan macnaha arrimaha caddaalad darada ah iyo waxyaabaha lagu garto.
- Ogaadaan macnaha ururada bulshada iyo faa'iidooyinka ay leeyihiin.
- Fahmaan jiritaanka nidaam caddaladeed ee deegaanadooda kaalinta uu ka qaato sugida nabad galyada?
- Fahmaan macnaha cashuurtu waxaa uu yahay.

## 4.1 Cadaalada

### 4.1.1 Macnaha cadaalada

- Waa maxay cadaaladu? Waxaad ka taqaanaan idinka oo waraaqad ku qoraya kolba mid ha u akhriyo kuwa kale.



Jaantuska 4.1 Miisaan

- Muxuu qeexayaa miisaanka qalooci?
- Muxuu tilmaamayaa miisaanka hagaagsan?
- Maxaad ka fahanteen miisaanadan? Miisaan kee ayaad dooranaysaan? Waayo?

Cadaaladu faa'iido aad u wayn ayay u leedahay inay wanaagsanaanto nafta iyo nolosha dadku. Cadaadadu waa arin muhiim ah dhamaan dhaqdhaqaaqyada nololeed gudahooda tusaale iskuulka xaafada iyo nolosha qoyska. Iyada oo dadka wax kala duwanaanshaha iyo wax cadaalad daro ah aan abuurayn.

Haddii ay jiraan wax kala duwanaansha ah waa qalabkii hagaajinayay.

Cadaalada heerka saaxiibtinimo waxay dadka u samaysaa inay xidhiidhka iyaga ka dhexeeya inuu noqdo mid dhelitiran oo ayna midna sarayn midna hoosayn.

Miyaad ogaateen in waxa aad ku heshiiseen inaad akhridaan ama dhexdiina ku ciyaaraysaa inay jirto tahay xidhiidh cadaalada. Cadaaladu iyada oo midna dhib gaadhsiinayn midna u faa'iidaynayn ayay xuquuqda muwaadiniinta tixgalisaa.

Caadaalada heer qoys waxay qoyska ka dhigtaa inuu noqdo mid nabada islamarkaana horumarinaya nolosha mustaqbalka ee muwaadininiita dalka.

Cadaalada heer wadan wuxuu hab nabadeed ku xaliyaa isku dhacyada bulshada dhexdeeda islamarkaana saxaa cabashooyinka iyo habka shaqo ee cadaalad darada ah. Wuxuu damaanad qaadayaa in hantida iyo alaabta muwadiniintu si aan haboonayn oo sharci-daro iyo tuugnimo looga qaadanin. Cadaaladu waa aas-aaska koboca bulshada, qaninimada iyo horumarka.

Wuxuu xaqiijinayaa xuquuqda muwaadiniintu u leeyihiin inay wadankood sinaan iyo xornimo ugu nolaadaan, wax ugu bartaan islamarkana ka shaqeeyaan.

Cadaaladu waxay samaysaa inay wadanka nabad gaadhsiiso. Iyada oo ka illaalinaysa khatarta soo gaadhaysa caruurta, gabdhaha, dadka awooda yar iyo hooyooyinka.

Cadaaladu waxay balaadhisaa nabada, koboca, qaninimada iyo sinaanta shucuubta islamarkana ay tahay qalab loo isticmaalo xoojinta xidhiidhka gudahooda.

### Layliska 1aad

Ka shaqeeya su'aalaha soo socda:

1. Fahfahi faa'iidada cadaaladu u leedahay deegaanada soo socda?

   B. Nolosha Qoyskooga

   T. Heerka Xidhiidhka Xaafada

   J. Dugsiga

2. Fahansii wax qabadyada cadaalada ee aad leedihiin waa in laga fuliyo deegaanada aan kor ku sheegnay?

## 4.2 Hawlaha adeeg-fidinta cadaalada iyo waaxda cadaalada ee laga helo deegaankeena

### 4.2.1 Habka bixinta cadaalada ee bulshada

- Haday eex idinku soo gaadho fasalka gudihiisa waa ayo cida aad ogaysiinaysaan 'falka?
- Deegaankiina marka isfahandaro ka dhex abuurmo dadka miyay jiraan dad xaliya Isfahandarada? Haday jiraan waa side siday u xaliyaan Isfahandarada?

### Mudane Axmed

Mudane Axmed waa qofka tusaale loo soo qaato go'aan bixinta cadaalada ee agagaarka. Dadka isku dhaca xaafada dhexdeeda sida uu u heshiisiiyo dhibaatooyinkii dhacayna u xaliyo islamarkana sameeyo inay nabad iyo calool fayoobi ugu nooladaan majiro wax kula tartamaan. Marka mudane Axmed fulinayo hawsha wakhtiyada qarkood waa kaligii wakhtiga kalena wuxuu fuliyaa isaga oo la jooga kuwa kale. waxay mudane axmed dhexdhexaadintaa shaqo u noqotay taabagal ma'aha abuur ka duwan bani adamka.

Mudane axmed waxa ugu muhiimsan ee ka danbeeya heshisiintu waa jidka ama habka haboon ee uu raacay bixinta cadaalada. Mudane axmed marka ugu horaysa ee ay u yimadaan dadka arinta lehi wuxuu ku dadaalaa inuu fahmo waxa sababta u ah dhibaatada ama Isfahan la'aanta. Labada dhinacba fikradooda wuu ka dhagaysta.

Marka uu si fiican u fahmo macnaha dhibaatada kadib ayuu siiyaa go'aan ay labada dhinac ku qanacsan yihiin. Sababatan awgeed ayaa mudane axmed odaynimo diisa iyo go'aankiisu inta badan aqbalaad ka helaa.

### Layliska 2aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Maxay mudane axmed inta badan go'aanadiisa loo aqbalay? Sheeg saddex ka mida.
2. Fahfaahi habka bixinta cadaalada ee mudane axmed?
3. Waa wiil dhaqan nooce leh qofka aad u dooorataan siidhi wade ciyaaraha saaxiibadaa dhexdiina? Waayo?

### Cadaalada meelaha kala duwan

cadaalada waxaa la siiyaan lama filaano iyo arimo kala duwan. Xaalada bixinta cadaaladu waxay toos ugu xidhantahay nolol maalmeedka dadka. Tusaale iskuuka, meelaha lagu ciyaaro iyo guriga dhexdiisa go'aanada la bixiyo subax kasta soo xasuuso.

Dhamaan go'aanadani waa falal qeexaya cadaalada. Hawsha bixinta cadaaladu waxay tilmaamaysaa inaad raacdid nidaamka haboon oo xal iyo go'aan. Loogu raadiyo cabashooyinka kala duwan ama dhibaatooyinka. Ururada a go'aan bixinta cadaalada ee noocani waxay leeyihiin habab ay iyagu raacaan.

Hawl kasta oo cadaalad bixin ah waxaa jira waxyaabo aas-aasi ah oo ay tahay in la ogaado ama la barto: kuwaas oo ah:

Inaad soo ururiso xog aad si hadoon ugu fahmi kartid waxa abuuray dhibatada.

Inaad si haboon u fahantid arinta.

Inaad siiso go'aan haboon oo salka ku haya runta.

## Layliska 3 aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda:

1. Muxuu ka kooban yahay hawlaha cadaalada bixintu?
2. Qaybaha cadaalad bixinta ee deegaankiinu siday u xaliyaan Isfahan la'aanta?

### i. Xubnaha cadaalada

- Sheega qofka bixiya cadaalada qoyska, iskuulka, agagaarka guryaha lagu nool yahay iyo fasalka wax lagu barto?
- Maad garanaysaan masuuliyad aad ka soo baxdeen hawlaha cadaalad bixinta dhexdeeda ee gurigiina, iskuulkiina ama fasalada aad wax ku barataan?

Xubnaha cadaaladu waa xubnaha xalka siiya sidii loo tirtiri lahaa cabashooyinka iyo isku dhacyada ama Isfahan la'aanta ka abuurma bulshada dhexdeeda. Xubnaha cadaalada ee ka soo baxa masuuliyada noocan ah waxaa loo qaybiyaa laba. Waxaana loogu yeedhaa dhaqan iyo casri. Xubnahani waxay u adeegaan sidan go'aan u siin lahayeen dhibaatooyinka cadaalada ee ka abuurma bulshada dhexdeeda.

### B. Xubnaha cadaalada dhaqanka



Jaantuska 4.2 Cadaalad bixinta dhaqanka

- Maxaad ka fahmaysaan jaantuska 4.2 ee kor ku xusan?
- Kala dhigdhig xubnaha heshisiiya dadka iskudhac agagaarkiina?

**Xubnaha cadaalada dhaqanka.** Wakhtiyadii hor laga soo bilaabo shacabka wadankeena ku nooli waxay lahaayeen hab ay raacaan xalinta isfahandarada iyo dhibaatooyinka eexda kadhex abuurma bulshada dhexdeeda. Laamahan cadaalada dhaqanku deegaanada kala duwan waxay lahayeen calaamado kala duwan.

Odayaal, sheekhda diinta, iyo shaqsiyadad caan ah kuwaas oo agagaaro kala duwan laga helo.

Maadama laamahan laga helo meela dhaw waxay bulshada siiyaan adeegyo cadaaladeed oo kala duwan. Mudane axmed waxqabad kiisu wuxuu tusaale u yahay xubnaha cadaalada dhaqanka.

### T. Xubnaha cadaalada Casriga



Jaantuska 4.3 Xafiiska Maxkamada Guud ee DDS iyo Xafiiska X/Ilaalinta Guud & Caddalada ee DDS



Jaantuska 4.4 Komishinka BooliskaDDS



Jaantuska 4.5 Xarunta Xaafadda 03 ee Jigjiga.

- Adiga oo fiirinaya jaantuska kor ku xusan fahfahi waxqabadka laan kasta oo cadaalada?

Xubnaha cadaalada casrigi waxay muwadiniinta ka illaaliyaan inayna eex ama dulmi soo gaadhin hanoqdaan xubnaha dawlada ama kuwa kale. muwaadiniintu marka ay la kulmaan dhibaatooyin kala duwan oo cadaalad ah waxay u soo dhaweyaan laamahan. Xubnahana iyaga oo raacaya sharciga iyo xeerka ayay go'aan ku haboon uraadiyaan. Arimaha loo keenana go'aankoodana way gudbiyaan. Xubnahan cadaalada casriga kuwa ugu muhiimsan waaa kuwan soo socda.

| Maxkamadaha shacabka ee qabalega | Xarumaha booliska | Maxkmaadaha |
| --- | --- | --- |
| Waxay u adeegaan bulshada iyaga oo go'aan cadaalada siinaya arimaha kala duwan. waa ka meesha ugu dhaw laga helo xubnaha cadaalada casrigaa ah. | Booliska nabada ilaaliya ee aad ku aragtaan agagaarkiina may ilaaliyaan nabada bulshada iyo idinkaba. Wax qabadkoogu ma tixgaliyaa nabada iyo deganaanta bulshada ee xubnaha cadaalada casriga | Xubnaha cadaalada ee wadan ka jira dhexdooda maxkamada waxaa la shaegaa inay tahay ta ugu saraysa. Waa laamaha cadaalada bixiya marka qof ay la kulanto dhibaato iyo eex/ dumi iwm. |

## Layliska 4 aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Fahfahi waxqabadka xubnaha soo socda si loo balaadhiyo hawlaha cadaalada?

   B. Qabaleyasha T. Maxkamadaha

   J. Xarunta booliska
2. Fahfahi dhibaatooyinka cadaalada ee kula kulmi kara haddii ayna xubnaha boolisku joogin agagaarkiina?

## 4.3 Xaaladaha jabin Kara cadaalada

### 4.3.1 Sharciga oo aan latixgalinin

- Waa kee qofka loo baahan yahay inuu sharciga tixgaliyo iskuulkiina?
- Muxuu noqonayaa haddii sharciga latixgalin waayo? Talaabooyin nooce ah ayaad leedihiin way ku haboon yihiin in la qaado?

#### Tuulooyinka kaaha/Qaybta kobaad

Tuulooyinka kaaha wakhti dheer ayay tusaalooyin u ahaayeen isjacaylka iyo nabada bulshooyinka ay jaarka yihiin.

Arimaha ay caanka ku ahaayeen waxaa ka mide ahaa dhamaan bulshada tuulooyinka oo waxba ku kala duwanayn ayay si haboon sharciga u tixgalinayeen. Inta waxa dheer nidaamka cadaaladu wuxuu ahaa mid uu sal u yahay cadaaladu islamarkana ka nadiifa dulmiga. Waxay raacayaan hab shaqo oo si deg-deg ah xal u siinaya isku dhacyada iyo xadgudubyada.

Sababta awgeed kaaha waxay nolosheda ku raja waynayd cadaalada tuulada in laagu yeedho cadaalada dalka.

Sanadadii yara ee aan soo dhaaafnay laga bilaabo xaalada tuulooyinka kaaha ma'ahayn sidii wakhtiyadii hore. Waxaa la waayay tixgalintii laamihii wakhtiga dheer illaalinayay cadaalada bulshada dhaxdeeda.

In badan ayaa kasoo waregta markii labilaabay jabinta sharciga iyo xeerka. Maamulka tuuladuna waxay bilaabeen inay bixiyaan go'aan ka baxsan sharciga iyo nidaamka. Adeegii bulshadu ka helaysay dawlada wuxuu noqday mid ku salaysan lacag iyo aqoon … iwm. Waxaa bilaabantay in waxyaabaha aad u baahan tahay ku heshid xoog iyo lacag ama xigto.

Waxaana batay danbiyadii tuugada iyo dagaalka. Danbiilayashunama noqonin kuwa xoogaga nabad galyadu si dhibyar ku qabtaan. Haddii la qabtana si deg-deg ah ayaa xabsiga looga siidaayaa. Majirto waax adag oo cadaalada oo bulshada siisa xal ku haboon dulmiga iyo dhibta soo gaadha. Hantidii gaar ahaneed ee bulshadana waxaa qaatay shaqsiyaad, Tusaale Beeraha iyo mee3lihii qalabka guryaha, ...iwm. Dadkii ku nolaa tuulooyinku aad ayay uga murugoonayaan xaaladan. Haddii ay xaaladan ku sii socoto waxay noqon doontaa tuuladii cadaalada ee kaaha.

## Layliska 5 aad

Adiga oo ku salaynaya akhriska kor ku xusan ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay sababta abuurtay dhibta tuulada kaaha? Kawada hadla.
2. Faahfaahi falalka aad leedihii waa kuwa jabiya cadaalada?

Mid ka mida waxyaabaha jabiya cadaaladu waa sharciga oo la fixgalin waayo. Sharciguna waa nidaam loo baahan yahay inay dhamaan tixgaliyaan muwaadiniintu meel kasta oo ay joogaan waa inay tixgaliyaan sharciga. Sharciguna waa shay laga helo dhamaan meel kasta iyo dhaqdhaqaaq kasta oo nololeed. Sida qoyska, iskuulka fasalka dhexdiisa, meesha ciyaarta, meesha shaqada …iwm. Haddii sharciga iskuulka ama nidaamka iskuulku si haboon loo tixgalin waayo shaqooyinka iskuulku ma noqonayaan kuwa midhadhal ah. Sobabtan awgeed mustaqbalka ardaydu wuxuu noqonayaa mid xumaada maadama ardaydu waxbarashadooda si haboon u wadanaynin.

Sidoo kale ciyaar walba waxay leedahay sharci u gaar ah. Waxaana loo baahan yahay in si haboon loo tixgaliyo sharciga. Haddii si haboon loo tixgalin waayo sharciga kaliya ciyaartu joogsan maysc waxa dhicikara dhibaato ka wayn tani.

Nidaamkii maamulka qayskuna jwuxuu noqonayaa mid aan la raacin oo dhibaato galla. Markii dhawayd taariikhda aad soo akhrideen ee tuulooyinkii kaaha ayaa tusaale u ah. Sharciyada heer wadan kazoo baxay waa inay muwaadiniintu tixgaliyaan. Haddii ay tixgalin waayaan nidaam shaqo oo cadaaladi ma jirayo. Sharciga oo la tixgalin waayo wuxuu dhibaato aad u wayn gaadhsiinayaa shaqlsi, bulshada iyo wadanka.

Sidaa darted dadku si ay uhorumariyaa nabada iyo koboca qoyskooda, wadankooda waa inay tixgaliyaan sharciga. Xaaladaha kala duwan ee abuuraya dhibaatooinka cadaalad waa dadka oo tixgalinaynin sharciga iyo xeerka

## Layliska 6aad

Jawaabo gaaban sii su'aalaha soo socda:

1. Faahfahi waxyaabaha aad leedihii sabab ayay u yihiin jabinta cadaalada ee laamaha jsoo socda

   B. Qoyska Dhexdiisa

   T. Iskuulka Dhexdiisa

   J. Fasalka dhexdiisa
2. Faahfaahi dhibaatooyinka ay keenayaan tixgalin la'aanta iskuulka iyo heer qabale?

### 4.3.2 Shaqooyin cadaalada dara ah oo aad fulisid

- Faahfahi cadaalad darada aad leedihiin way ka muuqataa deegaanada soo socda.

  B. Fasalka wax lagu barto.

  T. Iskuulada

  J. Qabaleyada /xaafadaha.
- Maxay dadku u fuliyaan shaqooyinka cadaaladdarada ah? Sheega waxyaabaha aad leedihiin sabab ayay u yihiin.

Arinta labaad ee ka mida arimaha jabiyacadaaladu waa fulinta shaqooyinka cadaalad darada ah. Shaqooyinka jcadaalad daradu way kazoo horjeedaan habka cadaalada ah. Marka ay cadaalad daradu ku

baahdo bulshada dhexdeeda waxaa meesha ka baxaya cadaaladii cadaalad daradu waa inaad ku shaqayso nidaam ka baxsan sharcigii iyo nidaamkii loo baahnaa.

Cadaalad-darada waxaan ku qeexi karnaa inaad qof si aan haboonayn ugu faa'iidayso ka kalena ku samayso fal dhib gaadhsiinaya. Qaar ka mida dadku waxay fuliyaan waxqabadyo jcadaalad daro ah sida xigto, luuqad, jinsiyad, diin, saaxiibtinimo iyo lacag u qaato… iwm shaqooyinka cadaalad darada ah waxaa laga fulin karaa meelo kala duwan tusaale iskuulka, Qabaleega, laamaha cadaalada … iwm.

Falalkan cadaalad-darada ah ee sharciga baabinaya waxay carqalad ku noqonayaan balaadhinta nidaamka cadaalad ah. Hase ahaate cadaalad-darada meel kasta laga fulinayo ma'aha falal lagu taageerayo fuliyaha.

### Layliska 7 aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda

1. Maxaa idinka la iniiga baahan yahay si loo tirtiro cadaalada darada?
2. Maxaa in la sameeyo loobaahan yahay si loo tirtiro cadaalad durada laga fuliyo iskuulka?

## 4.3.3 dhibaatooyinka ay keento cadaalad daradu

### Tuulooyinkii kaaha/Qaybtii labaad/

Xaalad a tuulooyinkiii kaaha siday wakhtiba wakhtiga ka danbeya u sii xumaanayeen islamarkana faraha uga baxayeen waxay noqdeen in laga cabsado noloshooda. Maadama markii hore tuulooyinkan ayna jirin xoog ciidan iyo isku duubni waxay noqdeen meelo si isdaba jog ah looga weeraro bulshoyinka kale ee aan jaarka nahay. Markay ciyaalku garoonka ku ciyaarayaan, xooluhubna dhiba u baxaan lama arko. Xatooyada oo aad uga sii dartay awgeed gabdhuhu way joojiyeen tagidii iskuulka. Hooyoyinkiina aad ayay cabsi uga qabaan tagida suuqa in marmarka qor kood ay dhimasho dhacdo ayaa la sheegayaa. Dadkiina waxay bilaabeen inay ka qaxaan tuulooyinkooda ugu danbyntii dadkii way qanceen tuulooyinkoodii. Sidii odhaahdii faras ayaa lumay. Imikana intay midnimadii tuulooyinku burburtay ayay dadku markay dhexmarayaan. Kaftan u yidhaadaan tuuladii isjacaylka ee kaaha iyo cadaaladii wadanka.

### Layliska 8aad

Idinka oo kui salaynaya akhriska kor ku xusan ka jowaab su'aalaha soo socda.

1. Faahfaahi arimaha ay keenaan cadaalad darada iyo tixgalin la'aanta sharcigu?
2. Maxay ahayd inay sameefyaan si ayna dhibaato usoo gaadhin dadka ku nool tulada kaaha? Ka sheeg laba arimood.



Jaantuska 4.6 Xatooyo iyo xoog ku qaadasho



Jaantuska 4.7 Labaxsiga hablaha



Jaantuska 4.8 hanti uu gubay ka cararaya

### Cadaalad-daradu waxay keentaa dhibaatooyinka soo socda

- Muwadiniintu faa'iidooyinkii ay ahayd inay wadankooda ka helaan ayay ka dhigaysaa inayna ka helin. Tusaale markay Cadaalad daradu ku baahdo iskuulda caruur tu waxay u xiisayaan fursadii wax barasho ee loo baahnaa inay helaan. Sido kale markay cadaalad daradu

ku faafto laamaha caafi maadka gudahooda waxaa dhibaato noqonayaa in ay muwadiiniintu helaan adeeg dawayn ah oo haboon.

- Marka cadaalad daradu ku faafto qoyska dhesxdiisa waxay ragaadinaysaa nolosha qoyska. Waxaa kale oo cadaalad daradu keenaysaa in muwadiniintu ay tixgalin waayaah sharciga iyo xeerarka taas. Oo keenaysa inay dawlada aamini wayaan. Islamarkana sabab u noqonaya inay macaarad iyo kacdoon abuurmo. Wadankana ma jirayso nabad iyo deganaasho. Hantida iyo alaabta muwadiniinta xoog ayaa lagaga qaadan. Waxaana dhici karta inay khatar soo gaadho noloshooda.

### Layliska 9 aad

Ka wada hadla su'aalaha soo socda

1. Cadaalad darada jirta maxay dhib u keenaysaa muwaadiniinta?
2. Muwaadin kasta maxaa laga doonayaa si loo tirtiro cadaalad darada?

## 4.4 Ururada bulshada

### 4.4.1 Macnaha ururada bulshada



Jaantuska 4.9 ururada bulshada

- Shaxanka soo socda intaad buugtiina ku rogtaan buuxiya inay ururadani ka jiraan agagaarkiina iyo inayna ka jirin.

| | Ururadan oo fahfahsan | Way jiraan | Majiraan | Tiradooda | Nooca xirfadla yaasha ee ka shaqeeya ururada |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Iskuulka | | | | |
| 2 | Goob Caafimaad | | | | |
| 3 | Xafiiska qabaleega | | | | |

Ururada bulshada waxaa la yidhaahdaa xafiiayada loo aas–aasay inay bulshada agagaarka siiyaan adeegyada kala duwan ee buushada. Shaxanka kor ku xusan xafiisyada ku yaala ayaa tusaale u ah ururada bulshada.

Ururadan bulshadu waxay bulshada siiyaan faa'iidooyin iyo adeegyada kala duwan ee loo baahan yahay. Tusaale iskuulka aad wax ku barataan waxaa loo sameeyay inuu bulshada agagaarka siiyo adeega waxbarasho. Sidoo kale xarunta caafimaadka waxaa loo sameeyay inay bulshada ka dawayso dhibaatooyinka caafimaad ee la kulma bulshada.

### Layliska 10 aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Qeex waxa ay yihiin ururada bulshadu?
2. Maxay yihiin adeegyada ay bixiyaan ururada bulshadu?

### 4.4.2 Cadaaladnimada adeega ururada bulshada

- Waa maxay bixinta adeeg bulsho oo cadaalada?
- Maxaa lagu qeexaa cadaaladnimada adeega ururada bulshada?

Ururada bulshada waxaa loo sameeyaa inay dhamaan bulshada si siman ugu adeegaan iyada oo

ayna jirin wax kala duwanaansha ah. Waxaa ururadan looga baahan yayay inay racaan nidaam, adeeg bixin ah oo ku salaysan sinaan iyo cadaaladnimo. Adeega cadaalad nimo waa adeeg muwadiniinta si haboon u siinaya waxay uga baahan yihiin ururada iyada oo loo kala saarayn taanjir, fiqiir, qof masuul ah, qof aan masuul ahayn, Qof xigto leh iyo qof aan xigto lahayn iwm.

### Layliska 11 aad

Ka jawaab su'aalaha soo socota:

1. Sheega waxyaabaha aad leedihiin carqalad ayay ku noqonayaan inay laamaha bulshadu siiyaan adeeg cadaalad ah.
2. Fahfahi dhibaatooyinka dhici kara haddii aan la siinin adeeg cadaalad ah?

## 4.5 Cashuurta

### 4.5.1 Macnaha iyo faa'iidada cashuurta



Jaantuska 4.10 Xaalada bixinta cashuurta

- Dadka ka muuqda jaantuska 4.10 maxay samaynayaan?
- Waligaa ma maqashay erayga cashuur? Qeex waxaad ka taqaanid.

### Su'aasha khadija

Markay khadija baratay macnaha laamaha bulshada kadib waxay doontay inay ogaato cida samaysay laamaha kala duwan ee ka jira agagaarka. Su'aashi waxay kala dooday abaheed mudane Cali. Doodii khadija markay aqoon ka heshay laamaha bulshada ayay hadana fahantay macnaha cashuurta. Haddaba doodi khadija iyo aabaheed ay yeesheen waxaa loo soo bandhigay labadan qaybood ee soo socda.

### Su'aasha khadija/Qaybta koobaad/

**Khadija:** Aaboayaa sameeyay iskuulada, caafimaadka beeraha iyo xarumaha, wadooyinka …iwm ee agagaarkeena laga helo?

**Mudane Cali:** Kuwan aad sheegtay badankooda waxaa sameeyay waa dawlada. Dawladu waa xubin bulshadu u wakiilatay inay bulshooyinka nabad iyo badbaado ku illaaliso islamarkana u samayso shaqooyin horumar oo kala duwan.

**Khadija:** Aabo dawladu inay samayso dhamaan shaqooyinkan halkay lacag ka keentaa?

**Mudane Cali:** Dawladu waxay waxqabadya-dan ku samaysaa lacagta ama cashuurta ay ka soo ururiso muwadiniinta.

**Khadija:** Aabo haba ahaate waamaxay cashuurtu?

**Mudane Cali:** Cashuurtu waa lacag laga gooyo dakhliga muwadiniinta ay helaan taas Dawlada la siiyo. Dawladu lacagta ay ka soo ururiso bulshada waxay ku balaadhisaa laamaha bulshada ee loo baahan yahay. Horumarinada aas-aasiga

ah wadada, biyaha, korontada, telefonka iwm ayay ku dhistaa. Waxay sugtaa nabada iyo saboolka dalka.

**Khadija:** Aabo qofkasta macashuurbuu siiyaa dawlada?

**Mudane cali:** Haa, ganacsadaha, reemiyiga, shaqaalaha dawlada, warshadaha, xoogsatada, ciidanku waa inay bixiyaan cashuurta.

## Layliska 12 aad

Adiga oo ku salaynaya dooda kor ku xusa oo ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Waa maxay cashuurtu?
2. Waa maxay dhibaatooyinka aad qiyaasaysaa inay dhacayaa hadii si haboon loo bixin waayo cashuurta?
3. Dawladu lacagta ay ka ururiso cshuurta waxqabadyo nooce ah ayay gelisaa?

### Su'aasha Khadija/Qaybta labaad/

Khadija: Aabo qof kasta cashuurta uu bixiyo ma isku midbaa?

Mudane Cali: maya muwadiniintu xadiga cashuurta ee ay bixiyaan isku mid ma'aha. Midba midka kale la mid ma'aha cashuurta ay bixiyaan. Cashuurta ay bixiyaan wuxuuu ku xidhan yaahay xaalada dakhligiisa. Sidaa darted qofka dakhliga wayni soo galo cashuur badan ayuu bixiyaa qofka dakhliga yarna cashuur yar Ayuu bixiyaa.

Khadija: Aabo adigu maad bixisay cashuurtii ay ahayd inaad bixiso?

Mudane Cali: Sifiican, dad badan oo cashuur bixiyayaal ah ayaan ka hor bixiyay, waajibaadkaygana waan kazoo baxay. Waa tan cadayntii aan kii dhawaa ku bixiyay ee fiiri.

Khadija: Aabo haddii aan si haboon u bixin wayno cashuurta maxaad dhib inasoo gaadhaysa?

Mudane Cali: Fiiri inantaydiyey, muwaadiniintu haday si haboon u bixin wayaan cashuurta dawlada, ciyaalka adiga ku le'eg mahelayaan iskuul ay wax ku bartaan. Maadama ayna dawladu si haboon u dhisikarin cuduro ayaa ku dhacaya bulshada. Adeegyada bulshadu u baahan tahay sida wadooyinka, biyaha, korontada. Iwm iyo kuwa kale lama balaadhin karo. Horumarkii iyo koboci wadankuna hoos ayuu u dhacayaa wadankeenuna kama baxayo saboolnimada.

## Layliska 13 aad

Adiga oo ku salaynaya akhriska kor ku xusan ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Sheeg faa'iidooyinka cashuurta?
2. Maxaa sal u ah xadiga cashuurta ee muwadiinintu bixinayaan?
3. Haddii cashuurta si haboon loo bixin waayo carunrta inila midka ah dhibaato nooce ah ayaa loo gaadhaya?

## Gaba-Gabada Cutubka 4aad

Cadaaladu waa xukun miisaaman oo run ah ama go'aan aad siiso ama inaad run ku shaqaysid fikrad qeexaysa. Cadaaladu waa arin dhamaan nolosha bulshada iyo dhaqdhaqaaq yada guduhu ubaahan yihiiin islamarkana faa'iido u ah. Waxay dejisaa islamarkana caafimaad ka dhigtaa maamulka qoyska ee aas–aaska u ah bulshada. Waxay xoojisaa nidaamka sinaanta iyada oo tirtiraysa waxqabadyada cadaalad darada ah ee muwadiiniinta dhexdeeda.

Waa alad wayn oo loo adeegsaado sidii wadanka looga dhigi lahaa mid ay ku faaftay koboca iyo nabadu. Si cadaalada loo xoojiyoo waxaa muwadiniinta looga

baahan yahay inay tixgaliyaan sharciyada heerarka kala duwan laga helo. Waxaa loo bahan yahay in laga ilaaliyo waxyaabaha carqalada ku noqonaya cadaalada.

Markay muduadinku arko cadaalad daro waa sicad. Sidaa darted waxaa haboon inaan xoojino adeega cadaalad bixinta ee laamaha bulshado kala duwan.

Si loo balaadhiya laamaha bulshada waxaa muwadiniinta looga baahan yahay inay bixiyaan cashuurta dawlada. Guud ahaan xoojinta nidaamka cadaalada ee bulshada dhexedeeda waxaa muwadiniinta waajibku ah inay Cadaalada ka hirgaliyaan noolosha qoyska, iskuulka meelaha ay ku nool yihiin, meelaha shaqada … iwm.

## Erayada furaha u ah cutubka 4aad

| | |
|---|---|
| Cadaaladnimo: | Waxqabad ama shaqo nadiif ka ah dulmi |
| Cabasho: | isku dhac islayn, Isfahan la'aan |
| Eex: | Inaad mid u faa'iidayso ka kalena ku samayso waxqabad ama go'aan wax yeelay. |
| Dulmi: | wax eyelid ama weerar. |
| Laan: | xafiis awood loo siiyay inuu fuliyo shaqo yar |
| Garsoor: | Fal ama waxqabad aad go'aan ku sii so arimo kala duwan. |
| Miisaan: | waa qalab loo adeegsado inayna xidhiidhka dhexdooda midna mid ka sarayn oo ay siman yihiin is lamarkana calaamad qeexaysa cadaaladnimada. |
| Dabeecad: | sidu-u-dhaqmo. |
| Xirfadlayaal: | dad kala duwan oo aqoon ku filan iyo karti u leh qaybaha waxbarashada iyo aqoonta. |

## Layliska guud ee cutubka 4aad

**Layliska cutubka ee soo socda ku roga buugtiina oo ka shaqeeya.**

I. Su'aal ahan soo socda tii run ah ku qor "Run" tii been ahan ku qor "Been"

1. Adeeg bixinta cadaalada ah faa'iido uma laha koboca dalka.
2. Laamaha bixiya cadaalada dhaqanku faa'iido ayay u leeyihiin balaadhinta cadaalada.
3. Booliska laguma tiriyo waaxda cadaalada casriga gudihiisa.
4. Cashuurtu waa isha ugu wayn dakhliga ee lagu balaadhiyo laamaha bulshada.
5. Nidaamka shaqo ee cadaaladu faa'iido uma aha dhaqdhaqaaqa noto leed ee dadka dhexdeeda.

## II. Weedhaha ku hoos qoran "T" u dooro kuwa ku hoos qoran "B"

| B | T |
|---|---|
| 1. Sharciga oo aan la tixgalinin | B. Laanta cadaalada dhaqanka |
| 2. Caddaalada | T. Go'aan sax ah |
| 3. Odaynimo | J. Laanta cadaalada casriga ah |
| 4. Laanta bulshada | X. Xukumid |
| 5. Maxkamada | Kh. Rugta caafimaadka |

## III. Su'aalaha soo socda ka dooro jawaabta saxda ah

1. Meeshe u baahan shaqooyinka cadaalada ama nidaamka cadaalad?
   B. Qoyska T. Iskuulka J. Dhamaan waa sax X. Qabalaha
2. Kuwan soo socda keebaa carqalad ku noqonaya go'aanka cadaalada ah?
   B. Beenalaha T. Daacadnimo J. Runnimada X. Xukun miisaman
3. Waa Tee qaybta bulshada ee ay tahay inay cashuurta bixiso?
   B. Ganacsade T. Shaqaalaha dawlada
   J. Dhamaan X. Reemiyiga
4. Waa kee kaan ahayn laanta bulshadu?
   B. Xarunta caafimaadka T. Xarunta booliska
   J. Dhamaan X. Iskuuska
5. Kuwan soo socda waa kee kaan ahayn natiijada shaqada cadaalada?
   B. Qoyska oo kala baaha T. Nabad iyo koboc
   J. Isjacayl X. Sinaan

## IV. Meelaha banana ee soo socda ku buuxi erayga saxda ku ah

1. Saddexda ugu muhiimsam laamaha cadaalada casriga waa ............................... iyo ...............................
2. Laanta bulshada ee balaadhisa aqoonta muwadiniintu waa ...............................
3. Lacagta muwadiniintu inta uu dakhligoogu yahay u goyaan dawlada waxaa la yidhaa ...............................

## V. Si Gaaban uga jawaab su'aalaha soo socda

1. Maxaa inaan samayno loo baahan yahay si aan shaqada cadaalada u gaadhsiino iskuu ka dhexdiisa?
2. Fahfahi dhibaatooyinka aad leedihiin way soo gaadhyaaan haddii si haboon loo bixin waayo cashuurta

CUTUBKA 5

# Wadaniyada

Ujeedoyinka cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Sharaxaan macnaha dal-jacaylku waxaa uu yahay.
- Gartaan xidhiidhka ay leeyihiin dal-jacaylka iyo muwaadinimada.
- Tilmaamaan ficilada ama arrimaha waxyeeleeya dareenka dal-jacaylka.

## 5.1 Wadaniyad

### 5.1.1 Macnaha wadaniyada



Jaantuska 5.1 halgamayasha horumarka

- Qeex fariinta jaantusku ka gudbinayo macnaha wadaniyada.
- Tusaalooyinka lagaga hadlo agagaarkiina sida odhaahyada, gabayada gaagaban ee bulshada, heeso iyo geeraarada wadaniyada waxaad ka taqaanaan u soo bandhig ardayda fasalkaaga.

Tusaale: Jacayl baa wadan lagu dhisaa aqaanbaa bulsho lagu tixgaliyaa farshaxanka bulshadu waay ku faan taa.

Wadaniyadu waa wadankaaga oo aad qalbiga ka jeclaato. Xubnaha qoysku ha lahadaan midab iyo dabeecad kala duwan hadana waxay ku wada nool yihiin xubnaha qaysku Isfahan, isjacayl iyo dul qaadasho. Xubnaha qoysku waxay fahansan yihiin inay gurigan dhexdiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad isku mid ah. Sidoo kale dhaqan, luuqadd iyo khibrada kala duwan  ee quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta wadankeena ayay si wada jir ah wadanka dhexdiisa xuquuq u leeyihiin inay si isku mida ugu nolaadaan ayuu dastuurku xaqiijinayaan. Sababtan awgeed jacaylka wadankeenu yeelanayo aad ayuu u sii badanayaa.

Dawlad deegaanada wadankeena ee laga aqoonsan yahay aduunka ayay quruuraha, Qowmiyadaha iyo shaucuubtu sidii hal qoys hoygii. si isku mida u isticmalaan. Sababtan awgeed ayay dhamaan muwadiniintu wadanka gudihiisa isjacayl, ay ku dheehantahy dhulqaadasho iyo is tixgalin ugu wada nool yihiin.

### Layliska 1aad

Su'aalaha soo socda kaga wada dooda fasal ka dhexdiisa.

1. Waa maxay marka aan leenahay qofku wadan kiisa ayuu jecel yahay?
2. Waa Maxay waxaan wadankeena u jecelnahay

## 5.1.2 Dabeecadaha tilmamaya wadaniyada



Jaantuska 5.2 mid kamida meelaha lagu barbarto wadaniyada

- Maxaad ka fahanteen jaantuska?

Aabo Cali iyo ciyaalka nawaaxiga xaafada.

Aabo Cali wuxuu ku nool yahay meel 6 kiilo meter u jirta magaalada jigjiga. Meesha uu ku nool yahay ciyaalkeguna maadama ay aad u jecel yihiin waxay ugu yeedhaan aabo Cali. 1928 T. I Aabo Cali wuxuu ka qaybgalay dagaalkii Itoobiya iyo talyaniga. Aabo cali dagaalkii uu lagalay ciidamadii tallyaniga wuxuu ku waayay mid kamida lugtiisa islamarkana wuxuu ka mid noqday halgamayasha wadanka.

Aabo Cali wuxuu awow u yahay caasha maadama caasha da'adeedu waa afar iyo toban sano jacayl gaar ah ayay uqabtaa deegaanka. Saaxiibada caasha waxaa lakala yidhaa xalimo, samsam, canab iyo muna.

Caasha iyo xaaxiibadeed waxay jecel yihiin inay agagaarkooda ku ciyaaraan badanaa markay iskuulka ka yimadaan waxay sameyaan su'aal iyo jawaabta soo socota.

Samsam: Aabo cali maxaadlugtan ku xanuunaysa ka noqday?

Aabo Cali: inantaydi samsam lugtaydu ima xanuunayso ee waxay iiga go'day xornimada wadanka ee aan lagalay ciidamadii talyaniga ee inasoo weeraray.

Samsam: Aabo cali aad ayaad wadanka ujeceshahay ayay ka dhigan tahay?

Aabocali: Miyuu jiraa wax wadanka ka wayn oo la jeclaado?

Canab: Aaba Cali anagu sideen u muujinaynaa jacaylka aan u qabno wadankayada?

Aabo Cali: Waad fiicantahay canabey. Su'aal wanaagsan ayaad iwaydiisay. Jacaylka wadanku wuxuu ka bilaabma qoyska iyo agagaarka. Waalidkaga oo aad tixgalisid jaarkaga oo aad dabeecad fiican tustid, inta awoodaada ah oo aad agagaarkaga nadiifsid, iskuulka oo aad mudnaanta kobaad siisid, qalabka shaqsi iyo ka guud oo aad si fiican u haysid ayaa ka mid ah tilmaamaha wadaniyada.

Muna: Aabo Cali mayna fiicnayn inaan sidaada oo kale ciidan noqdo?

Aabo Cali: Waa fikrad fiican lakiin muna dagaal oo kaliya wadanka uguma faa'iidaynaysid. Tusaaale, xaafadeena ciyaalka waxyelaynaya nabada bulshada oo aad waanisid, dabeecadaha xun ee bulshada wadankeena wax u dhimikara oo aad ka illalisid, kuna dayato dadka waawayn ee dalka ilaaliya.

Caasha: Aabo Cali maanta laga bilaabo waxaan axdi ku galay inaan waxqabad kasta oo wadanka lagu jeclanayo islamarkana lagu tixgalinayo aan sameeyo. Dhamaantayo hal cod iyo midnimo ayaan axdi galaynaa.

Aabo Cali: Ardaydii fiicnayde noqda waxkasta waa idinka ubaxii manta midhihii Bari ee wadanku.

## Layliska 2 aad

Idinka oo ku salaynaya dooda kor ku xusan kajawaab su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay wadaniyadu adiga oo ku salaynaya doodii caasha?
2. Sheeg fikrado dhecri ah oo tilmaan unoqon kara wadaniyada?
3. Siday xuduuda wadanka ciidamada iyo shacabku u illaalinayaan miyayna awoodu lahayn inay khayraadka wadanka daryeeli Karin si ay baahida u ilaaliyaan. Labadan fikradood saaxiibadaa fasalka kaga wada dooda.

Muwadinka jecel wadanku waa inuu waxqabad ku muujiyaa dhamaan jacaylka uu u qabo wadanka. Muwadin kasto waxaa laga sugayaa inuu ficil u badalo dabeecadaha soo socda ee tilmaamay wadaniyaa ama wadan jacaylka.

- Dalkeena Itoobiya ee aan lahyan wax lagu badalo islamarkana fahanto taariikhdiisa lagu faano inaad waxbadan ku darsato si ay aad ugu karto.
- Inaad qabato shaqo faa'iido u noqon karta bulshada.
- Inaad ka fogaato waxqabad yada waxyeelo gaadh-sii naya wadanka.

## 5.2 Arimaha wax u dhimaya wadaniyada

- Cid wax iyeeli karta majirto
- Anigu hadaan dhinto caws yuun bixin
- Haddii guriga aabahay laboobayo la boob.
- Laluushka iyo tuugu ma jecla albaabka

### Faarax laaqe

Aqoontayda ardayda walaalahay ee iskuulka waa mid xariiftinimada lagu yaqaaano. Iskuulkayagu saddex sano oo isku xigta ayuu kobaad u baxay imtixaanka sideedaadka heer qaran iskualada agagaarka. Xariiftinimada ardaydu kaliya iskuulka uu ma'aha ee dabeecadana waa lagu amanaa. Haddaba faarax waa arday wax ka barta iskuulkan. Faarax sida iskuulka looga yaqaano ma'aha sida saaxiibadii ugu fiican yihiin waxbarashada iyo dabeecada ee waa arday leh dabeecad khariban. Naanaysta faarax ee ''laaqe'' waxaa u bixiyay Aabihii oo macalin ka ah iskuulka faarax aabihii oo macalin ah wuxuu "laaqe" u yidhi danbi badan ayuu iskuulka dhexdiisa ka sameeyay. Tusaale Maktabada iskuulka intuu Aabihii ka damiinto ayuu buugta iibin jiray qaarna wuu gogoyn jiray.

Faarax"laaqe" intuu Aabihii oo macalin ah imtixaanka sidedaadka kazoo xado ayaa la helay isaga oo ardayda sidedaadka ka iibinaya. Sido kale waxaa jirtay wakhti gabadh edadii dhassay u siiyay su'aalihi9i imtixaanka uu soo xaday. Waxaa la xaqiijiyay in alaabta ardayda ee fasalka gudihiisa intuu xado uu qaato. Qasabadii iskuudka uu jabiyay.

Laydhkii tasalada dhexdeeda wuxuu ku jabiyay wadhaf.

Geedihiin lagu beeray beerta iskuulka intay xoolo agagaarku soo galeen oo kharibay intuu waxba igama galin yidhi ayuu sabab u noqday inay dhib wayni soo gaadho. Faarax "laaqe" siday maalinba maalinta ka danbaysa dabeecadiisii usii xumanaysay ayay ardaydii fasalku ku heshiiyeen inay dhamaan danbigii u sameeyay qoraan islamarkan siiyaan 'fool masterka fasalka.



Jaantuska 5.3 hantida oo la burburiyo ma'aha mid laga sugayo muwadin wadani ah

## Layliska 3 aad

Adiga oo ku salaynaya akhriska kajawaab su'aalaha soo socda.

1. Danbiyada ay ku heshiiyeen faarax laaqe saxiibadii inay fool mastarka u geeyaan arimaha qodobkee ayay kamid noqon karayaan.

Calaamad sii ama ku same (☒

B. laluush iyo eex xigto uu sameeyo ........................................

T. Hantidii bulshada oo u lumiyo ........................................

J. Falalka danbiga ee fasalka gudihiisa ku samaynayo ........................................

X. Danbiga uu arko oo intuu yidhaahdo maxaa idhibay u dhaafo ........................................ .

Kh. Tixgalin la'aan bulshada agagaarka ........................................ .

2. Sheeg saddex sababood oo faarax Aabihii u noqon kara danbiyo.
3. Faarax "laaqe" dabeecadiisa aan hagaagayn inay tahay arin waxyeelaysa wadaniyada ama aan waxyeelaynayn kaga dooda waxaad barateen.

## 5.3 Macnaha alaabta wada jirka loo adeegsado

### 5.3.1 Qalabka guriga dhexdiisa laga helo ee la wada isticmaalo

- Sheeg qalabka gurigiina iyo agagaarkiina laga helo ee lawada isticmaalo?

Qalabyada lawada isticmaalo waxaa layidhaa alaabta hal qof wixii ka badan ee dad ah ama koox ah siisa adeeg. Qalabka la wada adeegsado qoysas kaliya ma'aha ee dad badan ayuu u adeegaa.

Alaabta shaqsiyadeed uu ma'aha ee waxaa dheer alaabta la wada isticmaalo dhamaan bani adamka mesha jira. Xubnaha qoysku waxay leyihiin alaab ay wada isticmalaan. Kuwaas oo ah labiska, buugta, qalabka wax lagu cuno, alaabta walagu shiisho iyo waxyaabaha nadafada lagu illaaliyo ayay noqon karaan.

Alaabtan la wada isticmaalo waxaa dhamaan xubnaha qoyska looga baahan yahay inay si taxadar leh u illaaliyaan.

Haddii xubin kamida qoysku si taxadir ku jirto u illaaliyo ka kalena uu iska dhayalsado xubnaha qoyska nabad ma ahaanayaan. Alaabta waxba igama galin ku jabta in la hagaajiyo ama lasoo badalo kharashka ku baxaya wuxuu ka go'ayaa miisaniyada qoyska sidaa darted xubin kasta oo qoyska ah waa inuu taxadar haboon ku sameeyo alaabta la wada isticmaalo.


## Layliska 4aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay allaabta la wada isticmaalo?
2. Kala dhig-dhig allaabta la wada isticmaalo ee guriga dhexdiisa laga helo?

### 5.3.2 Qalabka lawada isticmaalo ee laga helo iskuulka

- Kala dhig-dheig qalabyada la wada isticmaalo ee lagahelo iskuulka?



Jaantuska 5.4 alaabta la wada isticmaalo

Kuwan waa ujeedoyinka meelaha koboca ee waxyaalaha bani' adamka aan ka dhiman.weedhani badanaa waxaa laga helaa albaabka laga galo iskuulada. Iskuulku waa meesha laga soo saaro farshaxanka.

Sidaas ay tahay laanta waxbarashada dhexdeeda waxaa laga helaa qalabyo badan oo la wada isticmaalo.

Arday kasta iskuulka masuuliyad ayaa ka saran inuu si taxadar leh u hayo qalabyada la adeeg sado. Haddii kuraasta iyo miisaska la jabiyo waxyeelada way wada leeyihiin. Haddii si taxadir leh loo illaalin waayo ardayda waxaa ku dhici xanuun. Markay ardaydu xanuunsadana waalidka iyo dawladaba kharash ayay ku bixinayaan. Nadaafad la'aanta fasaladuna saamayn ayay ku keenayaan soo xeraynta ardayda cusub.

Haddaba maadama iskuulku yahay saldhig aqooneed ee isku xidha jiilkii shalay, ka manta iyo ka bariba waa in si taxadir leh loo illaaliyo adeegyada la wada leeyahay ee iskuulka.

### 5.3.3 Taxadarka loo baahan yahay in lagu sameeyo qalabyada la wada isticmaalo

- Maxaa loogu baahday in laga taxadaro qalabyada la wada isticmaalo?

Allaabta guriga dhexdiisa aan ku isticmaalo waxaa inoo keena waalidka.

Qalabka agagaarkeena iyo iskuulkeena waxaa inoo keena bulshada iyo dawlada. Cashuurta bulshada laga ururiyo waxaa lagu fuliyaa adeegyada lawada leeyahay. Qof kasta oo muwadin ah waxaa ku haboon inuu si taxadar leh oo naadiif ah u hayo qalabyada la wada isticcmaalo. Haddii godka qashinka lagu rido nadaafadiisa la ilaalin waayo dadku waxaa soo gaadhaysa dhibaato caafimaad. Korontada, tilifonka iyo biyaha haddii ay xumadaan waxay dhibtu soo gadhayso waa shacabka.

Marka aan eegno baahida wadankeena kharashyada aan loo baahnayn waaxay sii kordhinayaan saboolnimadeena. Sidaas ay tahay qof kasta oo muwaadin ah waxaa laga rabaa inuu taxadar haboon ku sameeyo qollabyada la wada isticmaalo. Qofkii xumeeya qalabyada bulshada ka dhexeeya waxaa la hor keeni sharciga.

## Layliska 5aad

Ka dooda su'aalaha soo socda:

1. Sheeg afar kamida isticmaalka shaqsiyadeed?
2. Agagaarka aad ku nooshahay sheeg saddex kamida alaabta bulshadu wada isticmaasho kadibna koox kaga dooda siday u hayaan?
3. Ka wada hadla dhibaatada ay keentay jabintu haddii ay jirto wax jabay ama xumaaday hantida iskuulkiina?

## 5.4 In laga baxo saboolnimada iyo dib- u dhaca

### 5.4.1 Tilmaamaha saboolnimada iyo dib-u dhaca

- Ilmuhu laxoox buu ku nool yahay; Laxooxduna hooyo malaha; Korbu u kacay sabookii; Majiro wax laga dharg
- Ka wada dooda sida uu jgabaygu u qeexay xumida saboolnimada?

Saboolnimada waa waxyaabaha nolosha aas-aasiga u ah ee loo baahan yahay sida cuntada, dharka, hoyga iyo kuwo kale oo aad si buuxda u helin. Dib-u dhacuna waa wadanada koboca qaniga ku ah hogaaminta, habka shaqo, heerka noloeed ee ay gaadheen oo aanad gaadhi weeyaan.

Wadankeena waxaa lagu tiriyaa wadamada saboolka ah. Waxyaabaha saboolka sababta u ahna waxaa ka mida inaga oo aan si adag u shaqaynin. Saboolnimadu markasta waxay kadhigaysaa inay kuwa kale kugu dul noladaan. Bulshada saboolkiina waxyaabaha dabiiciga iyo dad sameega ayaa si dhibyar u waxyeleeya. Qoyskooga awgeed iskuulka aan dhigan karayn caruurta badankoogu ma helaan cunto haboon oo isku dheelitiran.

Bulshada saboolnimadu waxyeeshay noloshoodu way liidataa. Dhibaato caafimaad ayay yeelanayaan.

Sababahan awgeed maadama ayna wax ku filan soo saari karayn sabool ayay ku noolanayaan.

### 5.4.2 Adeeg tabarucnimo ah

- Waa maxay waxa ay tahay adeega tabarucu?
- Fahfahi wax qabadyada ay wadaan shaqsiyaadka ama bulshada agagaarkiina eek u hawlan adeega tabaruca ah?

Hawl tabaruca uu iskii u fuliyay waxaa jiray wiil dhalinyar ah oo wadan ku noolaa. Guriga uu ku nool yahay wiilka dhalinyarta ah dhiniciisa waxaa jiray wado tareen. Wiilkan dhalinyarta ah wakhti kasta wuxuu istagaa wadada tareenka agtiisa isaga oo gacanta u luxaya rakaabka saran tareenka islamarkana way jeclaayeen dhamaan dadka saaran tareenku madaama uu mar kasta salaamo.

Siiba maadama dirawalada tareenku si fiican u garanayaa ayay marmarka qarkood hadyad yar u tuuraan ayay dhafaan.

Maalin ayuu kiiyaraa arkay wax laga naxo kaabad ku taala gurigooga hoosteeda.

Birtii wadada tareenka oo duntay ayuu arkay. Wayna gaadhay saacadii uu tareenku imanayay. Haddii aanad dirawalka tareenka ka hor u sheegin dhibtan oo uun tareenku joogsan maahe inay dhamaan rakaabku ku dhamaanayaan ayuu gartay. Sidaa darteed intuu shaadkii uu xidhnaa ee casaa iska bixiyay ayuu sugay intuu tareenku imanayo. Markii uu tareenku soo gaadhay ayuu wiilkii yaraa shamiiski casaa isaga oo luxaya garab cararay isaga oo dirawalka ku leh joojin tareenka way jaban tahay kaabadu. Laakiin dirawalka tareenka iyo rakaabkuba waxay moodayeen inuu sidii hore u salaamayo waxayna u taageen gacanta iyaga oo salaamaya. Wiilkii yaraa isaga oo oyaya ayuu garab cararay tareenka laakiin cidna dhag uma dhigin. Ugu danbayn markii tareenku u soo dhawaday. Kaabadii duntay ayuu kiiyaraa gacanta u taagay si uu ujoojiyo wuxuu go'aan ku gadhay inuu kaligii dhinto oo ay dadku badbadaan. Wuxuuna isku dhigay tareenkii wuuna dilay wiilkii yaraa. Kadib dirawalkii tareenka oo xaalada ka yar lasocday ayaa tareenkii joojiyay uu ka xanaaqay falka uu sameeyay kii yaraa ayuu hoos u dhaadhacay islmarkan arkay meeshii ayuu yidhi ilayn kayari wuxuu naftiisa u bixiyay si ay u badbadaan rakaabka tareenku ayay ahayd.

## Layliska 6aad

Adiga oo ku salaynaya akhriska kor ku xusan ka jawaab su'aalaha soo socda.

1. Maxaad ka baranaysaan casharka ku saabsan wax qabadka tabaruca ee wiilka dhalinyarta ah?
2. Haddii kayari ficilkan fulin lahayn xaalad maxay ah ayaa dhicikari lahayd?
3. Siidi qof taariikh leh oo kale ayay ciyaalka wanaagsani naftooda ubixiyaan faa' iidada kuwa kale awgood. Idinkuse agagaarkiina iyo iskuulkiina dhexdiisa in awoodiina iyo kartidiina le'eg tabaruc ma samaysaan? Ka wada hadla.

## Layliska 7aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Saboolnimada awgeed ciyaalka wax baran kari waayay sida loogu soo celin lahaa waxbarashada ka wada dooda?
2. Sheeg saddex ka mida waxyaabaha tilmaa-maya saboolnimada iyo dib –u – dhaca.

### 5.4.3 Talaaboyinka xalka u ah sidii looga bixi lahaa saboolnimada iyo dib-u-dhaca

- Faahfaahi talaabooyinka aad leedihii xalbay u noqonayaan sidii looga bixilahaa saboolnimada iyo dus-u dhaca.

Xalka ugu muhiimsan ee lagaga bixikaro sabodnimada iyo dib-u-dhaca waa inaan si adag

ushaqaysano. Si aan koboc sare u gaadhno waxaa muwadiniinta looga baahan yahay inay sameeyaan shaqo abuur iyo shaqo jacayl.

Sida wadankeena lagu arko waxaa loo baahan yahay inay muwadiniintu sii adkeeyaan dareenka firfircoon ee shaqada. Horumarka siyaa sadeed iyo isteratejiyadu waa kuwo muwaadiniinta ku dhalinaya dareen shaqo. Sidaas ay tahay inaga oo u dulqadanayna isteratejiy adaha iyo siyaasadaha islamarkana xoojinayna dhaqanka shaqo ee adag ayaa saboolnimada ka saari karnaa wadankeena.

### Layliska 8aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Sheeg saddex ka mida dhaqdhaqaaqa horumar ee lagu arko agagaarkiina?
2. Sheeg laba ka mida dhaqdhaqaaqa horumarka deg-dega ah ee lagu arko wadankeena.

Tabarucu waa dadaal aad adigu latimaado si aad caawimo ugu samayso kuwa kale. Waxaa haboon in dhamaan muwadiniintu ka qaybqataan adeega tabaruca loo samaynayo. Tabarucu waa hawl wanaagsan oo inaad xoojiso loo baahan yahay laga billaabo ciyaalnimada. Waxaa dhici karta inuu qofna ka nixin inuu fuliyo hawsha tabaruca. Si aan u caawino dadkeena waxaa haboon in dareenkeenu noqdo mid u damqanaya shaqada tabaruca.

Siyaabo kala duwan ayay dadku u fuliyaan tabaruca qaar waxay ku fuliyaan lacag, qaarna aqoontooda ama talo bixin ay sameeyaan.

Tusaale: Dhibaatooyinka iyo xanuunka agagaarkeena ka jira waan caawin karnaa. Iskuulkeena dhexdiisa waxyaabaha ka dhiman si aan u buuxino waxaan ku dari karnaa tabaruc intii awoodeenu inoo fasado.

### Layliska 9aad

Ka jawaab su'aalha soo socda:

1. Maxaa loo baahan yahay inaan samayno si aan u xoojino tabaruca?
2. Qeex waxyaabaha ay sameyeen dadka ku hawlan waxqabadka tabaruca ah ee agagaarka aad ku nooshahay?

## 5.5 Muwaadinimo

### 5.5.1 Macnaha muwaadinimada

Qof waa wadankiisa qofna waa wabigiisa haduu cuno caws haduu cuno caleen tixgalin majirto ama uu garto wuxuu yahay

- Gabaygay bulshadu wuxuu fariin gudbinayo kawada dooda macalimiintiina?

Jinsiyadu waxa weeyi inaad si sharci ah xubin uga noqotid wadan. Marka qof uu noqedo muwaadin ka mida wadanka waa inuu u hogaansamaa sharciga iyo nidaamka dawladu soo saarto. Marka qofku si buuxda uga faa'iidaysto xuquuqaha muwadinimo ee sharcigu siiyay waxaa looga baahan yahay inuu si haboon uga soo baxo waajibadka saran. Muwaadin kasta waxaa looga baahan yahay inuu noqdo ka ugu horeya ee ka qaybgala arimaha wadanka.

Waxaa loo baahan yahay inuu iska illaaliyo falalka waxyelaynaya wadanka iyo bulshada.

Dadka dhibaato soo gadhsiinaya wadanka iyo falalkooda waa inaad si cad uga soo horjesataa. Markay dhibaato dhacdo inaad waaxda sharciga ogaysiiso waa waajibaad iyo masuuliyad saran muwaadinka.

### Layliska 10aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay jinsiyadu?
2. Maxay yihiin waxqabadka muwadinimo ee qofka itoobiyaanka ah looga baahan yahay?

3. Wadankaygu muxuu aniga iiqabtay ma'aha ee anigu maxaan wadanka u qabtay isway6dii odhaahdani maxay fariin gudbinaysaa

## 5.6 Calanka Qaranka

### 5.6.1 Macnaha iyo muhiimada uu leeyahay calanka qaranka iyo heesta shucuubta qarank





Jaantuska 5.5 ardayda oo xusaysa calanka

- Waa Maxay fariinta uu gudbinayo jaantusku?

Calanka qaranka ee wadan leeyahay wuxuu si balaadhan uga turjumayaa tilmamaha qaran ka tusaale, faa'iido wayn aynu u leeyahay inay dhamaan muwadiniintu iska caawiyaan islamarkana isku dhiiri galiyaan arimaha muhiimka u ah wadanka. Calanka qaranku waa fusaalaha xornimada, geesinimada, istaageersiga, islamarkana wakiil u ah tixgalinta mustawqbalka.

Shacabka dalka itoobiya inayna marnaba calankooda ka hadhayn waxaa markhaati ka ah tabaruca iyo taariikhdii wakhtiyada xumaa. Nidaamyadii dawlada ee wakhtigii xumaa islamarkana gumaysiga ahaa shacabku iyaga oo mudnaanta siinaya calanka qaranka ayay dhexgaleen nidaamyadii oo ay xornimo heleen. Iyaga oo tixgalinaya calankooda ayay naftooda iyo laxaadkooda u hureen oo ay dib u celiyeen islamarkana burburiyeen wararkii dibada.

Calanka qarankena isaga oo lagu soo dhawaynayo heesta calanka qaranka ayuu ka lalmanayaa iskuulada dhexdooda, xafiisyada dawlada iyo kuwa shaqsiyaadka, guryaha, xafiisyada safaradaha ee itoobiya ku leedahay wadanada, Garoonada isboortiga, aaga dagaalka. Iwm oo wakiil u ah dalka ayaan dareen qaranimo oo aad u sareeya la garab taaganahay. Marka calanka qaranku lulmaayo heesaha qaranku waa inay inatusaan dhaqanka fiican, lahaanshaha alaab aan ku faano, khayraadka dabiiciga ee dalka, geesinimada quruumaha, qowmiyada iyo shucuubta dalkeena islamarkana kor u qaado tixgalinta mustaqbalka wadanka.

## Layliska 11aad

Ka dooda su'aalaha soo socda

1. Maxaan ujeednaa marka aan leenahay calanka qaranku wadanka ayuu u taagan yahay?
2. Saaxiibada uga waran dhacdooyinka gaarka adiga oo xasuusanaya waxyaabaha kala kulan feen ciwaan odhanaya farxada aan ka dareemay calanka itoobiya oo guud ku lal manaya.
3. Idinka oo diyaarinaya qoraal ku saabsan habka haynta calamada ka lalmanaya xerada dugsigiisa iyo agagaarkiisa. Ma sifiican ayaa loo hayaan mise waa mid ugoo bay oo dayacan? Ma is odhanaysaan falka noocani inuu haboon yahay?

## Gaba-Gabada Cutubka 5aad

Dareenka wadaniyadeed waxaa lagu xoojiyaa dhaq-dhaqaaqyada midho dhalka ah ee aan ka samayno guriga dhexdiisa, agagaarka iyo iskuulka dhex diisa. Si fahfahsan ayaa loo qeexay waxqabadyada waxyeleeya wadaniyada. Qof kasta waxaa looga baahan yahay inuu qofka kale ku tixgaliyo diintiisa, dhaqankiisa, iyo luuqadiisa isaga oo kala duwanaansho samaynayn. Si looga

baxo sabool ka iyo dibudhaca muwaadin kasta waxaa laga sugayaa inuu aamino shaqada iyo inuu taxadar ku sameeyo qalabka la wadaago islamarkana balaadhiyaan cadaaladnimada iyo sinaanta.

Jinsiyadu waa si sharci ah oo xubin uga noqoto wadan. Muwadin kasta ma'aha kaliya inuu waydiisto xuquuqda ay tahay inuu helo muwadinimada ee waa inuu si haboon uga soo baxo waajibaadka saran.

Muwaadin kasta ma'aha inaan ilawin masuuliyada inaga saran tixgalinta heesta calan ka qaranka.

## Erayada furaha u ah cutubka 5aad

| | |
|---|---|
| Dastuur: | Waa wadan xor ah oo xuquuqda caalamiga faa'iidada iyo mudnaantiisa la illaaliyay. |
| Laalush: | Noockasta oo faa'iida aan kugu haboonayoo oo qof kale si aan haboonayn uga hesho faa'iido ahaan. |
| Gabayada bulshada: | Gabayo jiilba jiil usoo gudbiyay islamarkana qoraagi la garanayo. |
| Halgamaa: | Waa qof can ku ah difaaca wadanka oo waaxda uu ka qaybgalayna ka sameeyay shaqo midho dhal ah. |
| Sardi (caws): | daaqa dhulka kubalaadha |
| Cashuur: | Muwadiniinta midba dakhligiisu sidii yahay ay dawladu ka uririso |
| Boolisi: | Awamiirta iyo xeerka dawlad u usoo saarto hal waqabad fulinteeda. |
| Isterateji: | Awaamiirta dawladu u samaysay sidii loo fulin lahaa hawsha hal waxqabad. |
| Isgaadhsiin: | idaacada, jaraa idka, telefeshanka iyo ilaha kale ee isgaadhsiinta xogta. |

## Layliska guud ee cutubka 5aad

**Layliska guud ee soo socda intaad buugtiina ku rogtaan ka shaqeeya**

I. Su'aalaha soo socda tii run ah ku qor "Run" tii been ahana ku qor "Been"

1. Waa inaan dhamaan dhaqanka quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta iyaga oo kala sarayn si isku mida u aragto.
2. Muwadiniintu haday dhintaan wadanku wuu jirayaa.
3. Hadii hantida dugsigu xumaato kaliya waxaa waxyeelo soo gaadhaysaa dawlada.
4. Laalush qaadashadu waa waxqabad wanaagsan oo faa'iido u leh si aad dhibaatada uga baxdo.
5. Midaamka dimuqraadiyadeed dhamaan muwadiniintu ma laha xuquuq isku mida.
6. Calanka qaranku waa tilmaanta sharafta wadanka

## II. Weedhaha ku hoos qoran "T" u dooro kuwa ku hoos qoran "B"

| B | | T | |
|---|---|---|---|
| 1. | Wadan xor ah | B. | waxqabada rabitaankaga aad u qabatay |
| 2. | Jinsiyad | T. | Tilmaanta Cida ay yihiin shucuubtu |
| 3. | Laalush | J. | Faa'iido aad ku hesho wado aan haboonayn |
| 4. | Tabarucaad | X. | Inaad si sharci ah xubin uga noqoto wadan. |
| 5. | Dhaqan | Kh. | Madax banaanida qaran. |

## III. Su'aalaha soo socda ka dooro jawaabta saxda ah

1. Sidee loo xaqiijinayaa sinaanta quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta?
   B. Maadama warbahinta waxbarasho lagu siiyo.
   T. Maadama luuqadiisa oo kaliya la tixgaliyo
   J. Maadama fasaxa dawlada dhexe ay ku dhi8steen dawlad deegaan iyagu leeyihiin.
   X. maadama fursadooda iyagu go'aaminayaa iyada oo cidna saamayn ku yeelan.
2. Sidee buu muwadin uga soo baxaa masuuliyada muwadinimo?
   B. inuu u hogaansamo dastuurka wadanka
   T. sida uu xuquuqdiisa dimuqraadiyaded u rabo in loo illaaliyo isaguna ha illaaliyo xuquuqda kuwa kale.
   J. isaga oo kazoo baxaya waajibaadkiisa oo qofka kalena xuquuqdiisa tixgalinaya
   X. dhamaan jawaab ayay noqon karaan.
3. Waa kee kaan noqonayn qalabka la wada adeegsado?
   B. kursiga iskuulka
   T. Telefeshanka guriga
   J. sakiinta cidiyaha lagu jaro
   X. qasabada biyaha ee agagaarka
4. Kuwan soo socda mid kamida ayaa la odhan karaa laaluush.
   B. Abaal marinta la siiyo arday xariif ah
   T. si aad arin u dhamaysato lacag warqad sharci ah ku bixiso.
   J. si aad u caawisid xigtada oo aad shaqalaysid
   X. shaqo aad qabato ku gulaysiga waayo aragnimada shaqo.

## IV. Meelaha banana ee soo soocda ku buuxi erayga ama weedha saxda ku ah

1. Marka aan leenahay wadankeenu waa wadan xor ah waxaan ujeednaa waa wadan ........................ .
2. Waxaa loo baahan yahay in bulshada wadankeenu la mid noqoto ........................ khayraadka wadanka.
3. ........................ waa calaamada tilmaamaysa cida aan nahay.

## V. Si gaaban uga jawaab su'aalha soo socota

1. Waa maxay jinsiyadau?
2. Waa maxay waxa ay tahay qalabka la wada adeegsado?
3. Sidee loo qeexaan wadaniyada?

CUTUBKA 6

# Masuuliyada

Ujeedooyinka Gaud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubka kadib ardeydu waxay awoodi-doonaan in ay:

- Qeexaan macnaha mas'uuliyada.
- Gartaan noocyada kala duwan ee mas'uuliyada.
- Uga soo baxaan mas'uuliyadahooda si daacadnimo, xaq- soornimo –iwm ku dheehan tahay.

## 6.1 Macnaha xilkasnimada masuuliyada



Jaantuska 6.1 Arday dhir-waraabin ka wada dugsigooda

- Maxay tilmaamayaan ficilada ardayda ee ku xusan sawirka?
- Maxay tahay faa'iidada ay leedahay dhir beeristu?

Xilgudashada masuuliyadu waa arin la xidhiidha masuuliyada ku saran ama lagu saaray oo aad uga soo dhalaasho sida ugu haboon. Dhamaan cid kasta oo ku hawlan shaqo xirfadeed, waxaa laga rabaa, inay masuuliyad iska saaraan sidii ay natiijo wanaagsan uga soo hoyn lahaayeen shaqadooda ama xirfadooda gaar ahaaneed. Masuuliyadu waxay u kala duwan tahay, hadba nooca iyo heerka ay tahay.

Matalan korsiinta waalidka ilmaha dhalay, daaweeyntiisa dhakhatiirta, waxbaristiisa macalimiin, difaacida dalka ee ciidan, tabaca dalaga ee beeralayda, iyo barashada ardaydu waa kuwa tilmaamaya masuuliyadaha shaqo ee kala duwaan. Sidaas awgeed, ardayda waxaa looga baahan yahay, iyagoo ka qayb-qaadanaya guddiyada kala duwan ee dugsiga kajira, islmarkaana khibrad ka soo qaataan sidii ay u xalin lahaayeen mushkiladaha hadba soo wajaha, islamarkaana dusha u ritaan masuuliyaadka ka saaran.

Masuuliyadu waxay noqon kartaa mid heerkeedu hooseeyo ama sareeyo. Si kastaba ha ahaatee waxaa cid kasta la gudboon inay si haboon uga soo dhalaasho

Masuuliyada ka saran hawlaha shaqo ee ay ku hawlan yihiin, islamarkaana ka soo hooyaan natiijo wax ku ool ah. Shaqaada wanaagsani waxay waxtar u leedahay shaqsiga, bulshada iyo wadankaba guud ahaan. Hadaba, ka arday ahaan, shaqadiinu waa inay noqoto tacliinta, islamarkaana oolka iinu noqdo sidii aad natiijo wanaagsan uga soo hoyn lahaydeen kama dambeysta

Intaa waxaa sii dheer oo kale, marka aad guriga joogtaan, waa inaad intii tamartiina ah xil iska saartaan

sidii aad u caawin lahaydeen qoysaskiina. Waxaa kale oo loo baahan yahay inaad ogaataan waxa ay waalidiintiinu iyo maalkooda inuu yahay, sidii aad u noqon lahaydeen mawaadiniin wanaagsan. Sidaa daraadeed, waxaa loo baahan yahay inaad muujisaan masuuliyada ku aaddan sidii aad uga farxin lahaydeen waalidiintiina idinka oo kaashanaya kartidiina iyo aqoontiina gaar ahaaneed, islamarkaana hawlaha waxbarasho ka soo hoynaya natijo wanaagsan oo lagu diirsan karo. Gudashada musuuliyaduna waa ficil loo baahan yahay in dugsiyadana lagu muujiyo sidoo kale, waxaa arday kasta looga baahan yahay inuu yeesho dareen lahaansho oo u xil iskaga saarayo ilaalinta hantida danta guud ee dugsiga ka jirta oo laga ilaaliyo waxyeelada loo geysanayo.

## Layliska 1^aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda:

1. Maxay ka dhigantahay xilgudashada msuulityadeed?
2. Hantida dugsiga ardaydu maxay u daryeelaan?
3. Xageebaa loo baahan yahay in laga bilaabo ka hortaga xad-gudubyada loo geysto caruurta iyo dumarka?

## 6.2 Macnaha iyo muhiimada uu leeyahay axdigu/balanku

"Blan daro waan diin daro"!

Sida ku cad odhaahda kor ku xusan muxuu yahay balanku?

Balanka sidee loo muujiyaa

Balanka cida aan oofin, maxaa loogu tilmaamaa diin la'aawe?

'Axdigu/balanku-waa odhaah ka soo yeedha ruux, islmarkaana loogu dhisayo kalsoonida ah inuu fulin doono waxa uu ka balan qaaday cidkale cida fiicl ku muujisa hadlkii uu horey u yidhi, waxaa loogu yeedhaa run sheeg. Cida ku guul daraysata wixii ay blan qaaday waxaa loogu yeedhaa balan la'aane ama diin la'aawe.

Axdigu waa xoog dadka ku riixa qabashada shaqo natijo wanaagsn leh. Qof kastana waxaa laga rabaa inuu axdi ugalo naftiisa, qayskiisa, bulshadiisa, iyo dalkiisaba, Axdiga dalka loo qabo marka ficil lagu muujiyo, waxay ka dhigantahay iyadoo la gutay waajibaadkii muwaadinlmeedka bulshada, islamarkaana loo balaadhiyo ilabxnimada iyo horumarinta dalka, waxaa muhiim ah in ay muwaadinintu wacad ku maraan.

Waayo, wacadku/Axdigu waa xooga maskaxeed ee dhaqdhaqaajin kara sidii ficil waxqabad loogu muujin lahaa shaqo marka aad ka soo baxdaan kaalinta shaqada guriga inigaga aaddan, islamrkaana aad awoodaan inaad si haboon u raacataan waxbarsahdiina, waxaa la idinku tilmaami kuwii oofiyay Axdiga. Xilgudashada masuuliyadeed ee oofinta balanta hawlaha shaqo ee kaaga aaddan qoyska dhexdiisa oo laga qaybqaato.

Xaaladahaasina, marba marka kasii dambeysa iyadoo lasii kobcinayo, ayaa hawlaha kala duwan ee dugsigyada laga wadana lagu sii xoojiyaa. Tusaale, ardaynimada laftigeedu waa axdi/wacad. Sababta oo ah, hawlaha shaqo ee ardaydu waa waxbarashada wakhti kasta si ay uga soo hooyaan natijo wanaagsan oo waxtar leh.

## Layliska 2^aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay balanku?
2. Maxaa loogu yeedhaa qofka fuliya axdiga
3. Waa maxay faa'iidada axdigu?

## 6.3 Macnaha kalsoonida, daacadnimo iyo xaq soornimo

### 6.3.1 Waa maxay waxa ay tahay kalsoonida, daacadnimada iyo xaq-soornimadu?

Aragtida wanaagsan, Aaminimada iyo daacadnimada: waxaa lagu cadeeyaa shaqada. Shaqaduna, waxay leedahay dabeecad bulsheed. Shaqo inta ay midho dhal noqonayso waxay u baahantahay aqoonta, xooga iyo wakhtiga dad baddan. Haddii qof walba qaybtiisa shaqada ku fuliyo daa cadnimo, aaminimo iyo dareen wanaagsan waxaa dhalan natiijo faa'iido leh. Tusaala ahaan, hadduu darawalku gaadhigiisa dhawro xawliga uu ku socdo; diyaar u ahaado baadhitaanada waxay faa'iido u tahay damaanada naftiisa iyo hantidaba. Qofka beeralayda ah waxaa saaran masuuliyad ah inuu beerta wakhtigeeda beero dabadeedna midhaha u soo bandhigo bulshada. Haddii qof walba hawsha uu hayo u fuliyo si daacadnimo iyo aaminimo ku dheehantahay waxay la mid tahay inuu ka soo baxay waajibaadkiisa muwaadinimo.

### Layliska 3aad

Jawaab sax ah sii su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay waxa ay tahay naftada oo aad jeclaato?
2. Waa maxay tilmaanta muwaadinka kartida leh?
3. Fahfaahi xaaladaha lagu muujiynayo midnimada, aaminimada iyo daacadnimada ka qaybgalka iskuulka?

## 6.4 Muhiimada ay leedahay gudashada masuuliyadu

- Maxaa dhici kara haddii aan raali ka ahayn daryeelka agagaarka?



Jaantuska 6.2 waa ka soo bixida masuuliyada ka saran daryeelka agagaarka.

- Maxaa loogu yeedhaa ka qaybgalka aanu samayno sidii loo xalin lahaa dhibaatada agagaarka?
- Maxaa la yidhaa ka qaybgalka dadku u sameeyo xalinta dhibaatada agagaarkooda?

### Dugsiga Iftin

Dugsiga iftin waxaa ka jira uruuro kale duwan oo tartan loo qabtaa sanad walba, sanadkii la soo dhafay waxaa abaal gudka, ku guulaystay uruurka samafalka layidhaahdo.

Hadaba, ururka waxaa Guddoomiye ka ah c/ wasac c/raxmaan oo ah arday dhigta dugsiga fasalka 7aad. Ardayga yar marka guuriga uu jooga walidiinta isaga oo aan la dhihi wax inoo qabto ayuu qabtaa islamarkaana, sabaxdi marka uu kaco waxa uu qabto ee ugu horeeyaa waa nadafada Guurigooda, sido kalena waxa uu qabtaa kalba wixii u bahan in wax laga qabto.

Marka uu dugsiga joogena wuxu ka qaybqaata siddi uruurka natiijo u keeni lahaa isaga oo dhiirigalinaya xubnaha ururka ka tirsan. Hadaba, mar dugsigu wakiishay inuu uga qeyb gelo tartan su'aalo iyo jawaab ah ayaa wuxuu ku guulaystay tartankii islamarkaana waxaa uu heelay 1000 biir oo lacag abaalgud ah kadibna lacagtii 1000 birr ahayda

ee abaalgudka loo siiyey wuxuu siiyey uruurkiisa samefal lagu magaccabo si uu ugu sameeyo wax faa'iido u ah uruurka.

Waxaa jira arday dhibaataysan oo ay ku adkaatay inay sii wataan waxbarashadoodi siddi loogu caawin lahaa ayuu someeyey. Sido kalena, caruurta dhibaataysan ee aan awoodin inay shaqaystaan ayuu gargaar iyo talo tageero lacageed u sameeyay.

Intaas waxa si dheer c/wasac c/rexaman wuxuu ku abaabulay dhelinyeradii in horumarka ay ka qaybqaatan. Maamulka xafada uu degaan yahay ayaa wuxuu siiyey dhelinyada meel dhul ah oo ban ah.

Bilkasta waxaa jirta in ay sameeyaan meelo biyo mareen, meelo khashiinka lagu rido iyo meelo kala oo la iskugu yimaado

Sidaas derteed, dadka xanuunsan, dadka wayeelka wuxuu u fidiyaa gacan naxariis ah oo waa uu ger garaa

Sabataas awgeed, wuxuu noqday c/waaic nin loo mahad naqo waxana loo yaqanay oo loogu yeedhi jirey c/wasac xilkas.

## Layliska 4aad

1. Xilkasmimo macnaheedu waa maxay?
2. C/wasac guuriga, dugsiga iyo xafada uu degan yahay waxyaabaha uu ka qabto fahfaahi
3. Sidee buu masuuliyada ugu soo baxaa c/wasac?

## Layliska 5aad


Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay aas-aaska ilbaxnimada iyo kobocu?
2. Sided uga soo baxaysaan masuuligada la idinka sugayo?
3. Sheeg shaqooyinka aad is-xilqaadnimo u qabatay?

## 6.5 Macnaha khayraadka dabiiciga iyo goobaha taariikhiga ah




Jaantuska 6.3 Biyo dhaca wabiga Abay iyo Biyaha Wabi Shabeele

Jaantuska 6.4 Dhagaxda tagtagan ee Tiya iyo Dhagaxda Babili ee Dawlaead Deegaanka Soomaalida

- Maxaa lagu yaqaana biyo dhaca wabiga abay?
- Halkee laga helaa taalooyinka dhagaxa ah ee abay? Sharax waxa lagu yaqaano taalada.
- Kala Saar sawiradan keeba ah khayraad dabiiciya keebase ah goob taariikhiya.

Abaal: Gudki Zamazam

Abbo: Zamzam maxaad jaceshahay oo aan ku sameeyaa

Zemzam: Aabo maxaad igu giini

Aabo: madaama fasalki aad basstay 1aad dugsiga oo aad ka soo baxday xilki ku saarnaa oo aan ku farxay ayaan ku siim

Zamzam: abbo, waad mahadsantahay, waxaan jeclaa inaad i booqasho gaysid

Abbo: waa fikir ficaan Zamzam talo

Zamzam: siddi aan Dugsiga ku baranay meelaha khayradka dalka iyo Goobaha tariikhiga ee aan leenahay inaad i geyso oo soo arko ayaan ku farxilahaa

Abbo: waa talo fiican/wanagsan Zamzam Hasse yeeshee marka aan laanahay khayraadka

Dabiciiga macnaheedu maxaa loola jeeda.

Zamzam: khayraadka Dabicigu waxa weeye Abuurka Dhulka ee hooseeya iyo kan sareeya iyo wax kasta oo biyaha dabiciga ku nool ayaa loola jeeda.

Abbo: si wanaagsan ayaad u fikiraysaa, Zamzam hadaba goobaha Taariikhiga markaan leenahay macnaheedu waa maxay?

Zamzam: goobaha taariikhiga macnahaada waa Taariikh Dadyowgi hore raadki ay nooga tageen ama, ka soo hadhey. Dadki hore raadkoodi gidd masxafyada, madex tooyadi hore, taalooyinki taariikhiga, Farshaxano sawiro ah iwm.

Abbo: waad fiicantahay, waad fikiraysa. Fasalka aad ufududayso si wanaagsana ugu dhigato ayaan rajaynayaa.

-Janned waxaan ku soo tusidoona kheyraadka Dabiiciga. Iyo goobaha taariikhiga ee Dalkeenu leeyahay

Zamzam: Abbo, Aad ayaan u farxay

## Layliska 6aad

Sida sheekada Zamzam iyo Abaheed idinka oo ka doolayee su'aalahan ka jawaaba

1. Zamzam Abeheedi muxuu ku farxay?
2. Khayraadka dalka goobaha taariikhiga macnahooga iyo meele ay ku yaalan caddee?
3. Khayraad dabiiciya macnahiisu waa maxay?

Khayraadka dabiiciga ah waa waxyaabaha dhulka aynu ku nool nahay laga helo kuwaasoo inta badan ah wax abuur ku yimid bini'aadmigana uusan keeni Karin. Waxaa ka mid ah qaar dib loo abuuri karo iyo kuwa aan mar haday dhamaadaan soo laabanayn. Tusaale ahaan, dahabka, birta, saliida/shidaalka dib uma soo noqon karaan haday dhamaadaan. Kuwa kale sida keymaha dhirta hadii ay nabaad guuraan oo la jaro dib waa loo beeri karaa. Khayraadka dabiiciga ah aad ayuu u yar yahay ama u kooban yahay.

Khyraadka dabiiciga ahi waa wax Eebe ku manaysto dhulkiisa dabiici ahaan. Inta baddana haddii ay dhamaadaan waxaa laga yaabaa in aanay dib u soo laaban. Qof walba oo muwaadin ah khayradka dabiicega ah iyo raadadka taariikhiga ah waxyaabaha ka soo hadhay waxaa ka saaran masuuliyad daryeelkooda. Waxaa loo baahanyahay in qof walba yidhaahdo hantidan "ayaa anaa leh dabadadeed ilaaliyo.

Qof walba hooygiisa iyo goobaha uu ka shaqeeyo qalabyada iyo agabyada kala duwan eeyeela inta uu xanaaneeyo meel ku asturo masuuliyad ayaa ka saaran. Tusaale ahaan, Ardayda waxaa saaran masuuliyad in ay daryeelaan alaabada guryahooda ee ay wax ku cunaan, ku seexdaan ama ku cabaan. Sidoo kale waa in aynu ka ilaaliyaan qalabka dugsiga dayacida iyo burburinta maadaama ay jiraan jill inaga danbeeyo oo wax ku barandoono.

Waxaa laga doonayaa in ay deegan kooda khayraadka dabiiciga ah iyo raadadka taariikhiga ah, daryeelaan, hor umariyaan kana dhawraan waxyeelada. Ilaalinta iyo daryeelida khayradkaiyo raadadka haadhaga taariikhihii hore ama goobaha taariikhiga ah waxay horseedi kartaa in ayba abuuran shaqo baddan oo laga faa'iidaysto. Marka carada, kaymaha, macdanta, duur joogtada, biyaha iyo xoolaha laga ilaaliyo waxyeelada si haboone looga faa'iidaysto dhinaca horumarka waxay gacan ka gaysan karaan hoos u dhigida saboolnimada

Dhinaca kale, dhaqamada raadadka taariikhiga ah ama dhaxalka waa waxyaabo isir ahaan aanu ka dhaxalnay ummadihii inaga horeeyey. Goobaha sida dhismayaasha taariikhiga ah, alaabadii hidaha iyo dhaqanka aanu leenahay, dharka labiska dhaqanka iyo waxyaabaha hadhaaga ah ay taariikhihii hore ka soo jeeda. Goobaha noocani ah in la daryeelo oo la xanaaneeyo ayaa loo baahan yahay maadaama ay u taagan yihiin ilbaxnimadeenii noo gaarka ahayd, cida

aynu nahay, waxayna qiimo weyn u leeyihiin jiilka mustaqbalka inaga dambeeya. Tusaale ahaan, dadka soomaaliyeed waxay leeyihiin hido iyo dhaqan u gaar ah kaasoon ka soo gaadhnay aabayaasheeni hore; sidaas daraadeed waxay masuuliyad inaga saaran tahay in aan xajino oon u sii gudbino jiilka naga dambeeya. Dharka labiska ee dadkeenu dhaqanka u leeyihiin, weelasha wax lagu cuno sida xeedhada, fandhaalka, kuwa caanaha lagu shubo sida dhiisha, dhiilka, galoonta/hanta, aqalka hooriga ah ama ka sameysan hararka iyo cawska ee aynu degno.

## Layliska 7$^{aad}$

Ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Waa maxay dhibaatada uu keenayo hadii aan la ilaalin khayraadka dabiiciga?
2. Maxaa la yidhaa waxa inoo tilmaamaya kartida aqoonta dadka iyo heerka ilbaxnimada jirtay xiligaa?
3. Meelaha caanka ah ee lagu sheegay casharka sare dhexdiisa darasaad ku sameeya xaalada goobaha taariikhiga ama khayraadka dabiiciga una so bandhiga ardayda fasalkiina?
4. Muxuu noqonayaa doorka aad ku ledihiin ilaalinta iyo daryeelida khayraadka dabiiciga iyo goobaha taariikhiga ah?

## 6.6 Cudurka aydhiska (H.I.V. AIDS)

Aydhisku waa faayris. Fayraska dadka wuxuu u keenaa xanuuno kale., fayraskaana waxaa ladhahaa H.I.V. Fayraska HIV'ga dadka marka uu galo jidhkiisa wuxuu dilaa unugyada dhiiga cad marka uu baabi yo kadibna qofka wuxuu uhorseedaa dhimasho. Dadka uu fayiska H.I.V.ga hayo durba uma dhinto ee si tar tibtartiib ah ayuu awoodiisa u baabi, iyaa, kadibna qofku wuu dhintaa.

Wadankeena aydhiska waxaa u dhintay dadbadan. Haddase dad malaayiin ah ayaa uu hayaa fayraska H.I.V.ga. wadankeena itoobiya wuxuu ka mid noqday wadamada ugu badan dadka uu AIDSku hayo. Wadankeenana caruuro badan ayaa wuxuu kadhigay AIDSku waalid la'aan waxayna ku bakhtiyayaan banaanada. Marka waalidiinta ku dhaco aydhisku caruurta ay dhalaan waxay ku dhashaan qeybo kamid ah xanuunka markabana way dhintaan. Caruurtana wuxuu kadhigaa waalid la'aan, waayeelkana wuxuu badaa xanaano la'aan sidaas daraadeed aydhisku waa xanuun dumiya qoyska dilaa xun oo si xun dadka u laaya, ilaa hadana loo helin daawo.

Cudurka aydhiska siyaabaha ugubadan ee lagu kalaqaado waa galmada xaar aanta ah. Waxaa kale oo jirta siyaabo kale oo lagu kala qaado waana sidan:

- B. Irbad qof xanuunka aydhiskuhayo laguduray oo lagu duro qof fayaw.
- T. Qof aydhisku hayo dhiigii oo qof fayaw lagu shubo.
- J. Bir goysay qof AIDS qaba oo marlaabaad ay goyso qof fayaw.
- X. Caday uu qof aydhisqaba kucaday day oo uu qof fayaw ku cadaydo iwm.

## Layliska 8$^{aad}$

Ka wada hadla su'aalaha soo socda

1. Maxay yihiin hababka la iskaga ilaaliyo aydhiska?
2. Waa sidee caruurta waalidkoodu ku dhinteen Aydhiska?

## Gaba-Gabada Cutubka 6aad

- Wuwaadininta Wadena waa in mujiiyaan wadanimadaiada. Waxaa saran wajiib aad wadan islamarkaana aay u gotaan si xilkasnima leh. She qooyinka in loo gutaansi niyad yami iyo dacaadnimo ku dheehantahay lana gelo wacad adog iyo kol soom muwaadinimo
- Masuuliyaada oo loo guto si xilkasnimo leh waa Astaanta ugu horeyse ee Deryeelka iyilaalicta kuayraadka iyo hantida sidda Astaamihiisa soo jireen ka oo lagarto lane doryeelo.
- Hadaba, khayraadka iyo hantida wadanka leeyehay oo lagu horumariyea waa assaska ubaxnimadi iyo hour socodka wadan. Sidaas dirteed in la daryeelo lana ilaaliyo waa waajiib. Taasina waxaa tusaale u noqon karta carada wadanka oo si xawli leh u nabaad guurta. Sido kalena, Hantida taariikhiga ee wadanku leeyahay waa in la daryeelo.

Sidaas si lamid ah, Hantida wadanku uu leeyahay waa muwaadinta. Waxbarasho iyo wax soosaar in loo adeegi karo xagga caafiimaadka oo lafdhabar u ah muwaadiniinta.

## Erayada furaha u ah cutubka 6aad

| | |
|---|---|
| Is-xilqaad: | hawsha oo aad go'aansato inaad si haboon uga baxayso |
| Axdi: | waa balan aad qaaday inaad fulinayso |
| Aaminimo: | lagu aamino balanta |
| Daacadnimo: | run sheegnimo |
| Khayraadka dabiiciga: | khayraadka aan lagu keenin aqoonta dadka (Biyaha, dhulka; hawada) |
| Goobaha taariikhiga: | waa khayraad laga fahmi karo taariikhdii iyo ilbaxnimadii qarniyada aan soo dhaafnay jiilka. |
| Cudurka Aydhiska: | waa cudur aan daawo lahayn oo la isku gudbiyo islamarkana dilaa ah. |

## Layliska guud ee cutubka 6aad

### I. Weedhahan soo socda tii run ku qor Run tii been ahna ku qor Been

1. Balan qaadku waa mid kalsooni aaminaad lagu bixiyo
2. Daryeelista waxyaabaha dabiicigu waa masuulida dhalinyarada ee ma'aha masuuliyada dadka waawayn
3. Goobaha taariikhiga oo la daryeelo waxay la mid tahay masuuliyadii oo la gutay
4. Caadilnimadu waa tilmaanta run sheegnimada
5. Aydhiska oo lala dagaalamo wax xidhiidha lama laha masuuliyada.

## II. Isku aadi erayadan iyo jumladahan hoos ku qoran

| B | | T | |
|---|---|---|---|
| 1. | Masuuliyada oo kasoo baxdo | B. | Aan khiyaano la hayn |
| 2. | Balan qaad | T. | Hawl sidii la rabay aad u fulisay |
| 3. | Ku dayasho | J. | Samaynta wax dadka tusaale u noqonaya |
| 4. | Goob taariikha | X. | Wax aan lagu samaynin aqoonta dadka |
| 5. | Aaminimo | Kh. | Cadaymaha taariikhiga |
| 6. | Khayraadka dabiiciga | D. | Shaqada oo aad natiijo ka keento |
| 7. | Aydhis | R. | Cudur la isku gudbiyo |
| | | S. | Waxba aan dan ka lahayn |

## III. Kuwan soo socda ka dooro jawaaabta saxda ah

1. Weedhahan soo socda ta tilmaamaysa xil gudashada masuuliyadeed:
   B. Tacliinta oo sida ugu haboon loo barto islamarkana natiijo wanaagsan laga soo hooyo
   T. Hawlaha shaqo ee guriga oo aanad ka qaybqaadan si ayna kuugu yaraan wakhtiga akhrisku.
   J. Hawlaha horumarka iyo nadaafada oo la yidhaahdo waa shaqada qabalaha.
   X. nadaafada fasalka oo aanad ka qaybqadanin si uuna boodhku ku wasakhayn
2. Ayaa masuul ka ah daryeelida goobaha taariikhiga?
   B. Taariikhyahanada
   J. Muwadiniinta
   T. Masuuliyiinta dawlada
   X. Dhamaan waa sax
3. Godirka, Cawlka iyo dacawada cas
   B. Waa taariikhda wadanka.
   J. Waa xayawaan meel kasta aduunka laga helo
   T. Waa khayraad dabiici ah
   X. B iyo T ayaa sax ah
4. Faa'iidada ilbaxnimada iyo kobocu u leeyahay dalka.
   B. Waa muwadiniinta oo wax barata.
   T. Isticmaalka qalabka teknolojiyada ee qarniga yimiday.
   J. Shaqada lagu xoojiyo aqoonta oo natiijo fiican laga soo hooyo.
   X. Dhamaan waa sax.

5. Inaad iska ilaaalin waydo Ej, Ay, Fi/Aydhiska.
   B. Waa xilka oo aad ka soo baxday.
   T. Waa naftada oo anad qiimaynin iyo xilka oo aanad ka soo bixin.
   J. Waa mudnaanta oo aad siiso waxbarashada iyo darasaadka.
   X. Waa axdiga/balanta oo aad tixgaliso.

## IV. Meelaha banana ee soo socda ku buuxi erayga ama weedha saxda ah.

1. Khayraadka soo jireenka ah ee qeexaya taariikhda, qarniga iyo dhaqanka waxaa la yidhaa ............................ .
2. Aduunka cudurka wakhtigan aan joogno daawo loo helin waa ........................... .
3. Khayraadka aan lagu samayn teknolojiyada iyo darasaadka sayniska waxaa loogu yeedhaa ........................... .

## V. Si gaaban uga jawaab su'aalaha soo socda

1. Waa sidee sida Ej, Ay, Fi/Aydhisku ugu kala gudbo dadka?
2. Waa maxay waxa ay tahay axdiga iyo aaminimadu?
3. Siday ardaydu u daryeelaan khayraadka dabiiciga ee agagaarkooda laga helo?

CUTUBKA 7

# Dhaqan Hawl-karnimo

Ujeedoinka Cutubkan

Marka aad dhammeeysaan barashada cutubka kadib waxaad:

- Fahmi doonta ama aad garan doontaa micnaha dhaqanka shaqo ee wanaagsan.
- garan doontaa micnaha Anshax wanaaga xirfadeed ee shaqo.
- fahmi doontaa Qadarinta shaqo.

## 7.1 Shaqo Abuur

### 7.1.1 Waa maxay micnaha shaqo in la abuuro?



Jaantuska 7.1 Dad kuhawlan shaqooyin kaladuwan

- Sawirada kor ku xusan waxaad ka fahanteen qeexa sheega
- Muuaqaalka sawirada idiinka muuqda noocyada shaqo ee farsamo yaqaanadu qabonoyaan u sheeg saaxiibadaada fasalka.

Shaqo abuur waxa la odhan kara waa adeegsiga xirfadaada/farsamadaada ood wax cusub ku soo saartid ama marka uu qofku la yimaado hawl shaqo cusub oo dakhli laga heli karo islamrakaana shaqada cusub uu abuuro ka shaqaysta aya lagu macneen kara shaqo abuurida.

### Rugta yer ee farsamada biraha lagu sameeyo

Cali waa arday fasalka 5aad dhigta. Hadd iyo jeer hawlgalka layliska guriga ee macalinku ardeyda u diro madaamo si fiican uga shaqeeyo, dadalkaas in uu sii wado ayu marwalba macalinku ku dhiirigaliya. Hasaahaate mararrka qaarkood dharkiisa oo wasakh ka taabatey marka uu arko baruuhu wuxuu weydiiyaa sababta ay dharkiisa waskhdu uga muuqato. Hadaba Cali wuxuu u sheegi jiray in uu caawiyo aabihii inta karaankiisa shaqada farsamada biraha ee at guriigooga daraada lagu dhex sameeya shaqo

Macalinkii iyo ardeydii waxaa ku dhalatey fikir ah in ay Cali gibidooda booqdaan soon arkaan sida farsamada yaree samaynta biraha hadaba maalin maalmaha ka mido cali wuxuu ku marti qaadey macalinkiisa iyo ardeyado fasalka in uu soo tuso gibidooda.

Maalinkii uu cali wuxuu ku martiqaadey macalinkiisa iyo ardeyda fasalka in uu soo tuso ruugta yer / xaruntooda.

Macalinkii iyo Ardeydiiba waxay ka ogolaadeen martiqoodkan cali oo way u raaceen gibidii markey gaadheen goobtii gibidii cali iyo waxay ku dhax arkeen mishiino yarr yarr oo biraha isku xidh xidha isla goobtaa waxay la kulmeen shan qof oo cali aabihii ku jiro oo gashan dharr ama tuute uu Radd/wax mad–madaw uu merson yahay. Mid kamid ah shan qof markuu wax Qabanayo kuwa kale iskama taagnee way la shaqaynayaan.

Cali macalin kiisi iyo ardeydii saaxiibadiisa fasalkaba arin aad u farxad goliyey in ay arkeen ayey fursad u Noqotey shaqaaluhu sida fir fircoon ee ay shaqadooda u qabanayaan ayey ka fahmeen ay qadariyaan shaqadooda.

Gibida dhaxdaeda waxay ka arkeen alaabo badan oo la sameynayo sido daaqadaha albaabada iyo Qaar ko mida dadkii loo sameynayey oo goobtaa joogay.

Todobaadkii hore waxaad dhigateen waxaan u jeedaa dhaqanka shaq ee wanaagsan "cashirkii cutubkiisu ahaa xasuusta.

Cali aabihii waxa u sharaxay ardeydii oo ku yidhi, Barihiinu fasalka dhaxdiisa wuxuu idinku baray iyaad xagan goobtan yar farsamada biraha lagu sameeyo ficill ahaan ku aragteen. Cali Aabihii wuxuu Afkiisa ugu sheegay ardeydii iyo macalinkiiba in uu cali marka uu dugsiga ka yimaado uu kala shaqeeyo saaqadan dhinaca dir dirashada/Adeega hadaba arintan markey ogaadeen waxay sii farxad galisay Barihii cali iyo Ardaydii saaxiibadiisa fasalka.

## Layliska 1aad

Adoo raacaya Warbixiinta Qoraalka Akhriska ee kor kuxusan ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Waxaad ka fahntey sheeko taariikheedkaas u sheeg ama u sharax ardeydo saaxiibada fasalkaaga?
2. Cali iyo shaqaalo hooda maxaad ka barateen/ka fahanteen?
3. Ficilka cali maxaad ka fahamteen?

### U Guntada Shaqo

Wax la'aan dhaga-tirr keediyo–waa cudurr saboolnimadu

Wada jirr gocmo iskaashadiyo–shaqo lagaga guuleysto

Kuligiin istaagoo-ku guusa shaqada Kobaca dolkeenaha–kaalintii Hadaa la joogaa/ taaganyahay

iskaashiga jinaca iyo isku duubni dadaalkii shinida.

Baahida forsamiyo cilmiga Baadhayaashii barito Qofka/Ruuxa wayn ah iyo –

Barbaarta manta wax baraneysa ku dulnoolaanshuhu in uu yahay ducfi ogaado.

Wax aanad shaqaysan cunistiisiya wax laga faano in ay tahay dadaal la'aantu

ku yar iyo ku weynba ku dadaala shaqo Qadirintoo

ku dadaala shaqadana ku shaqaynta wadajirkiiniyo ka mideysan dantooda.

## Layliska 2aad

Su'aalaha soo socda ka jawaab adoo adeegsanaya warbixinta kor ku xusan

1. Gabeyga morkaad Akhrisid kadib waxaad ka fahantey si kooban u sheeg?
2. U faah faahi Barahaaga afkaarta gabeyga dhexdiisa ku qoran sadarka 5aad, 6aad iyo ka 7aad ?
3. Sheekada ama Gabeyga dhaxdiisa "ku dul-noolaan shuhu in uu yahay Ducfi ogaada" marka la leeyahay maxaa looga jeedaa?

### Faadumo

Faadumo iyadoo ah Gabadh yar oo aqlibadan maalin maalmaha ka mida abeheed iyo hooyadeed oo ka sheekeysanaya arimo baayac mushtar ku saabsan ayey maqashey iyo siday ku bilaabeen ka sheekeysanaya markey dhageysatey islmarkiiba faadumo waxay ku homidey in ay iyaduna ka shaqaysato warqadaha/bacaha dhal-dhalaala ee ay dadku markey isticmaalan ku tuuraan meelahaa intey ururiso in ay ka iibiso dadka dawaarle yaasha ama tolmaha u isticmaala in ay ku qurxiyaan waxyaabaha ay tolayaan.

Faadumo xaafada hooga waxaa jirey dadka farshaxanka ka shaqaysta ee waxyaabaha dhalaalooga ah u baahan in ay iibsadaan si ay ugu Qurxiyaan waxay tolayaan faadumo markey soo uruuriso kuwaas ayaa u ahaa macaamiisho ka iibsado faadumo.

Waxay muddo yar sidaa ahaatoba faadumo waxay urursatey lacag yar oo ay ku bilaabikarto ganacsi kale oo ah in ay ka shaqaysto dharka horqadaho barkimooyinka in ay iibiso kadibno waxay sii kordhisay lacag kale oo shaqa kale ay kaga ganacsan karto.

Waxay sidaa ahaataba faadumo waxay baratey farsamada dharka sida loo tolo islamarkaana meel (dukaan) dharka lagu tolo ayey furatey iyo waliba meel lagu kireeyo dharka aroosyada dakhligeediina waa uu sii kordhey waxay soo iibsatey makiinadaha dawaarlaha dharka lagu tolo ee casriga ah si ay tayado dharka ay toleyso u sii wanaajiso.

Faadumo waxay noqotey wakhtigan xaadir ka ah Gabadh can ah oo layaqaano duk'aan wayna ku leh dawaarleyaasha suuqa.

## Layliska 3aad

Qoraal Akhriska sare ku xusan adoo racaya su'aalahan Hoose ka jawaab.

1. Sheekado dhaxdeedo Maxaa faadumo sababab u ahaa in uu hamiga ganacsi in ay ka fikirto?
2. Waamaxay waxyaabaha faadumo aad ka barateen?
3. Mustaqbalka idinkuna maxaad ku Hamideen in aad ka shaqaysiin? si koox koox ah ball idinkuna uga wada xaajooda (tashada)?

Dhammaan dadka Qof kastaa shaqada uu doono wuu abuuran kara islamarkaano wuu ku dadaali karaa sidii uu u kobcin lahaa meel sare uga gaadhi lahaa wu awoodaa Qofku shaqo in uu abuurto si uu ugu noolaado marka hore wuxuu u baahanyahay in uu Qodobadan hoos ku xusan la yimaado ama fahansanyahay.

1. Waa in uu fahmo shaqadu in ay tahay sharaf shaqada tan weyn iyo ta yar isagoona kala dooraneyn shaqa ahaanteedu sharaf in ay tahay in tau u aaminsanaado waa in uu diyaar u ahaado in uu dhaqan ka shaqaysto tu kasta (mid kasta)
2. Shaqo ku hamiyida: Qofku waa in uu yidhaahdo shaqo intaan Abuurto ayaan ka shaqaysan in uu niyada ka diyaar garoobo kuna dadaalo
3. Dadaal wanaajin: Shaqo intaad Abuurto markasta ku dadaashid sidii aad wax cusub shaqadaa ugu soo kordhin lahayd adigoo dadaal aan kala go'lahayn la imoonaya

Bini aadenku noloshiisa marba marka kasii dambeysa isbadal farbadan ay ka muujiyeey Sababta uu uga keenay ay wanaagsan uga keenayey noloshaa wanaagsani waxay ku timid shaqo ay shaqaysanayeen Awgeed.

Madadmo ay Dadku ku dadaaleen in ay muujiyen dhaqan hawl-karnimo iyo caadeysiga shaqo adeyga waxay ka adkankaran shaqadooda. Taasiina waxay u sahashey in ay ka soo guddbaan qaab nololeedkii dib-u-dhaca ee Qarniyadii Hore lagu soo noolaan jirey ku badalaan islamarkaana ku gaadheen nolo wanaagsan oo ku saleysan habsocod noolaaleed oo casri ah

Xiligan aan ku gada jirano natijooyinka teknoolojiyada casrigah ee aan arkeyno odhan waa midha dhalkii/ natiijadii shaqadii dadkii hore ay shaqeeyeen

Dhaqanka hawl-karnimo ee bulshadu marka uu kubuco ama si wanagsan u hirgalo ayu dalku horumar gaadhi kara. Hadaba waxaa xaqiiq ah hadii dadku cadeystaan dhaqan hawl-karnimo islamarkaana ku dadaalaan dhaqanka fiican ee shaqada waxay ku anfici karaan dalkooda dadkood iyo Qoyeskoodaba in ay ugu faaideeyaan.

Shaqadu yeryareysi maleh mana haboona in layidhado shaqo weyn iyo shaqo yer ama shaqooyinka lo kala doorto tanaa fiican iyo tanaa xun maalia hadii ay taasi dhacdo horumar iyo kobaca dhaqaale lama gaadhayo. Shaqo yer yareysi malaha shaqo waliba waa sharaf.

Tusaale: Waxaa laga yaabaa ardeyeey in aad ka fikireysiin shaqo in aad abuurtaan.

Arinkaasi waa wax wanaagsan. Hasayeeshe fikiraka shaqo abuurka oo keliya waxba matarayo Balse waxa loo bahaanyahaey markaba fikiirkaas in fiicil loo badalo. Shaqo cusub in aad sameysan markaad ka fikirtiinba islamarkaaba waa in aad ku dhaqaaqdid sidii aad u bilaabi lahayd.

Shaqo Waliba Waa sharaf

## Layliska 4aad

Su'aalan soo socda ka jawaaba:

1. Shaqo in la abuuro shaqadaasna noolashiin aad ku noolataan ardeyeey maxaad u bahantihin? Jawaabtan buugiina intaad ku faah faahisiin u akhriya barahiina.
2. Dhaqanka hawl-karnimada wanaagsani. Horumarka uu dalka ku soo kordhiinayo Qeex?
3. Waligiin maad maqasheen dadko leh shaqo kastaa waa sharaf? Jawaabtan buugiina intaad ku faah faahisiin u akhriya barihiina.

## 7.2 In wax la cuno iyado aan la shaqayn

### 7.2.1 Maxay ka dhiigantahay in wax la cuno iyada oo aan la shaqaysanin?

- Carruurey marka aad dugsiyada ka soo laabatiin shaqooyin aad qabataan may jiraan? Saaxiibadiina fasalka u sheega.
- In wax la cuno iyada oo aan la shaqaysanin in ay tahay wax aad u xun, tusaale qeexaya u sheega Barihiina.

In wax la cuno iyada oo aan la shaqaysan waxay ka dhiigantahay Qof kale waxa uu ku soo dhididay in aad aayar iska cuntid; waa cuniida natijada ay dad kale soo shaqeysteen, wuxu qofkale ku soo tabcay uu dadaalkiisa ku keeney in aad cuntid weeyaan.

Dadku waa in shaqeystaan si ay naftooda iyo qoyeskoodba wax ugu tari karan. Qof walba haddi uu shaqeysan oon waxqabadkiisa ku caawin waalidkiisa iyo bulshada uu katirsanyahy wuxuu nooqonayaa Qof culeys dulsaar ku ah dadka kale.

In wax la cuno iyado oo aan la shaqeysan waxa la odhan kara waa arin aad uu foolxun oona bahan in laga xishooda oo laga yaxyaxo islamarkaana ficilkaas ookale dadku waxay u arakaan in ay tahay dhaqan aad u xun in sida la sameeyo. Sido kale Qofka shaqeysta wuxu caawin karaa naftiisa iyo qoyskiisa/ruuxa shaqaaluhu Naftiisa iyo dalkiisa iyo dadkiisaba waxtarbuu u leeyahay islamarkaana dhaqankiisa shaqo wanagu waa dabeecada dadka kale ay kugu xurmeynayaan ooy bulshadu kugu Qadarinayso.

## Layliska 5aad

Ka dooda su'aalah soosocda:

1. Macnaha in wax la cuno iyado oo aan la shaqaynin waa maxay?
2. Sabata aan u shaqeysaneyno waa maxay? In la shaqeysto faaiidad ay leedahay maxay tahay?
3. Ayeey wax yeeleysaa in la cuno waxaadan shaqeysan? Hadii wax la cuno iyado oo aan la shaqaynin Ayey wax u dhimaysaa?

### 7.2.2 Iyado aan la shaqaysanin in wax la Cunno Dhibaatooyinka ay leedahay

- Awoodiina idinko kusaleynaya hawlgalada aad leedihiin waa laga shaqeyn kara taxa/ shaqooyinka aad isleedihiin waa in laqabto liis gareya

Dadku si ay unoolaadaan waxay ubaahanyihiin shaqo. Shaqadu waa damaanada nolosha. Qofku haddi uu shaqeysan cafiimad iyo noolala dhameestiran kuma noolan karo. Dadku si ay uu nooladan ugu yaraan wax ay uu bahanyihin Cunto, Hoy iyo Huga. Hadaba dadku si ay u heelan waxayabahan aas asiga uu ah noolasha waxa laga maarman ah in ay shaqeystaan

Isago shaqeeysan kara qofka aan shaqeeysan dadku/ qofna raali kama aha. Hasayeeshe waxa jiira dad raba in ay iska nooladan iyago shaqeysaniin oo wax shaqa ah qabaniin oon dadal waxqabad muujin, dadka noocaasi waxay jecelyihin iyago aan shaqeysan marwalba in ay cuunaan dadka kale waxa ay soo shaqeysteen ama kusoo tabceen., aragtiidasiina sax ma aha mana haboona. Sido kale dadku haddi aysan kudadaliin in ay shaqooyinka uu adeegsadan awood, xirfad iyo kartid ay leeyihiin oyn shaqeeysan habayaraate xaalada noolasha dadku ismaabadaleeyso. Dalkuna wax horumara ma gaadhi karo.

Dadku haddi ay rabaan in ay wax cunaan iyaga oo aan shaqeysanin waxa faa feysa/badanaysa aragtiida dulsaarnimada. Dulsaarnimadu waxa lagu tilmaami kara marka uu qofku shaqeysan waya islamarkaana rajeeya in uu ku noolaado hanti qof kale shaqeysatay oo dadka kale gacantood wax ka suuga isagon wax dadaal ah aan sameyn ama iyado aan la shaqaysan in la cuuno cid kale hanti ay leedahay ama raashin dad kale u kuso dhidiiday. Sida darted ardeyeey waa in laga fogaado islamarkana la cidhibtiro dhaqanka iyo aragtiida xuun ee dulsarnimada taso arqaalad ku ah horumarka dalka.

## Layliska 6^aad

Ka jawaaba su'aalah soosocda:

1. Dhibaatada ay leedahey iyado aan la shaqeysa in wax lacuuno?
2. sababaha keen dulsaarnimada laba kamid ah qeex
3. Shaqadu waa damaanada nolosha marka la leeyahay, sababta loo yidhado waa maxay?

### 7.2.3 Dulsaarnimada waa in laga xishoodo

Iyado aan lashaqeysan in wax la cuuno ama dulsaarnimadu waa ceeb sababta lo yidhado sheeg?

Dul saarnimada waa arrin aad u foolxun oo ceeb ah islamarkaana uu bahan in laga digtonaado ama lagu dadaalo in laga kaaftoomo waa arrin qof kasta laga maar-maan u ah. Macnaha dulsaarnimadu waxaa weye qof caafimaad qab iyo awood (xoog) ay ku shaqaystaan leh balse lakiin aan marnab iskudayiin in ay shaqeeysataan ooy heer iskufilnaasha naftooda gadhaan, dadka noocasi wax shaqo ah ma qabtaan waxayna dul-saar ku yihiin islamarkaana quutaan cuno ama hanti dad kale shaqaystay, ku daasha. Sida darted Waxa aan lashaqaysanin in lacuno waa wax laganaxo oo u bahaan in lago yaxyaxo.

Dulsaarnimadu waxay kamid tahay dhibaatooyinka liidka iyo turun turada ku ah horumarka iyo horukaca qoyska iyo dalkaba. Hadba waxaa laga maar-maan ah sharafna ah in dadal shaqo dulsaarnimada lagaga baxo oo la raadsado shaqo lana isku-filnaado. Sida darted dadka raba in ay wax cuunaan iyago aan shaqeysan waa in la baro in dulsarnimadu ay shey ceeb tahy islamrkaana ah arrin laga xiishoodo oo la naco ama laga naxo oo laga yaxyaxo. Hadaba islamrkaana waxa muhim ah in lagu dhiirigaliyo dadku in ay shaqeeysataan ooy nooloshoda iskufilnaadan.

### Dhirta Xafaada Ifraaxiyo

Ifrax iyo Muuna waa laba saxiibo. Maalin maalmaha kamid ah iyago fadhiyaa guuriga Ifraaxiyo si ay uga shaqeeyaan hawlgalada laylisaka ee baruhu uu diirey in ay gurrigooga kaga soo shaqeeyaan hadaba iyago dhameeystiraya hawlgalka ay ka shaqeynayeena, Muuna waxay aad ugu fiirsatey ubaxa iyo dhiirta ku beren daarada xafaada Ifraaxiyo waxayna aad uu la yaabtey quruuxda dhiirta ee ay aragtey islamarkiiba iyado yaaban waxay ifraax ku tidhi "Ifraaxey alla dhiirta ku beeran gurigiina aad bey u quruuxbadan tahay, si haboonan wey uu baxeen, lakiina waxaan ku weydiiyeey dhiirtan quurux badan aya daryeela islamarkaana illaliya oo biyah waraabsha?"

Ifraax waxay ugu jawaabtey su'aashi Muuna sidataan "abuurka dhiirta meel kale waxa ka keenay aabahey islamarkaana beerey islamarkaana waxaa shaqaada biyo waraabiinta iyo daryeelka dhiirta qabaana aniga iyo walaalkey" sido kale maalin iyada maalinta kalena walaalkeed in uu daryeelka dhiirta iyo shaqada biyo waraabinta u xilsaarenyihiin ayey Ifrax saxiibaded Muuna uu sheegtey.

Muuna hada kahore maadamo ay guurigooda dhexdeed wax shaqa ah ka qaban aadbey uu la yaabtey waxayna tidhii "Caruurta yer yeri wax shaqa mey qabtaan?" su'aashaas ayey Ifrax weydisey. Ifraax iyado siyaab leh u fiirineysa saxiibadeed Muuna waxay tidhii" waxaa xaqiiq ah caruuta yer yeri sida dadka waa weyn shaqooyin culus oo adag maqabtaan. Hasayeeshe waa in ay bartaan in ay qabaan karaan shaqooyinka fuudud islamrkaana a'amiinaan ama aqoonsanaadan muhimada ay leedahay in lasi barto dhaqanka hawl-karnimo ee ku saleysan kartida iyo awooda waxqabad ee shaqo ee qofku leeyahay in uu shaqada ku haboon uu qabto islamarkaana in ay caruurta waajib ku tahay in ay bartaan muhiimada ay leedahy shaqooyinka yer yer in laga shaq

eeyo taso ka bilabmeysa da'ada caruurnimada" ayeey Ifraax Muuna u sheegtey -

Muuna aadbey uu qoomameeyesey illa hada maaadamo uu marnaba ka qeybqaadan shaqooyinka ay gurigooga dhexdeeda kuqaban karto. Sido kale waxey aad uga murugotey illa hada in ay cuuni jirtey hanti ay dadkale ku soo tabceen. Hasayeesha maliintaas kadib wuxuu go'aansadey in waalikeeda ka caawineyso shaqada gurigooda dhaxdeed laga sameynayo waxayna markiiba bilaabdey in uu qabato dhammaan shaqooyinka ay awoodi karto in ay ka shaqeyso

## Layliska 7aad

Adigo ka dulayaa warbixiinta kor ku qeexan kajawaab su'aalahan soo socoda

1. Ardeeyey maxaad ka barateen Sheekada Muuna iyo Ifraax?
2. Caruurtu in ay ka qeyb qaatan shaqaada ay ka shaqeeyan karaa ciida ka faaiideeysa waa ayo? Ardayeey kawada hadla/falanqeeya.
3. Go'aanka kamadanbeyska ee Muuna muxu aha?

Dadka ku hawlan shaqooyinka manafacadka ee faaiidada uu leh naftooda iyo deegankaba waxa la odhan kara waa dadka jeecel in ay shaqa qabtaan, dadka aragtiida/afkaarta noocas leh, naftooda ka sakow waxay dadka kale uu sheegaan in ay ceebtahay oo in laga yax yaxo ah, in wax cuunan iyado aan la shaqeeysan islamarkaana waxay dadka ku dhiiriyaan in wax lagu helo shaqo kaliya taasna lagu noolado.

Gudahaan, Dadku waa in ay ku nooladan midhaha kaso baxa natijada waxqabadkooda shaqo, islamarkaana shaqada ay ku hawlanyihiin waa in ay noqoto mid kusaleysan awooda iyo kartida uu ogalanaysa in ay ka shaqeeyaan/qabtaan shaqadas. Sido kale dadka raba naftooda iyo dalkoodaba in ay ku horumariyaan midhaha natijada shaqadooda kasobaxda waxay aad u naceebyihiin ooy ka xiishoodan iyado aan la shaqeeysan in wax la cuuno. Hasayeeshe waxa jira dad raba in ay fadhiga ku cuunaan dad kale waxa ay kusotabceen ama cuuna hanti ay dadkale soo shaqeysteen. Lakiin Arrintani maadamo ay tahay mid wax yeelassa/dhiibata u geysanaysa qofka, qoyskiisa iyo dalkaba waa in lala halgamo/ tir tiro oo si adag loo cambareyo.

Dhinaca kale dadka neeceb in wax la cuuno iyado aan la shaqeeysaniin waxay hormud tusale uu nooqdaan dadka kale.

## Layliska 8aad

Ka jawaaba su'aalah soosocda:

1. Dadka kale waxa ay kuso tabceen/shaqeysteen in aadan cuuniin mustaqbalka maxad sameynasiin?
2. Shaqaada guriga dhaxdeeda qeybta/waxyaabaha idinku aad qabataan maxa kamid ah?
3. Qofku dulsaarbu ku yahay qofka kale markee la odhan kara iyo sidee kolku nooqdo aya la odhan kara qofkani waa dulsaar? Qofka wax uusan shaqaysan cuna waa qof side ah?

## 7.3 Xuquuqda shaqo ee dastuuriga ah

- Dadka muwaadinka ah ayaa u kala doora shaqaa uu ka shaqaysan karo iyo shaqada uusan ka shaqayn Karin ama cidee dadaka shaqada u doorata?

Iyado la shaqeysanayo in la noolado waa xuuquuqda mawaadiiniita odhan. Dadku waxay xaq uu leeyihiin in ay ka shaqeystaan deegankooda/dalka ay kunoolyihiin. Dadku si ay u noolaadaan waa in ay shaqeystaan waxay u baahnyihiin shaqo shaqaduna waa damaanada nolosho. Mana aha in Qof loodiido in uu shaqeeysto. Qof hadii loo diido in uu shaqeeyo waxay ka dhigantahay waxaa loo diidey in uu noolaado. Sidaas darteedno maaha in Qofka loo diido in uu shaqeeyo. Xuquuqdaana waxaa la dhahaa xuquuqda shaqo ee dastuuriga ah sharciga itoobiyana wuxuu qeexayaa qof walbo muwaadiina in uu xaq uu leeyahay in uu noolaada Xuquuqdaasna waxaa la dhahaa xuquuqda noolasha. Distuurka dalku qeexida xuquuqda noolasha ee mawadiiniita kasakow wuxuu qeexa xuquuqda shaqo ee mu8waadiiniita si Qofku uu noolaado waa in uu qaban karo shaqo ku haboon ama ka shaqaysan karo dalka. Hadaba Caruurtu

shaqooyinka ay ka shaqeyeen karaan in ay qaabtan way wanagsantahay. Lakiin shaqooyinku waa in ay nooqdaan kuwa aan xaq gudub ku aheyen da'adooda, kanasareyn awoodooda islamarkaana xoogoga si khaladan uga faaiideysan/uquuqda shaqo ee sharcigu fasaxay marka laga reebo shaqooyinka xooga u baahan ee aan loo fas axiin caruurtu ama ciyaalka aan da'dii shaqadaa loogu fasaxayey aan wali gaadhin.

## Layliska 9aad

Ka dooda/falanqeeya su'aasha soo socda

1. Maxaa looga jeeda kafaaiideysiga khaiiniimo xooga caruurta? Maxay niilatahey marka aan leenahay shaqada laxidhiidha kafaaiideysiga khaiiniimo ee xooga caruurta?

### 7.3.1 Xuquuqda Qof kasta u leeyahay in shaqada uu rabo Goobta u doono kashaqayn karo t



Jaantuska 7.2 Dad ku hawlan shaqooyin kaladuwan

- Sida sawirada ku cad dadkani shaqooyin caynkee ah iyo Agagaar (Goobo) caynkee ah in ay ku shaqaynayaan iyaad u maleyneysiin?
- Mustaqbalka idinkuna shaqo caynkee ah in aad ka shaqaysiin oo aad ku noolaatiin ama naftina ko dabartiin ayaa dooneysiin?

1. Qof kasta oo muwaadin itoobiyaan ah wuxuu dooran karaa shaqada uu rabo islamarkaana uu doorto in uu ka shaqaysto xaqbuu u leeyahay dadkoo dhani shaqada ay jedeooranayaan in aaney isku waa mid noqonkarinbaa laga yabaa Qof ba beeraley noqdo kakale macalin ama dhakhtar iyo iwm Hadaba dadkani shaqada ay kala hayaan ayuunbaa kala duwane intuba waa wada shaqo. Taasina waa xuquuqda dastuuriga ah ee Qof ku in uu shaqaysto sharcigu u fasaxay.
2. Qof kasta shaqada uu doortay iyo Goobkasta oo dalka dhaxdiisaiya dibadaba ee uu rabo isaga oo ku nool in uu ka shaqweeyo xaqbu u leeyahay. Xirfaadha iyo Aqoonto Qaarkood iyunbaa Goobaha lagu shaqaynkaro kala duwanyiin jusaale Qof ka sameeya jalxadaha dhoobada wuxuu qaadsadaa meelaha xaradasi laga sameeyo uu ka heli karo. Kaluumeystuhuna wabiyada iyo badaho Aagagaar kooda ayuu ka hawlgalaa.
3. Qof kasta wuxuu xog u leeyahay in uu dhaqdo ama yeesho hanta (alaab) uu gaar u leeyahay. Qofka muwaadinki Goobta uu rabo inta uu ka soo shaqaysto Hanti (Alaab) uu gaar u leeyahay wuu dhaqan (yeelan ) karaa. Taasina waxay ku cadahay xuquuqda dastuuriga ah ee Qofku in uu yeesho Alaab uu gaar u leeyahay loogu fasaxay weyaan.

## Layliska 10aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda:

1. Waa maxay micnaha xuquuqda shaqo ee dastuuriga ahi?
2. Qofku si uu naftiisa iyo Qoyskiisaba noloshooda wax ugu kordhiyo/wax uga badalo maxaa in uu sameeyo ay tahay ama laga sugayaa?

### 7.3.2 Xaqa Qof walba uu leeyahay in uu yeesho Hanti u gaar ah

- Alaab (Hanti) Shaqsi u gaar ah micneheedu waamaxay?

Hanti Shaqsi micneheedu wax weeyaan Qofku Maalko uu isagu shaqoystey ama iskaleeyahay tusaale Guri, Xoolo, cagafta beerta, Qalabka beeraha iyo wixii la mid ah.

Qof kasta oo muwaadin itoobiyaan ah waxaa u banana in uu meesha uu doono ka shaqaysan karo Hantina ku lahaan karo ama maalka uu shaqaysto Alaabta uu rabo siisan karo Hantidaasina Gaar ama ku gooni jtahay isticmaalkeedo iyo la haan sheheeduba Qofaa suagaystey kaliya.

## Layliska 11aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda:

1. Sideebu Qofku Hanti (Alaab) u gaar ah ku yeelan karaa?
2. Qoyskiinu hantida (Alaabta) u gaar ah lahaan sheheedo Qeex?

## 7.4 Macnaha Xirfada iyo Anshaxa Xirfadeed

- Marka la yidhaah Xirfada maxay ka koobantahay?
- Anshax xirfadeed maxay ka dhiigantahay?

Xirfadu waxaa lagutilmaami kara shaqo aqoon iyo farsamo uu gaar leh islamarkaana tababaro iyo waxbarasho rasmi ah takhasus aqoon xirfadeed muddo lagu soo jiray shaqo u baahan weeyaan. Tusaale Aqoon xirfadeed dhakhtarnimo, muhandisnimo (Engineer) iyo mid beeraleynimo. Sidoo kale macalininao...iwm Waxay ka mid yihiin takhasusyo waaxyo shaqo oo kala duwan leh.

Aqoon yahan marka aynu leenahayna dadku shaqooyinkan kala duwan ku soo takhasusayislamarkaana si gaar ah loogu soo tababarey kana shaqeeya ayaa la yidhaahda.

Anshaxa cilmiyeedka shaqano waa qofka aqoonyahan ku shaqada uu hayo marka uu sida ugu wanaagsan uu shaqada u qabanayo farsamooyinka uu ku soconaya islamarkaana in uu sida ugu saxsan u dhaqan galiyo u sahlaya–xirfadahani Qof kasta oo leh takhasuska aqooneed ee shaqada marka uu hayo sida ugu wanaagsan ugu adeegsado waxyaabaha saxda ah iyo kuwa aan saxda ahay Qofkaasi khasaaruu ku sugemyahay.

## Layliska 12aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda:

1. Waxaad faah faahisaa Qodobado looga baahanyahay in uu tixgaliyo/u hogaansanaado Aqoonxaanku/Xirfad yaqaanku/ forsamoyagaanku ?
2. Ayey dan u tahay ama faaido in Adeeg wanaagsan la bixiyo (Sameeyo) Marka la shaqaynayo?

### 7.4.1 U hogaansanaanta awaamiirta xirfada iyo mab'aadiida shaqo

- Waa maxay macnaha uu hogaansananta awaamiirta iyo mabadiida shaqo?

Shaqo kasta oo aan Qabaneyno waxay leedahay natiijo u gaar ah. Xirfadaluhu shaqada uu qabanayo si ay uu noqoto mid natijo fiican leh waxa loga bahanyahay horta in uu siifiican u garto nidamka, awaamiirta iyo shuuruucda xirfadaas leedahay hadaan soo qaadano ganacsatadu inta aaney wax soo iibsanin kahor waxay ogaadaan qiimaha uu isku bixinayo taasi oo diyaar garaw badan u baahan inta aaney shaqada bilaabin ka hor in ay sameeyaan ay tahay. Tusaale Beeraleydu inta aaney beerin kahor dhulkay sii qodaan oo sii jilciyaan kadibna way baaraan.

Hadaba hadii uu sideeda u hirgaliyo dhamman shaqooyinka iyo hawlaha ay shaqada beeruhu u baahantahay qokaas beeraleyda ah wuxuu helaya Wax soo saar fiican oo natijo midha wanagsan leh taaso uu fuudedineysa islamarkana ka cawiineysa in uu naftiisa iyo qoyskiisaba si haboon ayu ugu quudin karaa. Sido kale wuxu karaya in uu iibiyo midhahaas islamarkaanaa lacagtaasna wuxuu ku iibsan karaa sheyga uu rabo/waxa u doonayo odhan. Hasaahaate haddi u sideeda u hirgalin ama uu raaciin niddamka iyo awaamiirta ay shaqadu leedahay ma heli karo natiijada uu rabo

Sido kale Macalinkuna waa in uu Ardeyda aqoon iyo xirfad wanagsan ku barbaariyo marka uu ardeyda wax barayo islamarkaana maskaxda ardeyda waa in uu aqoon iyo xirfad cilmiyeeysan si wanagsan ugu dhiiso, ardeydu si ay u noqdaan mustaqbalka mawaadiiniin tayo iyo wax soo sar leh isagu waa in uu horta la haado kalgaceyl shaqo islamarkaana ku dhaqma anshaxa xirfadeed ee wanagsan sida ilaalinta wakhtiga xiisada, dhiirigalinta ardeyda, muujinta kalgaceylaka ardeyda, tartan siiinta Ardeyda dhaxdooda, adeegsiga habaka baris-barashada

firfircon ee horseeda casharka ka qaybgalka fiican ee ardeyda  hadaba baruhu waa in uu la haado dabeecadaha aan soo sheegney hadii kale bruhu ma soo sari karo mawaadiiniin tayo iyo karti wanagsan leh ardeyduna cilmigii iyo aqoontii looga baahnaa in ay ka hesho waxbarashadaas way adegtahay

## Layliska 13aad

Su'aalhan soo socda kawada hadala ama falanqeyn ku sameeya

1. Qofka xirfadluhu shaqada uu qabanayo si ay uu noqoto mid natija wanagsan leh maxa looga baahanyahay in uu sameeyo?
2. Waxbarashadiina in aad natiijo fiican kaheeshaan maxaa nigala baahanyahay in aad sameysaan?

### 7.4.2 Kobciinta kartida iyo aqoonta xirfada



Sawirka 7.3 tababarka xirfad yaqaanka

- Dadkan aad sawirka ku aragtan ee tababaranaya maxay tababarka kafaaidayaan? Dalkuna?

Shaqadu  natijo wanagsan in ay lahaato waxay kuxidhantahy xirfadluhu marka uu sameeyo dadlaka ee kor ugu qadeyo  aqoontiisa iyo xirfadaba. Natijada shaqada sii kor logu qaado ama loo kubciyo waxa laga maarmaan aha  in  la kubciyo aqoonta iyo xirfada shaqada uu bahantahay

Kaqeyb galka tababarada kala duwan ee laxidhiidha shaqadiisa ee kuna wajahan kor u qaadiista kartida iyo aqoonta xirfadlaha. Marwalba tababarada la xidhiida shaqadiisa qofka qaadanaya ama baranayo waxa uu wanaajin karaa shaqada uu qabanayo ama adeega uu bixinayo. Waxayna kor u qaadayaan/kubciyaan natijada waxqabadka shaqo. Sido kale waxa loo bahanyahay dadka xirfada wanagsan uu leh shaqadaas  in aad waydiisid si aad u heeshiid aqoon fiican oo laxidhiidha shaqadaad. Qofka ku dadaala in uu kordhiisto xirfada shaqo wuxuu nooqonayaa xirfadle adag oo natijo wanagsan keena tasoo kor u qaadeysa tayaada wax soo saarka shaqada. Xirfadlaha sameeya Wax soo saarka tayada leh wuxuna macaamiishiisa kahelaya ictiraf iyo xuurmeyn dheeri ah.

Hadaba shaqaale walba shaqada uu ka qabanayo natijo wanagsan si uga dhaliyo islamarkaana si uu bulshada adeeg fiican siiyo waa in uu adeeco/una hogaansanado anshaxa xirfadeed ee shaqadu leedahay

Marka ay hirgalaan fiiciladaasi waxa la odhan kara qofka xirfadluhu shaqada uu qabanayo qoyskiisa iyo bulshadabu way ka faaiidaysanaya. Sida darted adeega uu xirfadluhu iyo shaqada uu qabanayo waxay waxtar badan u leedahay noloshiisa, Qoyskiisa iyo dalkaba sidii horumar u gaadhi lahaa

## Layliska 14aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda:

1. Tababarka ka sakow xirfada shaqadu side loo baran karaa?
2. Wada shaqaynta dadka kale maxaa laga hela ama faaiida  laga helo shaqada daak kale lala shaqeeyo waa maxay?

## Gaba-Gabada/Soo koobida Cutubka 7[aad]

Qofkasta oo nool waxaa uu u baahanyahay waxa uu cuno wax uu cabo, hoy iyo wax uu xidho.

Si taasi loo helana waxaa Qof walba waxa looga baahanyahay in uu shaqaysto. Iyado aan la'yareysan ama la fuudeydsan shaqo walba haddi laga shaqaysto waxa la sameyn kara ficil ama shaqo faaiido uu leh qofka iyo horumarka dalkaba. Shaqo yer yareysi malaha shaqo waliba waa sharaf. Looma baahna in layidhdo shaqadani wey yartahay tana wey weynta. Maanta shaqada aad isleedahay wey yertahay hadii aad ku dadaasho shaqadaas laguna tageero aqoon iyo anshax xirfadeed waxaa laga yaabaa berito in aad ka gaadhid horuumar meel sare ah.

Siidaasi darted in laga shaqeeyo shaqo walba waxay horsed u tahay horumarka noolasha qofka, qoyskiisa iyo horumarka dalka.

Shaqaadu sida shey walba waa waxa la abuuri karo. Hasaahaate in shaqo la abuuro waxaa horta loo bahaanyahay hamiga rabiitaan shaqo, isxilqaan iyo dadaal shaqsiyeed

Shaqo mahaysto in taad tidhaahdiid in aad gacmaha iska laabatid ma aha ee waa in aad ku dadaasho sidii aad shaqo u abuuran lahayd taasina waxa kaliya ee ay idiinka baahantahay waa in aad isxilqaan la timaadiid sidii aad shaqo u samaysan lahayd.

## Ereyada Muhiimka ee Cutubka 7[aad]

| | |
|---|---|
| Dulsaar: | Qofka ku nool cidkale waxay soo shaqaysatey ama ay soo xoogsatey. |
| Ceeb: | Sameynta ficil xun oo dadku ka xishoodaan |
| Tacab kahasaare: | in lagu daalo waxaan faaido lahayn |
| Xirfad: | Waa Aqoonto iyo kartida aan uu leenahay a shaqo in aan qabanoo |
| Khibrad: | waa aqoonta iyo xirfada laga helo shaqada sida joodtada ah loo qabto ama aad baratid |
| Mab'da: | Marka dadku shaqo Qabanayaan jihada (Hanaanka) ay Raacaan ama ay u hogaansamaan weeye. |
| Dhaleecayn: | Magac Xun in loo bixiyo ama habaar |
| Anshaxa shaqo: | haba dhaqanka laga filayo in uu xirfadluhu ku dhaqmo ama uu muujiyo dabeecad loo baahanyahay in aad la timaadid marka la shaqaynaya. |
| Maal: | Lacag, Alaab, Hanti iyo iwm |

## Su'aalaha Nakhtiinka ah Ee Cutubka 7[aad]

I. Weedhahan soo socda tee saxda ah dhe "Run" tii khaladka ahna "Been" dhe

1. Shaqadu waa Aasaaska Nolosha dadka
2. Qofku shaqada uu hay mooyaane shaqo kale in uu abuuro loogama baahna.
3. Isku filaansho in aad gaadhid Qofkaa uunbey faaiido u tahay.
4. Ceeb ma aha in uu Qofku cuno waxay dadkale soo tabcadeen ama ay ku soo daaleen
5. Shaqada aad rabtiid in aad ka shaqaysiid iyo in aad hanti kuu gaar ah yeelatiid waa xuquuq ay leeyihin dhammaan muwaadiniinta dalku

## II. Isku aadi qodoobada ku taxan qeybta "T" iyo qodoobada ku taxan qeybta "B"

| B | T |
|---|---|
| 1. Xirfad | B. Xuquuqda muwaadiinita shaqeeystaan ooy noolaada |
| 2. Kartida xirtadeed | T. fiawlaha ay wadajiir uqabsanayaan dad ku |
| 3. Xuquuqda shaqo | J. Xirfad luhu qaadariinta uu hayo shaqadiisa |
| 4. Hanti shaoqsi | X. Shaqada uu baahan xifad gaar ah. |
| 5. Anshaxa xirfada shaqo | Kh. Xiiqadiisa hantiida uu muwaadinku kasameeysto |
| 6. Koox ku shaqayn | Dh. Xiifada kacaawin qofka marka uu shaqaada gaalo iyo aqoonta uu leeyahan shaqaada |
| | R. Bulshaada laadeegayo oo laga qeyb galiyo |
| | S. Fiiciilka ceebta ee bulshadu raqbdleen. |

## III. Su'aalahan soo socda ka dooro mida saxda ah

1. Si uu xirfadluhu/farasamayaqaanku adeeg wanaagsan u bixiyo mida in uu joogteeyo looga baahanyahay waa tee?
   - B. Anshaxa xirfada shaqo
   - J. Shaqo cusub in uu Abuuro
   - T. Kartida xirfad yaqaan
   - X. dhamaan waa loo baahan yahay
2. Weedhaha hoos ku qoran mide baa ceeb ah on in laga xishoodo iyo wax laga yaxyaxo ah
   - B. shaqo dheeri ah oo laqabto ama Adoo shaqo haysta inaad shaqo kala gasho
   - T. Dadalkaaga in aad shaqo ku Abuurtid/Adoo isxilqaamayo inaad shaqo Abuurto
   - J. Ado shaqaysan kara in aad cuntiid dad kale waxay xoogsadeen/soo shaqaysteen.
   - X. kubciinta aqoonta/farsamada
3. In shaqo la Abuurto midee Muihiim u ah/loo baahanyahay
   - B. in uu Qofku la yiimaado is-xilqaan iyo ka go'naansho in uu shaqaysto
   - T. in aad rajeeso ood doontiid Qofkale in uu ku caawiyo
   - J. lacag intaad heleysid in aad sugtid/iska joogtid.
   - X. in aadan diyaar u noqonin in aad xirfad/farsamo baratid/lahaatid.
4. Qofka aan shaqaysanin Aakhirka muxuu ku danbeyn doonaa
   - B. Wuxuu dulsaar ku noqondoonaa dadkiisa iyo dalkiisa
   - T. Noloshiisa heer sare ayuu gaadha.
   - J. Wuxuu nooqdaa Xirfadle anshax shaqo leh
   - X. wuxuu Abuuraa Shaqo

5. Sbabta ay dadku shaqo uga shaqaystaan waa maxay?
   B. in uu ku noolaado islamarkaana si uu helo waxa uu u baahanyahay
   T. Dalka iyo deegaankiisaba in uu xirfadiisa ugu adeego.
   J. Si uu naftiisa iyo qoyeskiisaba u caawiyo
   X. Dhammaan Jawaab ayey yihiin

## IV. Kuwan soo socda meelaha madhan ku buuxi Ereyada ama weedhaha ku haboon

1. Dalku wuxuu ku horumaraa Dadkiisa shaqayn kara marka ay lahaadan dhaqan ........................ weeye
2. Shaqo in la Abuuro oo laga shaqeey muhihiimada ay leedahay waxa weye in ........................ iyo ........................ lagaga Baxo ama laga gudbo.
3. Qofka xirfardlaha ee xirfadiisa ku shaqaynaya xeerka iyo Hanaanka shaqo ee in uu Raaco ama u hogaansamo waxa la yidhaahdaa ........................

## V. Su'aalan soo socda jawaabo kooban ka bixiya

1. Maxay ka dhiigantahy/waa maxay micinaha/shaqo midh-dhal natijo leh?
2. Markeen odhan karanaa qofkani Anshaxii xirfada shaqo ma leh?

CUTUBKA 8

# Isku-filaanshaha

Ujeedooyinka Cutubka

Markaad cashirka cutubkan baratid ee aad dhammaystirtid waxaad:

- Fahmi doontaa macnaha isku-filaanshaha.
- Fahmi doontaa faaiidada isku-kalsoonida.
- Aqoonsan doontaa sababta loo isticmaalo u diyaar-garowga wax ka barashada kuwa kale.



Jaantuska 8.1 Ku-tiirsanaan



Jaantuska 8.2 Isku-filaansho

## 8.1 Macnaha Isku-filaanshaha

- Labada jaantus ee kor ku yaal, keebaa ku tusaya isku-filaansho?
- Isku-filaanshaha dugsiga gudihiisa iyo guriga ee la xidhiidha shaqooyinka aad qabatiin inta aad sidaad isugu xig xigtiin u kacdiin saaxiibada fasalka u soo bandhiga.

### Ardayda Fariidaha ah

Ardayda fariidaha ahi meel kasta oo ay joogaan, hurdo-ka toosin uma baahna aroorta hore ayay toosaan. Intay horay u kacaan ee ay dharka xidhaan ayay fool-dhaqdaan (wejiga maydaan) oo ay quraacda cunaan ayay si dhakhso ah dugsiga u tagaan. Marka calanka la sudho intay si wadajir ah ugu heesaan ayay si asluub leh fasalka u galaaan. Marka uu macalinku wax fahansiinayana intay si deganaansho leh u dhegaystaan, ayay su'aalahana ka jawaabaan marka la waydiiyo intay u fiirsadaan. Aqoontoodu si ay u korto, buugaagta ayay akhriyaan. Hadaba waa sidan fariidnimadu ee qalbiga/maskaxda ku haya caruureey.

Isha laga soo xigtay: Buugga caruurta ee "Raalida" 2000 /Yezina Worku/

### Layliska 1aad

Si aad gabayga ugu salaysiin, su'aalaha soo socda ka jawaaba:

1. Waxqabadyo sharraxaad u noqda isku-filaanshaha odhaahyo qeexaya soo bandhiga,
2. Qodob dood ah iyo mid qoraal ah intaad dooratiin, markaa ka dooda faaiidada laga helo isku-filaanshaha.

Isku-filaanshuhu waxaa weeyaan intaad si foojigan u garatid awoodaada, aqoontaada iyo xoogaaga kadibna adigoo ka duulaya qiyaastaa, waxaad kartid oo dhan inaad dadaashid oo aad qabatid. Waxaa kale oo qeexitaanka isku-filaanshaha ee ugu muhiimsan ah inaad shaqooyin midho-dhal ah (wax-ku ool ah) ku fulisid lacagtaada, aqoontaada iyo xoogaaga adiga oo aan gargaar ka sugin dawlada, ururada aan dawliga ahayn, saaxiib ama qoyska. Tusaale ahaan caruurtu:

- Hadii ay si fiiro leh ula socdaan oo intay diyaargaraw fiican sameyaan wakhtiga imtixaanka ay ka shaqeeyaan iyaga oo aan kala qishin (kala eeganin);

- Hadii ay iskood uga soo shaqeeyaan shaqooyinka guri ee ay macalimiintu u diraan iyaga oo aan qoyska waxba ka rajayn/ filin;
- Hadii ay yihiin kuwo si haboon oo taxadir leh u haysta qalabkooda waxbarasho ee guryaha dhexdooda u yaal;
- Hadii ay yihiin kuwo ilaaliya saacadaha dugsiga la galo iyo saacadaha laga soo baxo;

Guud ahaan hadii ay yihiin kuwo iyagu fuliya waxyaabaha ay doonayaan "Way isku filaadeen" ayaa la odhan karaa.

Jaantuska 8.1. waa mid ku tusaya ilmo waxa uu qabanayaa aanu tayo lahayn kaas oo si uu isugu-filaado fiirinaya waxay dad kale qabanayaan isagoo taagan. Taas marka la barbardhigo jaantuska 8.2. sariirta waxaa goglaya ilmaha laftiisa taas oo muujinaysa inuu isku filaanshaha tayo u yeelayo (horumarinayo). Sidaa daraadeed, caruurnimada laga bilaabo inaad isku-filaanshaha ku dhaqantid, noloshaada mustaqbalka ayay toosinaysaa.

Markaan dhinaca kale ka fiirino, qofkuu doonaba ha noqdee, si uu go'aankiisa u haysan karo waxna ugu fulin karo marka hore waa inuu noqdo qof isku-filan. Waa dhibaato in qof kale lagu tiirsado oo aan qofku aragtidiisa ku socon go'aankiisa khaaska ahna wax ku qabsan.

## Layliska 2aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda:

1. Maxay yihiin shaqooyinka laga filayo ardaygu inuu fuliyo si uu isugu filaado?
2. Magacaaba/caddeeya idinku shaqooyinka aad iskiin u qabatiin guriga markaad joogtiin.

## 8.2 Isku-kalsoonaan

- Waa maxay 'isku-kalsoonaantu'?

### Axmad iyo hooyadii

Marwo Aamina waxay u yeedhay inankeedii Axmad oo ay ku tidhi: "Wiilkaygii Axmadoow! Maanta aad baan u bukaa/jiranahay. Barito dharkii aad dugsiga ku tegi lahaydna lama maydhin. Hadaba maxaan sameeyaa? BAL aan deriska ka soo baryo qof ii maydha dharka.

Axmad ayaa ku yidhi, "Hooyo, maxaad dad u soo baryi"?

Hooyo Aamina ayaa ku tidhi, "Haddaa maxaan sameeyaa? Hadii aan dharka laguu maydhina barri dugsiga waad ka hadhi". Markan Axmad aadbuu u yaabay oo wuxuu ku yidhi, "Miyaan aniguba maydho!

Hooyo Aamina ayaa ku tidhi, "Allaa wiilkaygiiyow adigu waxba ma maydhi kartid".

Axmad ayaa ku yidhi, "Allaa hooyo maxaan kaa yaabay! Anigu maadaamo aan fiirsado markasta oo aad adigu dharka maydhaysid anigu sida loo maydho waan garanayaa. Habaryartayna maadaamo aan ka codsado inay I barto sida loo maydho iyaduna way I bartay.

Sidaa darteed, aniga ayaa maydhaya.

Hooyo Aamina iyadoo aan rumaysan ayay ku tidhi, "Ma suurtagalayso".

Axmad laakiin dhar-maydhidiisa maadaamo uu ku kalsoonaa ayaa wuxuu ku yidhi: "Macno laha hooyo! Hadii aanad i rumaysan intaan kuu soo dhawaado aan maydho". Maadaamo ay fikirkan danbe rumaysatay hooyadii, iyadoo fiirinaysa ayuu dhar-maydhkii bilaabay.

Hooyo Aamina ayaa ku tidhi, "Fariid wiilkaygiiyow waynoow!" Waa hagaag. Bal aan in yar seexdo si uu madaxu ii ladnaado.

## Layliska 3aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda idinkoo ku salaynaya sheekada kor ku xusan.

1. Caddeeya odhaahda muujinaysa 'isku-kalsoonida' idinka oo ku salaynaya sheekada aad kor ku soo akhrideen.
2. Axmad maxaa ku dhiirigeliyay inuu isku-kalsoonaado oo uu yidhaado "dharka waan maydhi karaa"?
3. Si isku-kalsooni loo helo, maxaa loo baahan yahay?

Isku-kalsoonidu waxaa weeyaan inaad awoodaada intaad si taxadir leh u garatid shaqada aad qabanaysidna inaad hubtid aad garan kartid. Isku-kalsoonidu waa dareen kugu kalifayay shaqo iyo aqoonsiga saxda ah ee aad iska qabto. Tusaale ahaan hadii ardaygu waxbarashadiisa fasalka dhexdiisa uu si aad ah ula socdo, shaqada guri ee uu macalinku siiyana inta uu kasoo shaqeeyo uu samaysto qorshe uu ku akhristo, wakhtiga imtixaanka si isku-kalsooni leh ayuu uga shaqayn karaa.

Isku-kalsoonida waxyaabaha aasaaska u ahi waxaa weeyaan in la dadaalo oo la shaqeeyo iyo in lagu dhaqmo aqoonta. Sheekada kor ku xusan, Axmad hooyadii iyo habadii markay dharka maydhayaan intuu fiiriyay ayaa isagoo wax ka baranaya wuxuu xaqiijiyay inuu isaga laftiisu dharka maydhi karo, taas oo ah isku-kalsoonidiisa. Isku-kalsoonida shaqada uu ku qabtay waxay ka badbaadisay baryadii deriska/jaarka. Intaan isku-kalsoonaano si aan dadnimadeena ugu faano, dadaal iyo shaqo ayaa inagu waajib ah.

## Layliska 4aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda:

1. Maxaa lagaaga baahan yahay inaad samaysid si aad isugu kalsoonaatid?
2. Inaad isku-kalsooni ku shaqaysaa maxay faaiido leedahay?

## 8.3 Go'aan ku-adkaysiga



Jaantuska 8.3 Aaminsiinta fikirkaaga kuwa kale

- Muxuu muujinayaa/tusayaa jaantuska kor ku xusan?

### Faarax iyo saaxiibadiisa fasalka

Faarax waa arday dhigta fasalka shanaad. Baruhu markuu cashirka siinayo lama socdo. Shaqada guri ee la siiyana isagu kama shqeeyo. Arintan awgeed ayaa inta uu saaxiibadiisa fasalka inta uu siiyo furun (rooti), nacnac, iyo buskut uu guriga uga keenay ayuu baryi jiray waxa ay ka soo shaqeeyeen inta ay u rogaan ka dib sidaa loogu saxo. Wakhtiga imtixaankana wuxuu awooday inay ballan u qaadaan inuu ka qisho ama eego iyaga.

Xaalada sidan ah ayuu sanadkii ugu horeeyay ku gaadhay imtixaankii qiimaynta. Faarax ardaydii ugu ballan qaaday inay qish siiyaan ayuu agtooda fadhiistay si uu qishku ugu suurtagalo. Laakiin markii uu macalinkii imtixaanka qaadayay fasalka soo galay, wuxuu bedelay fadhigii ardayda. Faarax inta ay kala baxeen ardaydii qishka (eegashada) ugu ballan qaaday ayuu safka ugu horeeya fadhiistay.

Markii la bixinayay natiijada imtixaanka, Faarax wuu ka xumaady maadaamo uu helay natiijo liidata. "waan dhacay isagoo leh ayuu ooyay". Saaxiibkii Cumarna wuxuu ku yidhi Faarax oo gadhkiisa gacanta ku haya, "Waxaa waajib kugu ahaa inaad waxbarashadaada la socotid oo aad imtixaanka woodaada kaga shaqaysid intaad isku diyaarinaysay qishka". Luulna intay ku kaftantay (ciyaartay) ayay ku tidh, "Arin ka hortag mooyee ka daba tag malaha".

Faarax aad ayuu u qoomameeyay (uga shalaayay). Wuxuuna yidhi, "Wixii hadda ka danbeeya waa inaan waxbarashadayda xoogga saaraa, shaqadayda gurina aan anigu ka shaqeeyo. Si niyad ah ayaan wax u baran. Sidan markaan sameeyo intaan dhibic sare keeno ayaa u gudbi fasalka lixaad". Sidaas ayuu go'aansaday.

Go'aankii uu qaatay intuu ku adkaystay (ku samray), ayuu sii waday inuu dadaal wax ku barto, ku akhristo shaqada gurigana isagu kaga shaqeeyo. Saaxiibadiina buskutkii iyo nacnicii marka ka hadheen "waxaan shaqaynay qaado oo rogo" hadii ay yidhaahdaa, "Ma noqonayso sidaa maxaa yeelay anigu idinka idinkuma

tiirsani, intaan isku-filaado ayaan awoodaa inaan natiijo fiican keeno". Faarax intuu ku adkaystay go'aankiisii ayuu imtixaankii si calool adayg ah kelidii intuu fadhiistay u qaatay. Sidaana natiijo sare ku keenay.

Saaxiibadii laakiin intay cadhoodeen ayay ku yidhaahdeen, "Waar adigu arday damiin ah ayaad ahayd". Isaguna inta uu u jawaabay isagoo ku kaftamaya ayuu yidhi, "Wax aanad lahayni kuma wado".

## Layliska 5aad

Su'aalaha soo socda ka jawaaba idinka oo ku salaynaya cashirka kor ku xusan.

1. Caddeeya sida uu Faarax ku keenay natiijada liidata (hoose).
2. Faarax ma intuu isku miisaamay ayuu go'aanka gaadhay mise maaha sidaa? Caddeeya arrinta iyo sababaha.

Qof kastaa arin fulintiisa marka uu go'aansado "yool buu leeyahay" ayaa la yidhaahdaa. Go'aankaas si aan maag-maag (laba-labayn) lahayn markuu u dhammaystirana waxay noqonaysaa caddaynta go'aan ku adkaysashada. Go'aan qaadashada iyo ku adkaysigeeda waxaa loo eegaa:

- Ka fikirida arinta marka ugu horaysa;
- Qaadashadeedana waxaa laga sugayaa qofka, qoyska, iyo aqoonsashada amniga iyo faaiidada wadanka;
- In go'aan xor ah la qaato, oo six or ah loogu dhaqmo fikirka iyo aragtida la aaminsanyahay waxay ka mid yihiin waxyaabaha aasaasiga ah.

Qof waliba wuxuu mudan yahay inuu qaato oo uu dhaqangeliyo go'aan kasta oo uu qaato. Tusaale ahaan, sidaad ka fahanteen cashirkii ku saabsanaa Faarax iyo saaxiibadii, Faarax inaanu noqon mid ku tiirsan kuwo kale go'aan ayuu ka qaatay. Arrintan awgeedna waxbarashadiisii intuu sidii la rabay ugu dadaalay ayuu natiijo fiican keenay.

## Layliska 6aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda:

1. Hadii uu arday ku fikiro inuu jaro waxbarashadiisa/deeda, fikirkan go'aan ka qaadashadiisa, maxaad ku talin lahaydeen in loo baahan yahay?
2. Si aad hormood u noqotiin waxyaabaha la idiinka baahan yahay inaad samaysiin qoraal caddaynaya diyaariya oo u akhriya ardayda fasalka.

## 8.4 Waxyaabaha caddaynaya fikirka khaldan ee aan iska-qabno

### 8.4.1 Dareenka Isla-waynida

- Dareenka isla-waynidu waxay tahay waxa aad ka taqaaniin caddeeya.

#### Qodax

Maalintu Sabti maadaamo ay tahay, Haybe iyo Caasha dugsiga ma aadayaan. Hooyadood Maryana iyo aabahood Xirsina waa maalintay u tegayeen ururka baaha-wadaagta (jamaca). Aabaha iyo hooyadu waxay ku amreen caruurtooda inay guriga si wadajir ah u sii xaaqaan (nadiifiyaan) oo ay sariirahana sii goglaan si ay shaqada u bartaan oo ay u noqdaan kuwo isku-filan mustaqbalka, kadibna waxay tageen xagii jamaca.

Markii ay waalidkoodu ka soo laabteen xagii jamaca, Haybe iyo Caasha way murmayeen, gurigiina lama sii nadiifin, sariirihiina lama sii goglin. Kadib waalidkii iyagoo guriga galaya ayay yidhaahdeen: "Maxaad la murmaysiin?"

Caasha: Waxay tidhi, "Isagu guri kayga le'eg nadiifintiisa iyo goglidiisa midna ma karo." Sidaa darteed, wixii aan anigu ka shaqeeyay ee aan qurxiyay ayuu iga xumaynayaa. Anigu isaga lama shaqayn karo.

Haybe: Wuxuu yidhi isagoo is-mashquulinaya, "Anigu waan kaa fariidsanahay oo kulama shaqayn karo adiga" intay tidhi ayay i diiday.

Hooyadood ayaa iyaduna iyadoo aad isu-mashquulinaysa waxay tidhi,

“Caasha sax ma tihid”. Mar kasta waxaad ku doodaa wax kasta adiga oo keli ahi maadaamo aad taqaanid, ma ogolid qof kale oo kula shaqeeya. Fiiri maantaba waxba idinka oo aan qaban ayaad oosheen”.

Aabihiina wuxuu yidhi, “Maadaamo aad ku fikiraysid inaad wax kasta taqaanid, diyaar uma tihid inaad waxbaratid”. Shaqada aad qabanaysidna xoogga ma saaraysid. Maalintii horana intaad jebisay handaraabka guriga ayaanad ahmiyadna siin sida loo hagaajinayo oo aanad cidna waydiin. Dabeecadaadana waa inaad bedeshaa (la horumariyaa).

## Layliska 7aad

Ka jawaaba su’aalaha soo socda idinka oo ku salaynaya sheekada kor ku xusan.

1. Cadeeya qofka ka jawaab celiyay ama ku sifoobay isla-waynida ee ku jira sheekada kor ku xusan. Qofka aad is leedihiin kama jawaab celina, caddeeya sababaha uu uga jawaab celin waayay.
2. Qofka ku goodiya ama ku weerara dadka dareenka isla-waynida dhibaatooyinka la soo dersaya intaad taxdiin koox koox uga dooda.

Dareenka islawaynidu waa mid kaa fogaynaya aragtida kuwa kale adiga oo taada keliya ka kor yeelaya, mida kuwa kalana hoos marinay. Dadka qaarkood ee aaminsan inay wax barteen, dadka ay is-leeyihiin waxba ma baran way quudhsadaan. Arrintani waa qeexitaanka dareenka isla-waynida.

Dhinaca kale qofka hanta farabadan leh wuu iska sarraysiiyaa qofka ka hantida yar isagoo u arka inuu ka hooseeyo. Hadaba qofkan hanta ayaan leehay lihi wuxuu abuurayaa dareen isla-wayni.

Guud ahaan dareenka isla-waynidu waxa weeyaan badanaa sababta keenta is-fahan la’aanta, sinaan la’aanta iyo isku-dhaca dadka.

## Layliska 8aad

Ka dooda su’aalaha soo socda:

1. Dareenka isla-waynida maxaa lagu caddeeyaa ama qeexaa?
2. Waxyeelo maxay ah ayuu dareenka isla-waynidu wataa?

### 8.4.2 Dareenka isla-hoosaynta/isquudhsashada/

- Taxa waxyaabaha ku kalifa ardayda inay la yimaadaan dareen isla-hoosayneed ama is-quudhsasho dugsiga dhexdiisa

#### Fardawsa

Fardawsa waa ardayad dhigata fasalka shanaad. Ciyaarta ilaa xad ayay jeceshahay. Sidaa darteed, inta badan dugsiga way ka hadhaa iyadoo dhuumanaysa. Shaqada guri ee ay macalimiintu siiyaana badanaa kama shaqayso. Maadaamo natiijadeeda imtixaankuna badanaa ay tahay mid ka hoosaysa kuwa saaxiibadeed waxay dareentaa isla-hoosayn/ is-quudhsasho. Waxay tidhaahdaa, “Anigu ma fahmayo waxbarashada, ardayada damiin ah baan ahay”. Arintan awgeed, iskuma kalsoona iyadu”. Baruhu marka uu su’aal fasalka u soo dhigo, waan khaldami intay tidhaahdo ayayna xataa sheegin jawaabta ay garanayso.

## Layliska 9aad

Ka jawaaba su’aalaha soo socda idinka oo ku salaynaya sheekada kor ku xusan.

1. “Anigu ma fahmayo waxbarashada, ardayada damiin aan ah”. “Waa maxay dareenka ay caddaynta u tahay?”
2. Caddeeya waxa idinku waajibka ah inaad samaysiin hadii ay jiraan dareemo nooca Fardawsa oo kale ah ku saabsan dareenka isla-hoosaynta ah ama is-quudsashada.

Dareenka is-quudhsashadu wuxuu ku yimaadaa marka qof naftiisa uu hoos u dhigo. Qof marka uu is-quudhsado ama nafiisa hoos u dhigo, waxa uu yaqaanaa wuxuu ula muuqanayaa wax aanu aqoonin. Dareenka hoos-isu-dhigidu waa dareen xanibaad ama caqabad ku ah dhaqangelinta dareenka isku-kalsoonida.

Isku-kalsooniyi hadii aanay jirina, waxaa inagu dhacaya waxabarasho si midho-dhal ah aan u dhigano iska daaye xataa si haboon inaynaan u shaqayn. Tusaale ahaan, Fardawsa xoog-saarid ama ahmiyad-siin la'aanta waxaa ugu wacnaa isku-kalsooni la'aanteeda iyo dareenkeeda is-quudhsasho.

### Layliska 10aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Maxaa lagu caddeeyaa dareenka is-quudhsashada/isla-hoosaynta/?
2. Maxaa lagu caddayn karaa isku-kalsoonida?

## 8.5 Faaiidada u diyaargarawga wax kabarashada kuwa kale si aad Awoodaada u garatid

- Waa maxay wax kala korodhsigu? (wax kala barashadu)

Si aan hawl u fulino, waxyaabaha la inooga baahan yahay mid ka mid ah waa kartida. Karti ayaan leenahay intaan nidhaahno inaan ku fikirno iyadoon ahayn, waxaa inagu waajib ah inaan karti lahaano. Kartida fursado kala duwan ayaa lagu horumariyaa.

Inagana waxaa inagu waajib ah inaan si isku kalsooni leh u garano inaan aqoon leenahay. Aqoonta aan leenahay siyaabaha aan ku sii kobcin karno jid ka mid ahina waa wax kabarashada kuwa kale.

### Layliska 11aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda:

1. Maxaa waajib inagu ah inaan samayno si aan u garano awoodeena inoo gaarka ah?
2. Caddee waxyaabaha u suurtagelinaya in laba kooxood, kooxi wax uga barato kooxda kale. Caddee kooxda labaadna waxyaabaha ay qoyska ka bartaan.

### 8.5.1 U shaqaynta Koriinka iyo Horumarka Dalka

- Waa maxay koriinka iyo horumarka dalku?

Qof ma awoodo inuu yeesho nooc kasta oo aqoon ah. Sidaa darteed, kelidii intuu si gooni ah u shaqaysto natiijo wax-ku-ool ah lama iman karno. Si loo keeno natiijo waxtar leh mar walba ma jiro qodobkii lahaa wadajir u shaqanta. Tusaale ahaan, hal guri hadii la dhisayo, waxaa loo baahan yahay xirfadlayaal kala gedisan sida: Muhandis, wastaad, rejiile, nijaar, korantoole, kuuli, xammaal, iwm….

Xirfadlayaashani markay is-kaashadaan ee midba midka kale shaqdiisa uu ixtiraamo weeyaan keliya marka guri wanaagsan la dhisi karo. Sidoo kale qofka xanuunsanaya ee aan dhakhtar u geynaa wuxuu u baahan yahay: dhakhtar, farsamo-yaqaan sheybaadh, kalkaaliye/so, shaqaalaha nadaafadda, iwm.. Keliya waxaa shaqo midho-dhal ah la qaban karaa waa marka kuwan oo dhammi ay is-kaashadaan oo ay is caawiyaan.

Sidaa darteed, horumarka guud wuxuu ku xidhan yahay wada-shaqaynta guud. Dalkeenana waxyaabaha aan ku kobcinaynayno ama ku horumarin karnaa waa marka dhammaan shaqooyinka horumarineed la iska kaashado ee keliya aan ku shaqayno. "mar waa dadaal marna waa daawada."


### Layliska 12aad

Ka dooda su'aasha hoos ku taal

Ka dooda su'aalaha aad diyaarsateen ee la xidhiidha waxbarashada iyo shaqada wadajirka ah iyo maaraynta shaqada macalimiinta ee urur shaqo oo laga helo nawaaxiga.

### 8.5.2 Hawlaha Dhaawacaya Horumarka iyo Midnimada Dalka

- Waa maxay ganacsiga kootarabaanku (alaabta sharci-darrada ah)? Magacaw waxaad ka taqaanid alaabada koontara-baanka ah.



Jaantuska 8.4 Kootarabaanku waa hawl dhaawcaysa dalka

#### Daawadii

Marwo Nadiifo intay "Uu Uu.." tidhi" ayay qayliday. Derikeedii markii ay iyagoo ordaya u soo galeen, inanteedii yarayd ee Faadumo ayay arkeen oo sariirta dusheesha iyadoo jiifta sheekaynaysa.

Nin waayeel ah ayaa yidhi, "Alla! Dhakhso gaadhi u keena" naxdin iyagoo isku dhex-daatay ayay islamarkiiba gaadhi u yeedheen oo yartii xagga cusbitaalka loo qaaday.

Marwo Nadiifo iydoo ooyaysa ayay daawadii ay gacanta ku haysay u dhiibtay dhakhtarkii. Dhakhtarkiina intuu daawadii arkay oo uu rogrogay ayuu si naxdin leh u yidhi, "Daawadani waa mid wakhtigeedii dhacay oo xumaatay. Xageed ka soo iibsateen?"

Marwo Nadiifo ayaa tidhi, "Alla! Anigu farmasiigaan ka soo iibsaday". Iyadoo ooyaysay maadaamo ay yarteedii ku sugnayd xaalad khatar ah. Dhakhtarkiina islamarkiiba Faadumo wuxuu u diray daawayn sare, kadibna booliska ayuu u yeedhay oo uu ogaysiiyay/wargeliyay arinta.

Booliskiina baadhitaan ayuu ku ogaaday in daawada si sharci darro ah (kootarabaan) loo soo geliyay waddanka. Daawada dadkii sharci darrada ku soo geliyay, farmasiigii iyo shaqaalihiisii dhammaantood inta maxkamad la soo joojiyay ayaa ciqaab xabsi ah lagu qaaday ama fuliyay.

#### Layliska 13aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda idinka oo ku salaynaya cashirka kor ku xusan.

1. Maxaad ka fahanteen cashirka kootarabaanka ku saabsan ee la soo gudbiyay? Doorta qodob doodeed qoran oo ka dooda.
2. Waa maxay dhibaatada daawada ay Faadumo qaadatay?

"Koontarabaan" waa eray ka samaysan laba eray oo Af-Talyaani ah. "Koontra" oo macneheedu yahay "Ka hor imaatin/ka soo horjeed" halka "Band" uu macneheedu ka yahay "Baaq" wuxuu soo koobayaa sharciga iyo macluumaadkiisa. Iyadoo arintan lagu salaynayo, ganacsiga kootarabaanka ahi waa ganacsi ka hor imanya xeerka, sharciga iyo macluumaadka kaas oo lagu soo gudbiyo si lidi ku ah. Waxaa kale oo eraygan lagu turjumay buugga, qaamuuska korantada ku shaqeeya ee Oxford.

#### Waxqabadka

1. Waa alaabada waddanka gudihiisa soo galaysa iyadoo aan u soo marin sharciga sidii loo baahnaa taas oo intay soohdinta ama xuduuda soo jebiso sidaa ku soo gasha;
2. Waa alaabta dibadda sida sharci darrada ah loogu dhoofiyo dibada iyadoo aan la waafajin nidaamka sharciga, kuwaas oo intay xadka/soohdinta jebiyaan sidaa dibada ugu baxa.

Xaaladan sharci-darrada ah alaabta dalka kaga baxaysa iyo mida ku soo galaysaa waxay waxyeelo wayn gaadhsiinaysaa noloshii bulshada, dhaqaalaha iyo sidoo kale noloshii muwaadiniinta.

Koontarabaanka iyo wixii la xidhiidha, derejadooda haboon ilaalintooda qofkii u qaabilsanaa maadaamo uu dalka soo gelinayo daawooyin cuntooyin sumaysan caafimaadkii muwaadiniinta ayay waxyeelo ku soo gaadhaysaa. Dhibaatadii Faadumo ka soo gaadhay ayaa tusaale fiican inoogu filan.

## Isku-filaanshaha

Alaabta kootarabaanku markay dibada u baxaysana, canshuurtii iyo dakhligii dawladu inay si fiican ugu hesho ahayd waa laga waayaa taasina waxay si wayn u curyaaminayaa dhaqaalihii dalka. Dhaqdhaqaaqa kootarabaanku marba marka ka danbaysay siduu isu soo tarayay ayuu imika gaadhay derejo aad u sarraysa.

Guud ahaan kootarabaanka waxqabadkiisu wuxuu gaadhay:

- Inuu si argagixiso ugu adeego ilaha lacagta;
- Inuu dakhligii dawlada ina seejiyo;
- Bagaash (alaabo yar yar) oo ay tayadeedu liidato iyo hubka dagaalka oo aan fasax lahayn in la soo geliyo, sidaana nabadgelyada, dhaqaalaha, iyo nolosha muwaadiniinta ee dalka ay wax u dhimayaan taas oo denbi wayn ah.

### Layliska 14aad

Ka dooda su'aalaha soo socda:

1. Waa maxay kootarabaanku?
2. Waa maxay waxyeelada uu kootarabaanku keenayaa?

### Gaba-Gabada Cutubka 8aad

Isku-filaanshuhu mar walba wuxuu u baahan yahay in aqoonta lagu dhaqmo. Si aqoonta loo horumariyana waa in loo fiirsado waxay dadka waawayni guriga dhexdiisa ku samaynayaan, in xubnaha qoyska lala tashado, wixii loo fiirsadayna inta la awoodo iyo sida xaaladu tahay waa in loo isticmaalo. Dugsiga gudihiisana, waa in la garto anshaxa dugsiga, barayaashu markay cashirka dhigayaan waa in si niyad ah loo dhegaysto, loo akhristo, su'aalaha looga shaqeeyo, saaxiibada fasalka gudihiisa iyo dibadiisa lala tashado oo fikirada haboon laga qaataa aad bay lagama maarmaan u tahay.

Waxyaabahani waxay inoogu filan yihiin sidaan isugu-filaan lahayn. Dadka waxyaabahan awood u helaa ma noqonayaan ku gumaysta dadka kale. Waxay aaminsan yihiin inay go'aasadaan ayay awoodeen.

Dhinaca kale kootarabaanku inuu dakhliga dalka curyaamiyo oo uu yahay shaqo ku duufsanaysa oo dalkana dhaawacaysa. Intaa waxaa dheer in daawooyin iyo cuntooyin aan lahubin ay si qarsoodi ah dalka u soo galaan kuwaas oo caafimaadkii bulshada wax u dhimaya. Qof kastaaba hadii uu isku-filaanshihiisa horumayo, oo uu hawlaha sharci darrada ah la dagaalamo/ celiyo, dalku wuu horumaryaa.

### Erayada Furaha ah ee Cutubka 8aad

| | |
|---|---|
| Kaakicin: | ku qalqaalin, ku boorin. |
| Quudhsi: | yasitaan, hoos u dhigid, yaraysasho. |
| Xoogsaarid: | ahmiyad sii, u fiirsasho. |

## Layliska guud ee cutubka 8aad

**Su'aalaha is-tijaabinta ah ee soo socda intaad buugaagtiina ku qortiin ka shaqeeya.**

### I. Hadii ay weedhaha soo socdaa run yihiin ku qora "Run" hadii ay been yihiina "Been" kaga jawaaba

1. In si taxadir leh loo ogaado awoodu waxay faaiido u leedahay isku-kalsoonaanta.
2. Waxaa faaiido leh inaan wakhtiga wada xaajoodka fikirka qofka kale la siinin mudnaanta ee rabitaanka uun loo dagaalamo.
3. Hadii aan haysano qof ina caawiya, inaan isku-filnaano oo aan shaqaynaa faaido inooma leh.
4. Waxaanaan aqoon inaan qof kale waydiinaa waxay ka mid tahay dareenka isla-hoosaynta ama hoos-isu-dhigida.
5. In iyadoo wax la badhaayo la is-fahmo oo la wada shaqeeyaa dadka iyo dalkaba faaiiday u leedahay.

### II. Lambarada 1-6 "shaqooyinka lagu fuliyay" cinwaanka leh hoostiisa hawlaha lagu taxay "ku-tiirsanaan" ama "isku-filaansho" inay noqonayaan intaad u fiirsato meesha banaan ee lagu siiyay calaamada (✓) dhig oo isku aadi

| T.L | Shaqooyinka la fuliyay | Ku-tiirsanaan | Isku-filaansho |
|---|---|---|---|
| 1 | Waxaan garan waayay halkaan dhigay buugaagtaydii, kadib walaalkay ayaa ii helay. | | |
| 2 | Aniga ayaa dharkayga xidhay. | | |
| 3 | Weelkii aan wax ku cunay miiskaan kaga dul tegay si ay walaashay u ururiso. | | |
| 4 | Si aanan dugsiga uga daahin, aroor horaan toosay. | | |
| 5 | Ganacsiga koontarabaanka. | | |
| 6 | Meeshaan seexanayay ayaan gogladay. | | |
| 7 | Making bed | | |

### III. Su'aalaha soo socda mida saxda ah ka dooro

1. Qofka isku-filaaday:
   - B. Waa inuu naftiisa uun u fikiro.
   - J. Waa inuu ka khajilo dareenka hoosaynta.
   - T. Dadka kale waa inuu iska saraysiiyo.
   - X. Gabaw wuu ka madax banaan yahay.
2. Kuwa soo socda keebaa ah hawlgalka arday isku kalsoon?
   - B. Gacanta ayuu bixiyaa si uu su'aasha uga jawaabo.
   - T. Ardayda kale ayuu la tashadaa.
   - J. Fikirka ay la noqoto ayuu caddeeyaa.
   - X. Dhammaan waa sax.

3. In go'aanka lagu adkaystaa waxay faaido u leedahay:
   B. Fikradayda keliya ayaa sax ah in la isla soo taago.
   T. In arrin wax laga akhriyo, laga tashado, aqoonsigeeda inta la dhaqangeliyo in la go'aamiyo oo la dhammaystiro.
   J. In fikirka dadka kale inta la raaco iyadoo la garan la iska go'aamiyo oo la dhameeyo.
   X. Dhammaan waa sax.
4. Horumar guud waxaa lagu keeni karaa:
   B. Keli inta la shaqeeyo in la qadariyo.
   T. Si guud inta loo shaqeeyo in si guud looga faaiidaysto.
   J. Waxbarasho iyo aqoon korodhsi.
   X. B waxaan ka ahayn dhammaan waa sax.
5. Ganacsiga koontarabaanku waa:
   B. Alaabta oo si sharci-darro ah waddanka loo soo geliyo.
   T. Alaabta oo si sharci darro ah waddanka looga saaro.
   J. Dalka iyo dadka hawl waxyeelaysa weeyaan.
   X. Dhammaan waa wada jawaab.

## IV. Ku buuxiya meelaha banaan ee soo socda erayga ama odhaahda saxda ah

1. Shaqada guri ee ay macalimiintu siiyaan iyadoo aanu ka shaqayn inuu dad kale ka rogtaa ardagu waa . ................................ .
2. Wakhtiga imtixaanka iyadoo ardaydu ka qishin saaxiibadood hadii ay shaqeeyaan waa ................................, ................................ . Intuu miisaamo arimo ayuu fikirka fiican qaataa oo uu si aan maag-maagid lahayn u dhammaystiraa.

## V. Si gaaban uga jawaaba su'aalaha soo socda

1. Waa maxay isku-filaanshuhu?
2. Muxuu u baahan yahay go'aan ku adkaysigu?
3. Magacaaba waxyaabaha muujinaya dareenka isla-waynida iyo dareenka is-quudhsashada/hoos isu-dhigida.

CUTUBKA 9

# Kaydsashada

Ujeedooyinka Cutubka

Markaad dhammeystirtid barashada casharada cutubkan waxaad:

- Fahmi doontaa macnaha kaydsiga.
- Fahmi doontaa kobciinta dhaqaanka keydsigu faaiidada uu leeyahay isku-filnaashaha.
- Aqoonsan doontaa sababta logu baahanyahay in la kordhiyo oo la xoojiyo dhaqaanka keydsiga ee deegankiina laga isticmaalo.

## 9.1 Kaydsi

### 9.1.1 Macnaha kaydisga

- Maxaa loogu baahanyahay kaydsiga?



Jaantuska 9.1 Aqoon la'aanta Keydsiga/ israafka biyaha



Jaantuska 9.2 isticmala'anta haboneen qalbka waxbarashada ee fasalka dhexdeda waxay kaso horjeeda dhaqanka keydsiga

- Maxaad u malaynaysiin in ay tahay ujeedada ugu muhiimsan ee kaydsiga?
- Maxay yihiin fariimaha sawiradan: Ay xanbarsanyihiin ama ay talmmamayaan?

Kaydsi waxaa lagu macneen karaa lacagta aad heleysiid ama dakhliga ku soo gala marka aad ka reebtid kharaashka biilka ee qoyska iyo kharashka ku baxaya waxyaabaha kale ee lagama maar-maanka u ah noolasha wixii dheeri ah ee soo hadha in aad kaydsatid si mustaqbalka dhibaatooyinka kula soo gudboonaada ama arrima kale oo muhiim ah ugu bixisid.

Macanaha kaydsashadu waa dakhliga maalinti/ bishii in soo galaya ama aan helayno markaan ka isticmaalno kharashka kubaxaya waxayabaha aas asiga ee muhimka ah ee aan u baahanahay mooyee kharashka kale ee baaqiiga ah in aan mustaqabalka u dhigano weeyaan. Keydsigu wuxu nagacaawineya in ka taxdarno kharaska ku baxayaa waxyaabaha aan muhiimad weyn ino laheyn

Kaydsashadu ma aha adoo ka gaajoonaya in aad wax dhigatid ee waxa weeyaan dhakilaga aad heeshey kharashaka aad ku bixiineysiid waxad u baahantahay ee muhiimka ah markaad ka isticmaashid kadib wax kale ku hadhaya in aad dhiigtid ama meel dhigato si aad markaad uu baahato u isticmaashid ayaa loola Jeedaa.

Sido kale wax keydsigu waxay noqoon karta waxyaabah ama qalbayada aan isticmaaleyno si aysan u xuumaan in aan si haboon aan uu adeegsaneyno islamarkaana daryeel fiican u yeelano si ay mudo badan aan uu isticmaali karno ooy adeeg ino siiyaan i.

Tusaale: Buugaata aan wax ka barano in aan si wanaagsan u xafidno si aysan noga Jex Jeexmin, in aan ilaalino nadaafada fasalka iyo daryeelka qalabyada fasalka sida kuraasta aan wax ku barano in aysan ja jabinin ama dhiibato aysan uu soo gadhin sidoo kale Qasabada Biyaha ee Dugsiga iyo xaafadaba in aanaan iyadoo furan kagaga tagin ama laydhka oo maalntii la iska damiiniin/leyska shiido

Cadaddka kaydsashadu waxay ku xidhantahay Awooda Qofkaa ama Dakhliga soo galaya Tusaale: Qofka baalashluhu waxa uu baalashka ka shaqaysto marka uu ka isticmaalo kharashka uu u baahanyahay todobaadkiiba wuxuu dhigan karaa/ keydsan karaa tobon birr. Sido kale dirawalku waxa laga yaaba in todobaadkiiba 100 biir uu kaydsado. Markas cadaddka kaydsashadu waxay ku xidhentahay amaba ay la xidhiidha Dakhliga Qofku u heleyo

## Layliska 1aad

Su'aalan soo socda ka jawaaba:

1. Waa maxay kaydsigu? wax keydsashadu maxay kadhiigantahay?
2. Lacagta la kaydsanayo waxyaaba loo isticmaalo waxaad soo weydiisaan walidadiino ama Jaarkiina kadibna Jawaabta Ardeyda saaxiibada fasalku u sharaxa
3. Idinkoo soo qaadanaya Qof Ardaya iyo Qof Beeraley ah. labadaa Qofi side ayeey kaydsade u nooqon kari lahaayeen kawada hadla ama falanqeeya dooda.

## 9.1.2 Ujeedoyinka kaydsiga

### 9.1.2.1 in dadkale dulsaar lagu noqonin

- Wali mad maqasheen Dulsaar iyadoo la leeyahay?
- Maxay idinlatahay ama aad u maleyneysaan?

Si Hadaba aad u fahantaan Ujeedada ugu muhiimsan ee kaydsigu in ay tahay cid kale in aan dulsaar lagu noqonin waxaad akhridaan sheekadan soo socta

### Mudane warsame iyo marwo Waris

Mudane warsame wuxuu ku dhashay magaalada Jijiga Degaanka Soomalida ee dalka itoobiya. Warsame ciyaalnimadiisii nabar ka soo gaadhey Dhabarka awgeed ayuu ku cagabeeley sidaasi ayuu ku noqdey qof curyaan ah.

Hasayeeshe Waalidkii waxay ku guleyteen in ay dugsiga kudaraan si uu waxbarashadiisa u dhiigan lahaa. Warsame sidaasi ayuu wax ku bartey, hadaba da'adiisu tobon jir markay gaadhey kadib Warsame wuxuu bilaabay in uu ka shaqayo a shaqada baalashalaha xiliga uu fasaxo yahay sii u caawiyo walidadiisan danyarta ah (saboolka ah) wuxuu sidaa ahaado muudo yer kadib wuxuu yeeshey tukaan yar oo cooshad ah sidaasi ayuu baayac mushtarka ganacsiga kotarbanka ku bilaabey. Markey da'adiisu ahayd Labaatan sano waxay isguurasadeen Waris islamarkaana waxay u dhashay labo ciyaal ah. Hadaba maalin maalmaha ka mid ah Warsame Alaabta kontorobaanka ee u ka ganacsan jiirey aya si lamafilan ah looga Qabtey taasiina way khasaaro culus ku keentey noolasha qoyskiisa a ayaa ku dhacay isaga iyo reerkiisiba xaaskiisa marwo Wariis ayaa dib iskaga iibisay fargashi dahaba oo ay lahayd si ay ugu shaqeystaa shaqo kale kadibna waxay bilaabeen in ay iibiyaan muus Warsame wuxuu iibin jiray muuska isaga oo maalin walba waxa uu iiibin jiray saxaarad dhan oo muus ah hada nolosha ay ku noolyiin way fiicantahay ciyaalkoodana dugsiga ayeey Dhigtaan, Guri; wanaagsana Qoysku wey kireysteen warsame faaidada uu helo. Waxay kharash ka isticmalaan mooyee waxa kale way keydsadaan hog'badna wuu ku jiraa



Jaantuska 9.3 Qoyska Waris iyo Warsame

## Layliska 2aad

Adoo tix racaya sheekada kor ku Qoran ka jawaab su'aalan soo socda.

1. Taariikh nololeedka lamaanahas mudane Warsame iyo marwadiisa Waris maxaad ka koradhsan kartiin?
2. deegaankiina dad shoqo yar ku bilaabey kadibna ka taajiray hadey jiraan soo qora tariikhdooda oo saaxiibada fasalka u akhriya ama uga sheekeeya
3. Taariikh nololeedka aad deegaankiina ka soo qartey marka ad ardeyda fasalka uga sheekaysen Afkaarta ay ka qabaan ka qora. Kadibna is bar bardhiga sheekooyinka ay kooxa kale fasalka uu soo bandhigeen garhaan meelaha aad ku kaladuwantihiin soo qora oo keena

Wax Keydsigu wuxuu nagacaawiinaya Si ayeynaa u dhiciin in aan iskufilnaan weyno oon dad kale dulsaar ku nooqan. Hadi aan kafiikiri weyno in aan wax keydsano islamarkaana kolba sida awoodeenu noo saamaxayso aan uu noolaneen waxaan nooqoneeyna dad iskufilneen oo dad kale dulsaar ku ah. Hadaba waxa noogala bahaanyahay in aan wax keydisano xata haddi aan ku noolnahay noolal hoose inta awoodeenu noo fasaxeeyso waa in aan caddeysano dhaqanka keydsiga

### 9.1.2.2 Ka hortaga dhibaatooyinka mustaqabalka iman/dhici kara



Jaantuska 9.4 Cuunugeyga maxaan ku daweeya?
Dhibaatooyinka Keydsi la'aanta



Jaantuska 9.5 Lacagtaan keydsaney maxaan ku qabsanaa

- Qeexa sawiradan sare ku yaalo waxaad ka fahanteen?

Hadhaw intaadan dhibatoon ka hore ka digtoonow

Intaad hadhaw dhibaatoon lahayd hada wax dhigo (keydso) mudane **Axmed** iyo morwo **Deeqa** labo macalin oo wado jira ayey ahaayeen inta aaney hawl-gabka noqonin ka hor labada caruurtooda ugu waaweyni waxay dhiganayeen jaamicada waxana la kala odhan jiray **Khadar Axmad** iyo **Saynab Axmed** hadba labadan walaalo Ayaa ka murugoodey Arintan howl-gabka waxayna kawada tashadeen sidii ay wax u heli lahaayeen madoomo mushaarkii waalidadoodu helijireen uu yaraan doono. Labadii waalid ayaa ogaadey in ay caruurtu mustaqbalkoodo ka sii murugoonayaan balse labada waalid waxay ku heshiiyeen in ay u soo bandhigaan ciyaalkooda wixii arin ah ee ay u hayaan islamarkaana qoyskii oo u dhan in ay wada tashadaan ayey goa'ansadeen. Sida darted labadii waalid markii wada tashiigi qoysku u bilaabmey kadib waxay caruurtooda halka ugu soo bandhigen laba bug oo ah kuwa lacagaha kaydsiga baanka ay ku keydsan jireen labada waalid si ay mustaqbalka ugaga baxaan dhibka ama kharash la'aanta hadabba labadii waalid waxay u sheegeen caruurtooda in ay u keydinayeen lacagtaas islamarkaana kharashka caruutooda ku filaananeyso inta ay jaamicada kadhameynayaan hadaba waxay Khadar iyo Saynab ku ogaadeen in waalidkood wax u keydiyey si ay wax ugu bartaan caruurtooduna ku meel mari lahayd kama dambeystiina Saynab iyo Khaddar waxay waalidkood ugu mahadnaqayeen madax ka dhunkasho ay ugu balan qaadeen iyaguna in ay ciyaalkooda wax usi keydindoonaan mustaqbalka

## Layliska 3aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Maxaad u maleyneysiin khadar iyo saynab hadda wixii ka dambeeya in ay ku dhaqmayaan (maxay in ay sameyn doonaan)?
2. Labada waalid wixii hado no bacdi (dambeeya) mo in ay wax keydsadaanboo mise maahin? Ball si koox koox ah uga wada dooda

Ardeyey casharadi hore waxaad ka fahanten keydisgu in u yahay sheyga mustaqbalka loo dhigto. Tusale, lacagata ama hantida keydka ahi waxay nagacaawinaysa mustaqabalka si lama filaana hadi ay dhibaatooyinka nalasodarsi kara in aan si dhib yar uga baxno oo laga si barandago. Marxaladaha lamafilaanka ee mutaqbalka waxa kamida ah dhacdooyinka laxidhiidha xanuu cafimad daor  iyo shiil. Hadaba dhacdooyinkaas haddi ay qof ku dhacaan kharaashka uu qofkaasi iskudaweynay waxay ahaaneysa lacagta uu qofkaasi horey usi uruursadey

Muhimada keydsigu maaha shey loo bahanyahay marka ay dhibaato dhacdo/jirto oo kaliya balse Dadko dhani waxay leeyihiin ujeedooyin iyo qorsheyal ay rabaan in ay mustaqbalka gaadhaan, tusale ahaan in ay waxbarasho dhigtaan, tababar in la helo, caruurtaadu in waxbarasho haboon bartaan, munasiibada arooska, xaflado dabaaldaga dhalashada, aas aasida uruur/shiirkad iyo diyarinta xaflada qalin jabinta, dhamman waxyabaha aan so shegney  waxay uu bahanyihin lacag

Dadku badanaaba wax kaydsiga waxay ka aamin sanayiihiin fikarado kala duwan oo si khaldan u fahmeen. Wax kaydsigu nolosha qofkasta waa shey uu u baahanyahay sababtoo ah qofku waxa uu haysto ama hantida uu leeyahay hadii aan u tashiilanin oo aan si farsmo leh oo qorsheysan u isticmaalin waxa uu ku dhacayaa khasaare ama dhibaatooyin ayu la kulmi Kara. Maah maah soomaaliyeedna waxay tidhaahdoo

"Dadka sadex ayaa ugu xun"

- Matashada, matashiishe iyo matashe

sidaasi daraadeedna in aan barano dhaqanka wax keydsiga waa arin laga maarmaan ah oo hantida manta aad haysato in aanad manta oo kaliya aadn u isticmaalin balse laakiin aad wax u kaydsato mustaqbalka kuna xisaabtanto in aad ku noolaato kolba waxaad helikarto ama aad haysato iyo sida awoodaadu ay tahay kuna xisaabtanto mustaqbalka dhibaatooyinka ama waxyaabhaa ka hor imaankara ama kula soo darsikara in aad uaga gudubtid awgeed u keydso manta. Taso kacawineysa in aan marwalba u si diyaargarowno mustaqabalka waxkasto dhiici kara sida darted waxa muhim ah  in aan cadeeysano  dhaqaanka keydsiga

## Layliska 4aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda:

1. Dadku marka ay wax helaan in ay wax keydsadaan maxay u taraysaa ama ka faaidayaan?
2. Qoyskiina dhexdeeda sanadkiiba imisa ciidood oo munaasabad loo diyaariyo ayaa jirta? Jawaabta waalidadiina weydiiya oo ka soo ogaada
3. Su'aasha (2aad) jawaabteeda markaad soo ogaatiin kharashka ku baxa inta uu dhanyahay soo qoro oo Ardeyda fasalka u soo bandhiga.

## 9.2 In Qorshe iyo kolba sida Awoodu kuu saamaxayso in loo noolaado

### 9.2.1 Macnaha in qorshe iyo kolba sida awoodu tahay loo hoogaansanaado

*"Qofku sida qoyskiisu yahay ayu unoolaada laakiin sida guriga jaarkiisu yahay uma noolaado."*

## Kaydsashada

Qorshe waxaa la yidhaahda mustaqbalka sida bari, sahan dambe, saakuun, todobaadka dambe, bisha dambe, ama laga bilaabo maanta illaa iyo sanada dambe–iwm hawlaha ama waxyaabaha ay tahay in aynu qabano oo horray loo sii go'aansado lana sii diyaariyo weeyaan.Waxyabaha aynu rabno in aynu sammayno marka aan go'aaminayno waxyaabaha loo baahan yahay in aynu mudnaanta siino aadbay u badan yihiin.Tusaale ardeydu si ay u diyaarsadaan qorshaha ay casharada ku xafidaan (akhristaan) waxaa looga baahan yahay marka hore in ay gartaan saacadaha ay firqaaqada ama fasaxa yihiin ee ka baxsan saacadaha waxbarashada ama dugsiyada Aadayaan (laga bilaabo isniin___ Jimcaha) inta ay dhan tahay.

Ugu dambayna "habbeenkii illaa iyo imisa saac ayaan casharada akhrisan karma?" su'aasha leh in ay isu-dayaan in ay jawaab u hellaan ayaa looga baahan yahay. Sido kale sabtida iyo Axada wakhtiga hawlaha guriga ay ku qabanayaan si ay u caawiyaan waalidkooda iyo wakhtiga ay ciyaarta u qoondaynayaan inta uu dhan yahay in ay ogaadaan ayaa waajib ku ah. Ugu yaraan 8 saac ilaa iyo 9 sac in ay seexdaan ayay u baahan yihiin, ugu badnaan illaa laga gaadhayo 4 saac hanti ay noqon weydo illaa 3-da habbeenimo (9cawaysnimo) waa in ay casharadooda darsaan/akhristaan.Iyada oo halka laga dhaqaaqayo Isniinta illaa iyo Jimcaha, sabti iyo Axad iyo waliba habeen-habeen inta saacadood ee wax akhris ku jirin karaan ayay garanayaan. Iyaga oo xiliyadan ama saacadahan aynu soo sheegnay ku salaynaya in ay diyaarsaddaan qorshe ay casharadooda ku akhristaan way karaan. Wax akhriskooduna wuxuu ku soconayaa qorshahan.Qorshaha marka ay diyaarsanayaana waa in ay u diyaariyaan kolba awoodoodu sida ay saamaxdo sababta oo ah hadi ay diyaarsadaan qorshe aynu lahayn awoodi ay ku fulinayeen suurta gal ma noqonayo in ay ku socdaan. Qorshuhu waa in uuna carqalad ku noqon saacadaha shaqada ama waxbarashada.Tusaale habeenka oo dhan (illaa iyo 6-da ama 7 saac ee habbeenimo hadi wax akhris ku gaadhaan waxaa ku adkaanaysa in ay ka dib dhacaan dugsiga ama Aadiba kari waayaan.

### Layliska 5aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Dadku marka ay wax helaan in ay wax keydsadaan maxay u taraysaa ama ka faaidayaan?
2. Qoyskiina dhexdeeda sanadkiiba imisa ciidood oo munaasabad loo diyaariyo ayaa jirta? Jawaabta waalidadiina weydiiya oo ka soo ogaada
3. Su'aasha (2aad) jawaabteeda markaad soo ogaatiin kharashka ku baxa inta uu dhanyahay soo qoro oo Ardeyda fasalka u soo bandhiga.

Dadku haddi aysan u hogaansaneen heerka awoododu u fasaxeyso waxay lakulmayaan dhibaatooyin fara badan. Sida darted dhibaatooyin kaladuwane si aan ula kulmiin waxa haboon qof walba in uu ku dhaqmo qorshe oona noolaado kolba sida ay awoodiisu uu ogalaaneyso

Hasahaate marka aan leenahey caadada iyo dhaqanka keydsi waxaan awoodi karna in uu kharashka aan bixiineeyno uu nooqdo mid ku saleysan awooda iyo hantida aan leenahay tasa oo tilmaameysa in aan latartameyn noolasha dadka kale ee balse uu hoggansameyno kolba sida ay noolasha awoodeenu noo ogashahey

Marka aan heerka noolasheeno noo fasaxeyso aan uu noolaano waxay taasi noo sahleeysa in m'aanta si fican u noolaano islamrkaana barito aan dhibaato la kulmin siirta noolashu waa ku dhaqaanka qorshaha iyo u hogansanaanta kolba sida uu karaankagu ku fasaxeeyo. Sido kale kudhaqaanka qorshuhu wuxuu muhim uu yahey ama nagacaawiya gaadhiista ujeedada aan leenahay

### Layliska 6aad

Su'aalahan soo socda falanqeya ama kawada hadala

1. Faaiidad ay leedahay in aan u noolsheena ku hoggaamino inta ay awoodenu legtahay?
2. Haddi ay jiraan deegaankiina Dad noolashooda ku hogaamiyaa/kudhaqama/ qorshe isbadalka

ay noolashooda kamuujiyeen inta aad wareysataan kadib warbixiintana qooralahaan fasalka u soo bandhigaeeneen islmarkaana falanqeyan/kawada hadla/.

## 9.2.2 Macnaha in qorshe iyo kolba sida awoodu saamaxdo in loo noolaado iyo Faa'iidada ay Leedahay

Qorshe iyo kolba sida ay awoodu saamaxdo oo loo noolaado macna ahaan waxaa weeyaan sidii horay aynu u soo tilmaamnay waxaa lagama-maar-maan ah in loo qorshe iyo kolba awoodu sida ay saamaxdo in loo noolaado.In aynu nolol maal-meedkeena ku hagno qorshahan aynu soo sheegnay la dhaqan galiyo weeyaan. Qof kasta nolol-maalmeedkiisu waa in uu ku salaysnaado dakhliga soo gala kolba inta uu dhan yahay iyo kharashka baxay in uu dakhliga ka bato kadibna dayn uu galo ayuu qorshuhu kabad-baadinaya. Sidanina macnaheedu ma'aha in qof kasta qaab nololeedkiisu uu noqdo mid uu dadka kale kula tartamayo laakiin waxaa weeyaan in kolba xaalada qoysku sida ay tahay iyo awoodiisu sida ay u saamaxdo loo noolaado. Taasina waa in ay ku salaysnaato qorshe si wanaagsan loo diyaariyey.

### Layliska 7aad

Su'aalahan soo socda falanqeya ama kawada hadala

1. Ku dhaqanka qorshuhu maxay kadhigaantahy?
2. kolba sida awoodu saamaxdo in loo noolaado iyo in loo nooladu sida awoodada wax kasareya faraqa u dhaxeeya wuxu yahay? Dad waayela degaankiina ku nool inta aad wareysataan warbixiintana fasalka u soo bandhigaeeneen si aad uu falanqeysan

## 9.3 Kaydsiga Guriga dhaxdiisa Waxyaabaha ama Arrimaha Carqalad ku noqon kara

- aqoonta aad ka hesheen keydsiga idinko ku saleynaya waxaad qeexdaan ficilada ama arrimaha arqaalad ku ah keydsiga gurigiina dhaxdeeda

Waxa jiira arrimo iyo marxalado kala gadisan oo liid ku ah dhaqaankeena waxkeydsiga. Waxyaabaha kaydsiga guriga dhexdiisa carqaladeyen kara kuwa ugu waaweyen waxaa kamid ah kuwan hoos ku xusan

1. Xafladaha Guurka (Arooska) aan qorshaysnayn
2. Ducoyinka badan ee Tacsiyaha/Geerida iyo ziyaaradha
3. Ciidaha oo si xad ka bax ah loo xuso oo kharasha farabadan lagu bixiyo
4. Garasha la'anta heerka awooda dhaqaale iyo xaaladha nololeed
5. Balwadaha kala duwan (Cabitaanka khamriga, sigaarka oo la cabo, jaadka oo loo qayilo)

Guud ahan, waxyaabahas aan kor kuso sheegney waxa lagu soo koobi Kara laba qeybood. Qeybta kowaad waxa la odhan kara kuwa kusaleysan dhaqaan caadeeysi ah iyo qeybta labadna waxa la odhan kara kuwa kusaleysan shaqsiga

Marka laga hadlayo qeybta kowaad ee la xidhiidha waxyaabaha arqalada ku ah keydisiga waxa weyaan kuwa laxidhiidha dhaqankan ee soo jerenka ah ee bulshadu cadeysatey. Hasa ahate badanaa xafladahaas ama casumadhaas waxa loo sameyaa magac iyo sharaf dheer ah in dadka kale xushmad loga helo. Sida darted waxa la odhan kara waa muunasibado istusnimo aawgeed loo sameeyo hadi ay guriga dhaxdeeda ka jiraan Arimahan oo kale waxay meesha kasaaraan kaydsi waxla dhaho oo dhan

Ardayeey Waxaad inbadan argtaan tii ay waalideentiinu ama jaarkeenu wakhtiyo kala duduwan ay xaflad ama casuumad ugu yeedhaan qaraabadooda ama saaxiibadood oo la isticmaalo cunto iyo cabitaan farabadan. casuumadaas ama xafladahaas waa kuwa kasoojeeda xidhiidhna la leh dhaqamo hore oo soojireen ah hadii aan wadankeena itoobiya waxaa ka jira xaflado fara badan oo leh wakhtiyo kala duwan iyo ujeedooyin kala gaar ah. Hasa ahaate badana kuwaasi waxay u horseedaa in ay dayn/amah aan macquul ahayn lagalo.

Hadaba deegaankeena iyo dalkeenba waxyaabaha ugu badan ee khasaaraha ama hantida ugu badan

lagu isticmaalo waxaa kamid ah casuumadaha iyo xafladaha aan loo baahnayn. Waxaana dhacda oo aad aragteen isku eryid reer hebelba waxaas ayay sameeyeen ee ana waa in aan sameeyaa taasina waxa ay ka mid tahay caadooyinka xun xun ee dadkeena itoobiyaanka ha ku keenay dib udhaca sababta oo ah soomaalida waxay tidhaahdaa "Togba taagtii ayuu ragmadaa". Taas oo macnaheeda yahay in uu ku xisaabtamo waxa uu haysto iyo awoodiisu waxay tahay

Sido kale waxa jiira munasabado kala duwan oo laga xushmadaynayo qofka dhintay. Dabaldaga xad dhafka ah ee ciidaha loo sameynayo waxay u bahnaan kartaa kharasha lacageed oo dheer ah islamarkaana qoysku awood ulahayn waxa qasab ah in uu qoyska daymo badan uu galo, taasina waxya carqalad ku noqon ahaysa kaydsiga.



Jaantuska 9.6 Dhibaatada xafladaha ee xagga dhaqaalaha

Wayaabaha kale ee keeni kara cadooyinka xun xun waxaa kamid ah xusida aan loobaahnaya iyo cabitaanka ama isticmaalka waxyaabaha aan faaidada lahayn. Caadeeysiga Balwadaha kala duwan sida Cabitaanka khamriga, sigaarka oo la cabo, jaadka oo loo qayilo, turubka oo laciyaaro, khumaarka oo laciyaaro iyo adeegsiga waxyaabaha maandoriyaasha Waxay burbur iyo baaba ku keenayaan dhaqaalaha iyo caafimaadka shakhsiga islamarkaana waxay liid ku yahiin kubuca dhaqaale, waxqabadka shaqo, habsocodka noolasha iyo aragtiida shaqsiyeed waxaana suurta gal ah in aynu qorshaheena ka leexano kadibna daganaasho la'an iyo jaah wareer nagu dhaco islamarkaana bulshadana dulsar ku ahaano.

## Layliska 8aad

Kadib marka aad shaxdan hoos ku xusan buugiina ku qoortaa idinko akhrinayaa fiiciilada kuyaal shaxda dhaxdeeda waxaad u kalasaariidoontiin fiiciilku in uu yahay mid balwadeed ama ku horsedeeyaa balwad iyo in uu ficilku aan ku horsedeynin balwadaha. Sida labadda tusaale ee hore laga shaqeyeey ayaad u diyaarin inta kale

| Tiro | Ficilada | Jawaabaha |
|---|---|---|
| 1 | Cuuntada oo la cuno | Ma aha balwad |
| 2 | Turoobka oo lacuno | Balwaduu kuu horseeda |
| 3 | Mandoriyaasha oo laisticmaalo | |
| 4 | Khamriiga oo la cabo | |
| 5 | Sigaarka/Shiishakaga oo lacabo | |
| 6 | Khumaarka oo la ciyaaro | |
| 7 | Ciyaaraha isboortiga oo laciyaaro | |
| 8 | Buugaga ardeyda oo laga hoos qaato/ lagaxado | |

*Shaxda qodabada ku muujisan idinko kadulaya Jawaabaha aad kabixiseen marka aad kor Waxaad falanqeysaan ama fasalka dhexdeeda kaga wadahadashaan sababta aad sidaas uga jawaabteen*

## Gaba-Gabada Cutubka 9aad

Kaydista waxaa loo macnayn karaa lacagta kaaga soo hadha nololmaal meedkaaga oo aan la khasaariin oo la dhigo ama wax kale lagu badesho si faa'ido looga dhaliyo mana aha kaliya wax la kaydayo lacagta ee sidoo kala hantida kala duwan sida raashinka laydhka, biyaha I.W.M. oo la isticmaalo inta kaliah ee looga baahan in la barto ama dhaqan laga dhigto qaab isticmaalka haboon ee lacagta iyo hantida kaleba waayo waxay kaacaawisaa dhibaatada lagu inan karta mustaqbalka ama wakhtigaas ka dib sidoo kala waxay kun fududaynaysaa in uu ku hirgalo ujeedooyin ka Garasha la'aanta wax kaydsashadu waxay nolasha ku akuurta dhibaa tooyin qara badan dadku aynan filanayn. Wax kaydsi la'aan tu way ka du wan tahay dhibaa tooyinka kale. Sababta oo ah hadii aad kaydsan waydo waxyaalaha ku soo toodsaara ma fudaamin kartid. Waxaa laga yaaba inaad sidaa sabol kunogitid ood ka qoomamaysid kayds sha la'aan taadi. Sidaas dartad waxaa loo baahan yahay in Ardayda loo abuuro goobo muuaasab ah oo wax loogu kay diyo ay ku kaydsadaan sidaas ku barbaaraan oo ay ku baraaruga aadan dhaqaanka kaydsiga.

## Ereyada muhimk ee cutubka 9aad

| | |
|---|---|
| Cadeeysi: | waa ficilka uu qofku si joogta ah mararbadan uu sameeyo |
| Balwad: | waa adeegsiga maandooriyaasha waxyeelaya cafiimadka iyo aragtiida qofka ama Cadeeysiga fiicilka xuun ee khalkhaliya geedisocodka noolasha iyo dhaqaanka waxqabadka shaqo |
| Hagbad: | waa lacagaha dadku sidey malinba wax yer u wada bixinayayaan markey muddo gaadhana Qof iyaka kamid ah lacagtii uuruutey la siinayo |
| Hantii lama huraan: | mutaqablka maal/hanti lagu noolaan karo |
| Dulsarnimo/ ku-dulnoolasho: | isago qofku shaqeysan kara ayu raba in uu cuno cid kale waxey so xoogsatey ama cuna dada kale waxay soo shaqeysteen |
| Aroos Guushiisa: | aroos si baladhan loo soo agaasimey, kharash badana ku baxay dad badana ka soo qeyb galeen |

## Layliska Nakhtiinaka Guud Ee Cutubka 9aad

**Su'aalaha nakhtiinka ee cutubka ah ee soo socda intaad buugaagtiina ku qortiin ka shaqeeya/ kajawaaba.**

I. Hadii ay weedhaha soo socdaa run yihiin ku qora "Run" hadii ay been yihiina "Been" kaga jawaaba.

1. Lacagta waxa keydsan kara dadka taajirinta ama dadka lacagta leh keliya
2. Keydsigu waxa weyaan waxyaabaha aan uu bahaanahay noolalmaalmeedkana inta aan wax kajarno inaan uu keydiino musataqbalka siaan ugu isticmaalno

3. Dhaqanka keydsigu waxaa lagu tilmaami kara hal bil lacagta aan heelno in wax kajarno oon mutaqabalka aan uu dhiigano islamarkaana intakale hadsan bisha aan iskufiilneysino
4. Keydsiga waxaan kafiikirikarnaa marka ay waxnoogasohadhaan kadib maka aan buuxino bahiida noolalmaalmeed okeliya
5. Qoysku kharaashka ay hayestaan inta ay iskufiilneysiiyaan inta kalena ay uu keydiinayaan madamo ay mutaqabalka noolasha caruurtooda uga fikirayaan weyan

## II. Isku aadi qodoobada ku taxan qeybta "T" iyo kuwa kuqeexan qeybta "B"

| B | T |
|---|---|
| 1. Sabaolnimo | B. Mabda muhimka ee keydsiga |
| 2. Sida awoodu tahay loo Noolaadaan | T. casuumada xad dhaf ah oo la sameeyo |
| 3. Dhaqaanka u horsed israafka kharashka | J. karitan la'an dhameestirka baahida aas asiga |
| 4. Qorshe | X. ficilka joogtad ee dhiibatada leh |
| 5. Balwaadaha | KH. Kala saariida waxyaabaha mudnaanta leh iyo kuwa aan door muhim aan laheyn |

## III. Su'aalah soosocoda Ka dooro jawaabta saxda ah

1. Sida awoodadu tahay in loo Noolaado maxay kadhigantahay ........................
   - B. goaaminta bahida/rabiitanka qofku in ay kusaleysanaanto dakhliga uu helo
   - T. deyn qaadasho si aad rabitaankaga u buuxiisid madamo ogtihid mustaqbalka heleysid
   - J. in aad ka cabsan berito waxa dhici kara ama ka walwaliin fiikiirka bari
   - X. Dhamman
2. Midkeeba liid ku ah oo kasohorjeeda dhaqanka keydsiga?
   - B. waxaad heeshiid odhan in aad dadka kale uqeybsid
   - T. aado isleh dadkan ka heli in aad waxaga siisid/
   - J. intaad wax deynsato in aad xaflada Weyen/casuumad baladhan lasameyo
   - X. Dhamman
3. Balawadle in lanooqdo waxay kadhigantahay:
   - B. in aad ku dhagtiid/ku adkeysatiid hal shqo/xirfad
   - T. uu hogaansanaanta balwaadaha maandooriyaasha
   - J. kubciinta iyo xoojinta waxqabadka wanaagsan ee la caadeystay
   - X. Midnaba
4. Dulsaarnimo maxay kadhiigantahay
   - B. wax wada cuunka iyo cabiida ee wadajirka ah
   - T. is kaalmida gaar garka/is caawinta wanagsan
   - J. qaadashada afkaarta iyo waanada/tashiiga dadka kale
   - X. adigo awoodada isticmaalin in aad awood qofkale isticmaashid

5. Qorshuhu waa
   - B. waa Aas aska keydsiga
   - T. waa salka/laf-dhabarka kartida waxqabad
   - J. isticmaalka iyo mareeynta wakhitig, in uu wakhti kalumin ayu kadhiga
   - X. Dhamman

## IV. Meelaha banaana ee soosocda/hoos kuqoran kubuxii ereyada ku habon

1. Caadooyinka keena balwadaha xuun waxa kamid ah ......................... iyo .........................
2. Fiicilada dibu dhaca ee keena israafka/keydsi la'aanta waxa kamid ah ......................... iyo .........................

## V. Suaalaha soo socda si kooban uga jawaaba

1. Deegaankiina casuumadaha iyo xafladaha lagasameeyo laba kamid ah qeex
2. Dhaqaanka keydisga maxay ka dhiigantahay?
3. Sheeg labo kamid ah Faaiidoyinka laga helo ku dhaqanka qorshaha

CUTUBKA 10

# Ka qaybgalka firfircoon ee Bulshada

Ujeedooyinka Cutubka

Kadib marka aad barashada cutubkan dhameeysatiid waxad awoodi doonta in aad:

- Garatiid macnaha ka qaybgalka dadweynaha ee firfircoon waxaa uu yahay.
- Falanqeysid/fahantiid faa'iidada uu horrumarka dalka u leeyahay ka qayb galka dad weynaha ee fir-fircoon.
- Garatiid muhiimada ay leedahay in bulshadu ka qayb qaadato hawlaha horrumarka, anshaxa, nadafada iyo maal galinta dugsiyada iyo deegaanka aan ku nool nahay.

## 10.1 Waa maxay Kaqeybgalka Firfircoon ee Dadweynaha



Jaantuska 10.1 Arday nadiifinayso dugsiga

- Sawirka kor ku xusan maxaad ka fahanteen?
- Ardeyda aad sawirka sare ku aragtiin hawshay Qabanayaan maxay u fulinayaan iyo sida u qabanayaan qeex?

### Is-Fahan la'aantii ka jirtey ardeyda fasalka shanaad ee "B" Dhigata

Ardeyda fasalka shanaad ee "B" Dhigata intooda badani xalada fasalakooda kuma aaney faraxsaneyn maadaama nadaafadii iyo hanaankii wacnaa uusan lahayn waxbarashada fasalku. Hadaba todobaadkii la soo dhaafay wakhti ay xiisadii ay u lahaaayeen macalinkii u dhigi lahaa si lama filaana u baagdey ayey ku heshiiyeen wakhtigan in ay uga faaideystaan ardeydan fasalku si uga wada tashadaan xaalada nadaafad-xumo ee fasalkooda. Kadib waxa bilabmey wada tashiga gabadh ka mid ah ardaydii fasalka oo layidhado Casha Qoosal oo marwalba ciyaar jecleyd islamarkiiba waxay ku sababsatey in ay xanuunsaneyso wayna iska baxdey sidoo kale walaalked olayidhado Mustafe isago iska dhigaya Qof caawinaya walaashii ayaa kadaba baxay balse Ardeydii fasalku wada tashigii way iska bilawdeen oo ugu horeyntiina waxaa Hadley liibaan iyo layla oo sheegay in ay todobaadadii la soo dhaafay in ay fasalka nadiifin jireen waxaaney filayeen in Ardayda kale fasalku Maalin is- xilqaanmi doonaan sidayada oo Naga nasindoonaan laakiin lanagama nasinin Aad iyo aadna waan uga xumaaney wanaaga saaxiiba fasalku nogala qaybgaadan waayeen Awgeed. Sidoo kale Ardeydii fasalku mid mid waxay Afkooda ugu qireen Arinta wanaagan ee Nadaafada fasalka in xumaatey mudadii ka dambeeysey markey layla iyo liibaan faraha ka qaadeen madaama lagaga dayen waayey wanaaga ay isku – xilqaameen taasina

waa dhibaato in aan sidooda kuligeen isku xilgaano oo aan fasalkeena nadiifino ay kuwada heshiiyeen waliba hadadan han iska nadiifino ayey yidhaahdeen shaqadiina way bilaabeen nadiifintii mawliid oo ka mid ah Ardeydii fasalka iyaa markiiba yidhii anigana dharkaa iga wasakhoobaya warla oo aan la shaqayneynin Ardeyda kale ayuu garab istaagey sidoo kale Ardey badan oo markii hore Afkooda ka qiray in ay shaqadan dantooda tahay diyaarna u ahaa in ay kala qoybgalidoonaan nadiifinta ayaa ku balan furay laakiin Ardeydii kale fasalkii way nadiifiyeen oo markii ay shaqada dhameeyeen ayey dib isku wada qiimeeyeen waxa waano loo soo jeediyey ardeydii aan kala qaybqaadanin nadaafadan fasalkoodo hada kadibna in ay si daacad ah ugala qaybgali doonaan ayey ku balan qaadeen sidoo kale waxaa ardeydii fasalku u sac'biyeen Layla iyo Liibaan oo wanaagan u horseedey. Dhamaadki hawlgalkas ardeydu badankood geedisocodkas aqoon waxbarasho oo waxkuola in ay ka heleen ayaa la xaqijiyeey

## Hawgal kooxeed

### Shaqo wadajirr (koox- koox) lagu soo qabanayo.

Qoraal Akhriska sare ku xusan Adoo raacaya su'aalan hoos Qoraal Akhriska sare ku xusan Adoo raacaya su'aalan Hoos ku xusan koox- koox jawaabta ku soo diyaariya (ka wada hadlo)

1. Ardeyda fasalka shanaad ee "B" Hawsha ay Qabteen ma shaqo looga baahnaabey ahayd? Sheeg Sababta?
2. Ardeyda fasalka shanaad ee "B "Markay hawsha qabanayeen majireen Qaarka mida ardeyda fasalka oo si hogar la'aan isku- xilqadmeyoo shaqda ka qaybqaatey iyo Qaar aanan waxba lagabanin Ardeyda?
3. Layla iyo liibaan is – xil qaanka Horaatii ay sameeyeen daadaalkoodii maxaad ku qiimeyn lahaydeen marka loo eego dhinaca ka qaybgalka firfircoon ee bulshada?

Hawlahan soo socda waa ficilo kala duwan oo ay ardeydu sameysey. Hadaba waxaad Hawlahan u kala saartaan (Qaybisaan) laba kooxood oo kala ah Hawlaha lagu fuliyey Qabtey ka qaybgalka firfircoon ee bulshada iyo kuwa aan lagu Qabanin ka qaybgalka firfircoon ee bulshada indinkoo jawaabihiinana sababeynaya soo diyaariya.

1. Horjoogaha fasalkayagu dhibaato kasta oo dhacda xoog (dirqi/khasab/ayuu in uu ku xaliyo isku dayijirey sidaadi darted intaan ka shirey Ayaan Horjooge kale ku dooraney cod into loo qaadey.
2. Ololihii dhirbeerista Dugsigayaga Naloogu yeedhey fasalkayaga Ardey badan ayaa Hawshaa soo Qabatey.
3. Horjoogaha fasalkayagu Waxa uu soo diyaariyey Xeer-Nidaameedkii fasalkagu isku maamuli lahaa kadibna markuu Noo Akhriyey Sucab lanagaga Ansixiyey.

Layliyadaan Hoos ku xusan intaad mid ka xulataan (doorataan) Ayaad Daraasad yar ku sameyneysaan indinkoo koox koox ah. Natiijada Daraasada Waxaad ku soo bandhigaysiin xiisadeena dambe baraha iyo saaxiibadiina fasalka.

